# WAA KAN ISLAAMKU

Aragti qotodheer oo la xiriirta
diimaha ugu kobaca iyo
faafitaanka badan caalamka





Waa masawir laga qaaday muslimiinta iyagoo hawada ku jira oo ku sii jeeda Kacbada uu Ilaaheey amarka ku siiyey Ibraahiim inuu dhiso, muslimiintana uu faray inay xageeda ula jeestaan salaadda meel Alla meesha ay joogaan.

THIS IS ISLAM

# WAA KAN ISLAAMKU

Aragti qotodheer oo la xiriirta diimaha ugu ugu kobaca iyo faafitaanka badan caalamka

Fahad Saalim Baa Hammaam

ح دار الدليل المعاصر للنشر والتوزيع ، ١٤٤١هـ

*فهرسة مكتبة الملك فهد الوطنية أثناء النشر*

باهمام ، فهد بن سالم

هذا هو الإسلام – باللغة الصومالية. / فهد بن سالم باهمام – الرياض ، ١٤٤١هـ

١٥٤ ص ، ٢٢ X ١٥ سم

ردمك: ٠-٢-٩١٣٧٣-٦٠٣-٩٧٨

١- الاسلام – مبادىء عامة أ.العنوان

ديوي ٢١١ ١٤٤١/٤٠٧٦

رقم الإيداع : ١٤٤١/٤٠٧٦

ردمك: ٠-٢-٩١٣٧٣-٦٠٣-٩٧٨

**Nuqulka koowaad**
**2021**

Xuquuda waxaa iska leh shirkada
**(Daliilul Mucaasir)**



- **Miyaadan** danaynaynin inaad sawirka dhabta ah ka qaadato diinta inta ba Loogaga doodda badanyahay warbaahinta?...
- **Soo ma haboono** inaad si qoto dheer u ogaato mid ka mid ah diimaha oogu faafitaanka badan, dadkuna si dagdag ah u galaan, sida ay cadaynayaan tirakoobyo caalami ah...
- **Miyaadan** xiisaynaynin inaad wax ka ogaato dhaqamada dadka kale iyo waxyaabaha ay ka aaminsanyihiin noolasha iyo diinta iyo dunida nagu hareeraysan?....
- **Naftaada** ma siin kartaa fursad si aad uga hesho xog sugan diinta islaamka, ayadoo laga qaadanayo xogtaas ilo sax ah, dabadeedna aad u bandhigto xogtaas arigtadaada iyo caqligaaga?...

**Hadii aad arinkaa u aragto muhiim ama mid xiise leh, buugani wuxuu kugu caawin karaa waxaad rabto.**




**Xagee ka yimid Qur'aanku?** — 82

Waa su'aal macquul ah oo la is waydiin karo gaar ahaan marka laga sheekeenayo kitaabka muslimiinta ee barakaysan: ee Qur'aanka, iyo Muxammad (CS), hadaba maxay waajib noogu tahay inaan qaadano waxaa ay muslimiintu ka sheegayaan arinkaas? Miyaanaan xaq u lahayn inaan soo bandhigno su'aalo arinkaa ku saabsan?


# TUSMADA BUUGA


**Su'aalo maankeena ku wareega dhamaanteen…** — 12

- Diinta Islaamka
- Macnaha erayga Islaam
- Islaamku waa diinta nabiyada oo dhan

**Caalaminimada Islaamka** — 16

- Daryeelka deegaanku waa qayb ka mid ah iimaanka
- Diinta iyo aqoonta
- Islaamku wuxuu koobayaa dhamaan dhinacayada noolasha dadka
- Diinta wada xidhiidhka iyo iskaashiga

**Ka kaligii wax abuura …hala caabudo** — 30

- Nidaamka sayniska iyo nidaamka sharciga
- Baadarinimo Islaamka kama jirto
- Ma jiraa nidaam diimeed gaar ah oo Islaamka lagu galo?

**Maxay yihiin rusushu dhab ahaan?** — 38

- Adoonimada rususha
- Dhexdhexaadnimada meeqaamka rusussha
- Halka uu islaamku ka taaganyahay rusussha

**Halka islaamku ka taaganyahay Ciise (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)** — 42

**Waa kuma rasuulka Islaamku?** — 48

- Dulmar kooban oon ku baranayno rasuulka Islaamka Muxammad (CS)

**Muxammad waa rasuulkii Ilaahay sida ay u arkaan dadka daacada ah** — 54

Qaar ka mid ah qisooyinka rasuulka Muxammad iyo akhlaaqdiisa 60
- Hoos isu dhigid
- Naxariista
- Cadaalada
- Sabirkiisa iyo dulqaadkiisa
- Samafalka iyo deeqsinimada
- Aduunyada oo laga jeedsado
- Ballan ilaalin


Waxaa ka mid ah Muxammad (CS) hadaladiisii 70

Qur'aanka kariimka ah waa mucjisada Islaamka ee waarta 76
- Mucjisada ilaalintiisa
- Mucjisada fasaaxada iyo saamaynta nafta

Xagee ka yimid Qur'aanku? 82
- Tuhunno soo noqnoqonaya
- Maxayna u noqon Karin fiiro dheeri kaliya?
- Malaga yaabaa inuu Qur'aanku yahay buug hore oo dib loo habeeyay
- Arin taariikheed oo wax ku ool ah
- Suurada faatixada

Waa maxay cibaadooyinka Islaamka? 92
- Tiirarka Islaamka
- Maxay tahay kalifaada iyo imtixaanka?
- Salaada
- Sakada
- Soonka
- Xajka

Qoyska islaamka 108
- Islaamku wuxuu adkeeyay mabda'a guurka iyo samaynta qoyska
- Islaamku wuxuu siiyay qof kasta oo ka mid ah xubnaha qoyska ixtiraam buuxa, ama lab ha ahaado ama dhadig
- Islaamku wuxuu ku dadaalay inuu beero mabda'a qadarinta iyo xurmaynta aabayaasha iyo hooyooyinka, iyo in la ilaaliyo amarkoodana la yeelo inta ay noolyihiin
- Wuxuu faray in la ilaaliyo xuquuqda caruurta iyo gabdhaha iyo inay waajib tahay in cadaalad wax loogu qaybiyo looguna biilo
- Waxaa muslimka lagu waajibiyay xidhiidhinta qaraabada



## Qoyska islaamka

108

Waxaan dhihi karaa qoysas badan oo jira xiligan waxaa uun weeye koox dad ah oo haysta furayaal kala duwan oo hal guri leeyahay!



# Diinka iyo caqliga 134

Dadka qaar waxay u malaynayaan inuu diinku ka hor imanayo caqliga iyo nidaamka cilmiga, waayo diinku – sida uu arko- waa isha khuraafaadka iyo sheeko baralayda.


Maamuuska ay haweenku ku leeyihiin Islaamka — 114
- Waxaa ka mid ah tusalooyinka axkaamta ku saabsan ixtiraanka dumarka waxa soo soca
- Haween uu islaamku amray in la daryeelo
- Kama jiro islaamka loolan u dhexeeya lablka iyo dhadiga
- Xidhiidhka ka dhexeeya ninka iyo haweenayda
- Xidhiidka u dhexeeya ninka iyo haweenayda Islaamka dhexdiisa
- Xeerarka xidhiidhka u dhexaysa ninka iyo haweenayda ajnabiga ah
- Muxuu islaamku u jideeyay xijaabka markay haweenaydu hor joogto raga qalaad?

Dhaqanka islaamka ee cuntada iyo cabida — 124
- Doofaarka
- Khamriga iyo aalkolada
- Qur'aanku muxuu ka qabaaa khamriga?

Gafka iyo towbakeenka — 130

Diinka iyo caqliga — 134
- Waxyaabaha hor istaaga fikirka saxda ah sida uu Qur'aanku cadaynayo

Islaamku waa diinka nabadgalyada — 140
- Dadka miyaa lagu qasbay inay galaan diinka Islaamka?
- Islaamku waa diinta faafitaankeedu ugu dhaksaha badanyahay maanta

Islaamka iyo sida ay udhaqmaan muslimiinta qaar — 146
- Dhinac cusub



# Su'aalo maankeena kuwareega dhamaanteen...



## Qofkeebaan

Qofkeebaan noolashiisa waligii marna iswaydiinin su›aalahan:

Arintu waa sidee? Anigu yaan ahay? Xageen ka imid? Xageense u socdaa? Xageen ku danbayn doonaa? Maxaa looga gol leeyahay jirtaanka koonkan? Maxaa aduunyada la iskaga daalin hadii lagu danbayn geeri iyo ciid iyo baaba› ?

Waxay rumaysanyihiin muslimiinta iyo dadaka raacsan diimaha Alle soo dajiyay in hadii aan la rumaynin inuu jiro Alle dadka abuuray oo caadil ah, iyo inay jirto nolol kale oo loogu abaalgudi qofka wanaaga sameeya, oo lagu ciqaabi qofka xumaanta sameeya, ay noqonayso noloshu dhalanteed aan macno lahayn, iyo cadaab iyo xanuun aan waxb laga dheefaynin, iyo isbiimayn aan faaiido lahayn.

> Lama fahmi karo waxyaabaha iska hor imanaya ee noolashu leedahay, iyo murtida ku jirta noolasha qalafsan, iyo waxa saxda ah iyo waxa khaladka ah iyo silaca, hadii aynaan rumaynin Rabbiga wax abuuray ee wax maamulaya ee xikmada & garsoorka leh

Iyo in aan la fahmi karin waxyaabaha iska hor imanaya ee nolasha ka buuxa, iyo murtida ku jirta noolasha qalafsan, iyo waxa saxda ah iyo waxa khaladka ah iyo silaca, hadii aynaan rumaynin Rabbiga wax abuuray ee wax maamulaya ee xikmada & garsoorka leh, ee noolasha u yeelay dhamaad kadibna qof kasta u helayo wuxuu mudanyahay.

Markaa kaliya ayay waxyaabaha aan sida qotoda dheer u aaminsanahay, sida cadaalada , iyo jacaylka, iyo naxariista, iyo runta iyo dulqaadka noqonayaan wax dhab ah oo la taaban karo, oo uu loolanku iyo wax qabadku yeelanayaa macno iy dhadhan, oo uu sabirku yeelanayaa macaan.

Qur'aanka kariimka ah (waa kitaabka muslimiinta ee sharafta mudan) ayaa noo tilmaamaya arinkaa, Alle wuxuu nooga waramay dadka caqliga iyo fikirka leh, wuxuuna yiri: (waxay ku fikirayaan abuuritaanka cirarka iyo dhulka, oo dhahayaan Rabiyow waxan maadan u abuuran ciyaar, Adigaa xumaan ka hufan) (Aala –Cimraan: 191).

> Erayga Islaamka ee luuqadda carabiga wuxuu ka koobanyahay dhawr macno oo kusoo ururaya: isdhiibid, hogasho, hogaansamid, ikhlaas, nabadgalyo, iyo xasilooni.

## Diinta Islaamka

Diimaha aduunka ka jira badankood waxaa loogu magac daray qof ama ummad ama wadanka Ay diintaasi ka soo ifbaxday, tusaale ahaan diinta Masiixiiyada waxaa laga soo qaatay magaceeda nabi Masiix (Ciise) (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), diinta Yahuudiyada waxaa loogu magac daray qabiilka Yahuutha, Buudiyadana waxaa loogu magac daray aasaaseheedii buudaa, hinduusiyadana waxaa loogu magac daray hindiya, ..iwm

Islaamkase kuma abtirsado qof gaar ah, ama qabiil, ama isir, ama ummad, waayo ma aha mid u gaar ah ummad kaliya si loogu maga daro, mana aha mid uu samaystay qof gaar ah si loogu abtiriyo, balse waxaa lagu magacaabay kaliya ISLAAM

## Macnaha erayga Islaam

Markaan u laabano asalka erayga islaam ee afka carabiga, waxaan arkaynaa inuu leeyahay dhawr macno oo kusoo ururaya: isdhiibid, hogasho, hogaansamid, ikhlaas, nabadgalyo, iyo xasilooni.



Islmaaku waa in la isu dhiibo oo si buuxda loogu hogaansamo Rabbiga koonka abuuray, milkina u leh, iyo in laga xoroobo adoon loo noqdo cid aan asaga ahayn siday doontaba ha ahaato adoonimadaas.

Macnahan islaamka waxaa ku nuuxnuusaday aayadaha Qur'aanka.

Ilaahay wuxuu noo sheegay: in qofkii Ilaahay la qaabila qalbigiisa iyo xubnihiisa, oo isu dhiiba, una hogaansama wuxuu Ilaahay faray iyo wuxuu ka reebay, inuu qabsaday xadhigii badbaadada ee aan go'aynin, khayr oo dhanna uu ku liibaanay. (Luqmaan:22)

Hadaba islaamku waa in si buuxda Ilaahay adoon loogu noqdaa, loogana xoroobaa in la isu dulleeyo ama loo adoomoobo cid aan asaga ahayn, muslimkuna waa ka u badhaxtira cibaadadiisa, kuna nool nabadgalyo uu naftiisa ka dareemayo, kuna faafiya nabadgalyada dadka ku hareeraysan.

**Laakiin kaasi ma yahay waxay la yimaadeen rususha oo dhan?**

## Islaamku waa diinta nabiyada oo dhan

Qur'aanku wuxuu cadeeyay in ummadihii jiray xilliyadii kala duwanaa dhamaantood loo diray rasuul bara diinka Ilaahay, Ilaahay asgoo nabi Muxammad la hadlaya wuxuu ku yiri Qur'aanka: (annagaa kugu dirray xaq Adoo ah mid bishaaraynaya digayana, ummad aan qof u diga loo dirinna ma jirto) (faadir: 24).

Rusushu dhamaantood waxay layimaadeen diinka xaqa ah mana aha kuwa ku kalatagsan dhanbaalka iimaanka, iyo gundhigga xeerarka iyo asluubta.

Islaamka uu la yimid nabigii anbiyada lagu khatimay: Muxammad (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ka hor in ka badan kun iyo afar boqol oo sano, waa isla diinka ay anbiyada oo dhan la timid, wuxuuna muslimiinta farayaa inay rumeeyaan waxa ay rumeeyeen anbiyadii hore, sida Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, Muuse, iyo Ciise (Baqara: 136))

Waxaana in la sheego mudan in Qur'aanku nooga waramay dardaaranka nabi Ibraahim aabihii anbiyada uu u dardaarmay wiilashiisa, iyo sidoo kale daradaarankii nabi yacquub uu u dardaarmay wiilashiisa markii uu sakaraadkii qabtay, oo uu yiri: Ilaahay wuxuu idiin doortay diinka xaqa ah, ee ku sugnaada islaamka intay geeridu idiinka imanayso.(Baqara:132)

Hadaba diinkan wuxuu tix raac u yahay diinka anbiyada oo dhan, caqiidadu waa mid oo xaqiiqadeedu isma badalayso, laakiin waxaa uun isbadalku ku yimaadaa shareecada iyo faahfaahinta axkaamta, sida kolba ku haboon xaaladaha kala duwan ee xiliyada, ilaa laga soo diray rasuulkii rususha ugu danbeeyay muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) si uu oogu qeexo dadka oo dhan shareecadii soo gabagabaysay shareecooyinkii hore.

Qur'aankuna wuxuu cadeeyay in diinku uu yahay mid kaliya, oo ah islaamka, iyo in muranka dhniaca caqiidada ee u dhexeeya dadka raacsan diimaha Alle soo dajiyay inuu yahay badalida diintii Alle kaasoo ka fogeeyay waxa ay rusushu la yimaadeen. (Aala-cimraan:19).



# Caalaminimada Islaamka

## Waxayaabaha

Waxayaabaha la yaabka leh waxaa ka mid ah in uusan Qur'aanka ku soo aroorin ereyga (Carab) asagoo ku soo dagay luqadooda, rasuulkii Allena ayaga laga soo saaray, carabtana maanta waxaan arakynaa inay yihiin muslimiinta kuwa ugu tirada yar, waxaa weeye markii loo eego guud ahaan tirade muslimiinta wax ka yar 20%. dowlada ugu wayn dowladaha islaamkana waa indunuusiya oo ku taalla dhanka ugu shishaysa koonfur bari aasiya, muslimiinta laga tirada badanyahay ee hindiya oo kaliya ayay tiradoodu ku dhawdahay labanlaab tirada dadka dawaladda carabta oogu tirada badan.

Diinka Islmaaku wuxuu ula yimid naxariis iyo hanuunin dhamaan shucuubta caalamka, ee ku kala duwan dhaqnaka, isirka, caadooyinka, iyo wadamada, sida Qur'aanku uu xusayo: (waxaan kuu soo diray nabi allow waa uun inaad naxariis u noqot caalamka) (anbiya:107).


Wuxuuna Islaamku usoo bandhigay kala duwanaanta dadka aragti iyo qaab aan horay loo aqoonin, nidaam kalana lagu sheegin.

Bal aan u fiirsano dardaaranka Qur'aanka oo aan khusaynin carabta kaliya ama muslimiinta kaliya, balse ah mid ku wajahan aadamaha oo idil, isir kasta ama mad'hab kasta oo ay yihiin, Alle wuxuu Qur'aanka ku leeyahay: (dad yahow waxaan idinka abuurnay lab iyo dhadig, waxaana idinka dhignay shuucuub iyo qabiilooyin, si aad isu barataan, waxaa Ilaahay agtiisa idiinku qiima badan midka idiinku Alle cabsi badan, Alle waa mid cilmi badan oo xog ogaal ah). (xujuraat:13).

Sidaa ayuu Qur'aanku ugu nuuxnuuxsaday in dadka oo dhan isir kasta iyo midab kasta oo ay leeyihiin ka soo jeedaan Aadan iy Xaawo (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo in kala duwanaanta u dhaxaysa ayna ujeedadeedu ahayn in ay wax is dheeraadaan balse ay tahay in ay isku haybsadaan oo isku kaashadaan, oo uu yahay ka dadka wax dheer ee maamuus mudan qofka Alle caabuda ee ka baqa.

> Wuxuu Islaamku la yimid kala duwanaanta dadka aragti iyo qaab aan horay loo aqoonin, nidaamka kalana lagu sheegin.

Waxaa kale oo Qur'aanku nagu baraarujinayaa in kala duwanaanta midabada dadka iyo muuqaaladooda iyo luqadahooda iyo dhaqamadooda ay ka mid tahay nicmooyinka Alle iyo astaamihiisa iyo abuurkiisa la yaabka leh ee koonkan, wuxuuna ku xidhiidhiyay arintaa abuurka cirarka iyo dhulka taasoo tusaysa arintani culayska ay leedahay, wuxuuna sheegay in cida kali ah ee arintaa ku baraarugsan ay tahay dadka cilmiga iyo fikirka leh (Ruum:22)



**Muxammad waa rasuulka Islaamka**

«dad yahow Rabbigiinu waa mid, aabihiinu waa mid, qof carab ah waxba ma dheero qof aan carab ahayn, qof aan aan carab ahaynna qof carab ah waxba ma dheero, qof casna waxba ma dheero qof madow, qof madowna waxba ma dheero qof cas, aan ka ahayn Cabsida Ilaahay oo la isku dhaafo



**Heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha**

kaasoo qeexayay in dadku usimanyihiin xornimada iyo xuquuqda iyo maamuuska

630 — 1948



Halka 1948-dii si rasmi ah loogu dhawaaqay qodobkii u horeeyay uguna waynaa ee heshiiskii caalamiga ahaa ee xuquuqda aadamaha kaasoo qeexayay in dadku usimanyihiin xornimada iyo xuquuqda iyo maamuuska, intaa kadibna la bilaabay hirgalintiisa, Rasuulka islaamka ee Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxu arinkaa si cad u shaaciyay ka hor 1400 oo sano, wuxuuna daka u daah furay xilli cusub, marka uu yiri asagoo dadka u khudbaynaya: "dad yahow Rabbiguunu waa mid, aabihiina waa mid, qof carab ah waxba ma dheero qof aan carab ahayn, qof aan aan carab ahaynna qof carab ah waxba ma dheero, qof casna waxba ma dheero qof madow, qof madowna waxba ma dheero qof cas, aan ka ahayn Cabsida Ilaahay la isku dhaafo. (axmad 23489)

## Daryeelka deegaanku waa qayb ka mid ah iimaanka

Falsafadaha qaar baa u arka bini aadanka inuu yahay boqorka madaxa banaan ee aduunka, oo uu u maamuli karo sida ay dantiisa iyo rabitaankiisu tahay, ayadoo ayna jirin cid la xisaabtamaysa ama xakamaynaysa, xitaa haday taasi sababto waxyeelaynta qaybo ka mid ah aduunka, amase baabi'inta noocyo ka mid ah waxyaabuhuu Ilaahay abuuray, taa lidkeed halka falsafado kale ay u arkaan in bini aadamku uusan mudnaan gaar ah lahayn, oo uu ka mid yahay uun waxyaabaha malaayiinta ah ee Ilaahay abuuray. Hadaba islaamku suu u arkaa xidhiidkha uu bini aadamku la leeyahay aduunka?

Aragtida islaamka ee la xidhiidha bini aadamku la leeyahay aduunka waxay ku salaysantahay iimaan, iyo axkaam faahfaahsan oo maaraynaysa xidhiidhka uu la leeyahay dadka, iyo noolaha, iyo dhulka, iyo ilaha khayraatka.

Waxa u horeeya ee uu jaleecayo qofka baadhaya falsafada xidhiidkaas waxaa weeye: isu dheeli tirnaanta uu Qur'aanku cadaynayo, Ilaahay wuu maamuusay bini aadamka, oo wuu ka soocay noolaha kale, (Israa:70) wuxuuna u fududeeyay aduunka iyo waxyaabaha Ilaahay abuuray, si uu u dheefsado, oo uu u ilaaliyo (Ibraahim:32-33), marka bini aadamku ma aha kaliya nooc ka mid ah malaayiinta nooc ee Ilaahay abuuray, oon waxba la dheerayn, balse waa mid sharaf iyo maamuus la siiyay, oo loo fududeeyay dunida si uu u dheefsado. (Baqara:29).

Hasa ahaatee taa lidkeed wxuu Qur'aanku ku nuuxnuusaday inuusan bini aadanku ahayn boqorka madax banana ee aduunka, ee wuxuu rabo ka samayn kara, iyo in sharaftaas iyo darajadaas laga soocay iyo noolaha kale ayna xaq usiinaynin inuu aduunka haleeyo, oo uu ku tunto ilaha khayraatka, waayo Ilaahayga aduunka abuuray umbaa Iska leh, doorka bini aadamka iyo darajadiisuna waxay ku jirtaa kaliya inuu Ilaahay ooga dhigay aduunka korjooge, xaq u leh inuu dheefsado kana faaiidaysto, wuxuuna faray inuu ka shaqeeyo hormarintiisa iyo kobcintiisa, asagoon dhibaato iyo xumaantoona aan u gaysanin bini'aadanka, ama waxyaabaha kale ee Ilaahay abuuray.(Huud:61, Al-baqara:30).


Waxayna Shareecada islaamka dajisay boqolaal xeerar iyo talooyin faahfaahsan si ay u xakamayso xidhiidkha adag ee ka dhexeeya bini'aadanka iyo aduunka ku hareeraysan, waxaa talooyinkaa ka mid ah tusaale ahaan:

## 1. Daryeelka nafleyda

In badan oo ka mid ah odhaahyada Nabi muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) waxay ku baaqaysaa in la daryeelo xuquuqda nafleyda, waxayna cadaynaysaa in nafleyda oo loo samafalo laga helayo ajir badan, waxayna ka digaysaa in la dhibo, uguna goodinaysaa qofkii dhibaa ciqaabta Alle.

Halka ururkii ugu horeeyay ee daryeela xuquuqda nafleyda laga aasaasay ingiriiska sanadkii 1824-tii kaa soo lagu magacaabay ururka boqortooyada ee xuquuqda nafleyda, lana Soo saaray 1949 xeerkii u horeeyay ee casrigan danbe ee ku tilmaama ku xadgudubka nafleyda faldanbiyeed, islaamku wuxuu xaaraameeyay ku xadgudubka nafleyda ka hor 14 qarni, wuxuuna nabi Muxammad xusay tusaalooyin oo arinkaa ku saabsan: sida inay xaaraan tahay in nafleyda la gaajaysiiyo, ama la xanuuiyo, ama lagu xambaaro wax uusan qaadi Karin, ama loogu ciyaaro qaab dhib u keeni karta, ama xitaa laga garaaco wajiga! Iwm oo ah axkaamta ku qeexaan kutubta fiqiga islaamka.

Wuxuuna akhristuhu garan karaa ilaa heerka uu daneeyay islaamku in loo dhimriyo nafleyda markuu dul istaago hadalkii Nabi Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) asagoo dadka u sheegaya in haweeneey jidhkeeda ka ganacsanjirtay (wuxuu ka mid yahay waxyaabaha si adag islaamku u xaarintimeeyay) ay aragtay eey ku dhow inuu gaajo u dhinto, dabadeedna u beerjileecday xaaladiisa, oo ay siibtay kabteedii, oo ay ka buuxisay biyo ay ceelka kasoo saartay, kadibna eeygii bay waraabisay, markaasuu taa sababteed Ilaahay ayadna ugu danbi dhaafay. (Bukhaari:3280).




## 2. Daryeelka dhirta:

Islaamku wuxuu booriyay in la daryeelo dhirta iyo beerta, ama taasi qofka dantiisa ha ku jirto, ama danta dadka kale iyo noolayaasha dunidan ku nool.



Tusaale ahaan wuxuu Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) noo sheegay in qof alla qofkii wax beeraa, ama dhir wax tar leh talaala oo ay wax ka cunto beertaa ama dhirtaa: shinbir ama bini'aadan ama xayawaan ay noqonayso sadaqo (Bukhaari:2320).

Waxaa intaa dheer inuu nabigu ugu baaqay muslimka xiliyada xaaladu oogu xuntahay inuu ku dadaalo daryeelka deegaanka, iyo in dhulka lagu kobciyo beeritaan, xitaa haduu hubo qofku inuusan ka faaiidaysanaynin beertaa, wuxuu yiri nabigu: hadii ay qiyaamadu hada dhacdo (waa dhacdo koonka ka dhacda ta ugu wayn) oo midkiin uu gacanta ku hayo geed talaal yar waa inuu u dagdagaa talaalkiisa hadii uu awoodi karo si ay sadaqo ugu noqotaa (Axmad 12981).

Taa waxay ku tusaysaa in Nabigu ka dhigay cibaado dhulka camiritaankiisa iyo hormarintiisa xilliga xaaladu darantahay, oo arinkaa waxna hor istaagi Karin, si kasta oo uu u wayn yahay.

## 3. Daryeelka ilaha khayraatka

Islaamku wuxuu ku nuuxnuuxsaday in la ilaaliyo deegaanka, oo aan la dayicin ilaha khayraadkiisa, ama aan la xumaynin, wuxuuna dadka u keenay barnaamij dhamaystiran, oo ku salaysan mabda'a ah (ka hortagga ayaa ka horeeya daawaynta), waxaa ka mid ah barnaamijkaas: inuu adkeeyay daryeelka nadaafada qofka, iyo in la ilaaliyo ilaha kharaadka dabiiciga ah, oo si dhexdhexaad ah loo adeegsado, baabi'inta khayraadka ama halayntiisa wuxuu ka dhigay fal danbi ah. Waxaa ka mid ah arintaa tusaaleheeda:

- Islaamku wuxuu xaaraameeyay in lagu takri falo adeegsiga ilaha khayraadka dabiiciga ah, oo ay kow ka yahiin biyuhu, xitaa haduu u jeedo inuu ku cibaadaysto waysada (waa in la dhaqaa xubno gaar ah salaada ka hor).
- In laga reebay dadka awooda leh inay la kali noqdaan ilaha waxyaabaha dabiiciga ah taasoo dhib ku keeni karta dadka kale, wuxuu xarimay in lala kali noqdo biyaha (waa tusaalaha ilaha dabiiciga), iyo dabka (waa tusaalaha tamarta) iyo daaqa (waa tusaalaha cuntada). (Abuu daawuud 3477).

> Daryeelka deegaanka, iyo in laga qayb qaato ka nadiifintiisa dikhawga ama wasakhda waa qayb ka mid ah iimaanka sida uu leeyahay rasuulka Islaamka.

- Wuxuu reebay wax kasta oo dhib u keenaya deegaanka inagu hareeraysan, tusaale ahaan wuxuu reebay in lagu kaajo biyaha fadhiya, waayo way halaabayaan, iyo in lagu saxaroodo meelaha hooska leh, iyo jidadka, maadaama ay yihiin meelo dadku maraan, ama dadku ku nastaan markay socodka ama safarka ku daalaan.

Kuwaasi waa tusaalooyin yar oon kasoo qaadanay diin rasuulkiisu uusan u arkin deegaanka oo wasakhda laga nadiifiyo lagana qaado jidka waxa dadka dhibaya fal suuban oo kaliya, balse uu u arko inuu yahay qayb ka mid ah xaqiiqada iimaanka (Muslim35).

## Diinta iyo aqoonta:


Wuxuu ahaa ereygii Qur'aanka ugu horeeyay ee ku soo daga nabiga (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) (akhri), taasina ma ahayn wax kadis ku yimid, waxaa ku sugan Qur'aanka iyo odhaahyada rasuulka Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) inuu islaamku taageerayo dhamaan noocyada cilmiga ee dadka wax u taraysa Ilaa heer ay noqoto wadada uu muslimku u marayo raadinta cilmiga iyo aqoonta isla wadada janada uu ku gaadhayo, sida uu yiri nabigu (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): "qofkii jid qaada uu ku raadinayo cilmi Ilaahay baa oogu sahla jidka janada). (Muslim 2699).

Isbarbardhig la yaab leh ayuu Nabiga sharafta mudani ku cadeeyay odhaahdiisan: sida uu ooga fadli badan yahay qofka caalimka ah qofka u go'ay cibaadada waxay la mid tahay sida uu rasuulka Muxammad uga fadli badanyahay qofka dadka ugu fadli yar (Tirmidi2685).

Sidaa darteed islaamka ma soo marin dagaal u dhexeeya diinka iyo cilmiga sida diima kale ka dhacday oo kale, culumadana maxkamad looma soo istaajinin ra'yi ama aragti cilmiyeed ay qabaan, sida ka dhacday xiliyadii mugdiga ahayd ee ay yurub soo martay, balse taa lidkeed diinku wuxuu ahaa laambada cilmiga, iyo ka xoojinaya, ee dadka ugu yeedhaya inay bartaan oo ay baraan, masaajiduna waxay ahayd xarumaha cilmiga iyo aqoonta noocyadeeda kala duwan ee ay dadku ubaahanyihiin.

Markaa la yaabi mayno hadii ay culimada sayniska ee muslimiinta ah badankood ku bilaabeen noolashooda barashada Qur'aanka iyo xafidkiisa in barashada fiqiga, ka dibna ay taf ku noqdeen waxyaabahay ku Xeel dheeraadeen.

Wuxuu Ilaahay maamuusay caalimka dadka khayrka bara, wuxuuna saaray taajka sharafta, ilaa heer uu nabigu (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) dhaho: dhamaan wuxuu Ilaahay abuuray waxay u ducaynayaan qofka dadka kahyrka bara (Tirmidi 2685).



**Culimada sayniska ee muslimiinta ah badankood waxay ku bilaabeen noolashooda barashada qur'aanka, kaasoo u horseeday inay ku xeeldheeraadaan aqoonta kale.**

**Waxaa ka mid ah culumada Islaamka:**

1. **AL-KHAWAARIZMI** (790-850 BAQDAAD) waa caalimka xisaabta iyo injineeriyada iyo falaga, iyo aasaasihii cilmiga (aljabraha), kaasoo loo tarjumay kutubtiisa luqado kale, intaa waxaa sii dheer in erayada carabiga sida: (الجبر Algebra). iyo (الصفر Zero) ay sababtiisa ku gashay luqadaha laatiiniga.



2. **IBNU HAYTHAM** (965-1040 QAAHIRA) waa caalimka fiisigiska iyo injineeriyada, kaasoo ku xidhnaa masjidka (AZHAR) wuxuuna si wayn uga qayb qaatay cilmiga ku saabsan araga iyo iftiinka, waxaa loo tilmaamaa inuu lahaa aasaaskii samynta kaamarada, kuwa cilmi baadhista sameeya badankood waxay sugayaan in ereyga kaamara ee ku faafsan luqadaha badankood uu kasoo jeedo erayga carabiga ee ah (قمرة) kaasoo macnahiisu yahay: qolka iftiinka ee IBNU HAYTHAM uu curiyay.



3. **BAYRUUNI** (973-1048) caalimka wayn ee falaga, waanaa qofkii u horeeyay ee sheega inuu dhulku wareego, tilmaamayna cuf-isjiidadka dhulka (awooda dabiiciga ah ee dhulku wax kasta oo cuf leh kusoo jiito)





4. **AL-ZAHRAAWI** (936-1013) dhakhtarka qaliinka ee muslimka ah, kaasoo qaliinka horumariyay, xitaa uu curiyay oo uu ku sharxay buugaagta uu qoray boqolaal qalabka wax lagu qalo, buugaagtiisuna waxay noqotay il caafimaadka iyo qaliinka laga barto qarniyo badan, ayadoo loo turjumay luqado kala duwan.



5. **IBNU-SIINAA** (980-1037) oo xaga sayniskana loo yaqaano (Avicenna) waa dhakhtar iyo fayalasuuf caan ah, kaasoo kaga horeeyay dadkii xiligiisii noolaa qeexida cudurada iyo dawooyinkooda, wuxuuna baadhitaanadiisa caafimaad xooga ku saaray tijaabo cilmiyeedka, taasoo uu ku gaadhay natiijooyin wax ku ool ah, oon looga horaynin, oo ilaa maanta taala, waxaana arinkaa si cad looga arki karaa kitaabkiisa (AL-Qaanuun) kaasoo noqday buuga tixraaca ah ee barashada caafimaadka ugu muhiimsan todobo qarni, waxaana lagu dhigi jiray jaamacadaha yurub ilaa qarnigii todoba iyo tobnaad dhexdiisii.



Markii uu IBNU-SIINAA ku soo caanbaxay caafimaadka kadib wuxuu bukaanka ku dawayn jiray bilaash, asagoo muujinayo naxariis bini'aadanimo, iyo asagoo Ilaahay ugu mahad naqaya nicmada cilmiga iyo aqoonta.

6. **IBNU NAFIIS** (1213-1288 DIMISHQ) wuxuu ka mid ahaa culimada shareecada iyo fiqiga, isla markaana wuxuu ka mid ahaa dhakhaatiirta waawayn ee aduunka, ee ku xeeldheer cilmiga shaqada xubnaha, wuxuuna ahaa qofkii ugu horeeyay ee daah furay hab dhiska wareega dhiiga, si qoto dheerna u tilmaamay, wuxuuna dajiyay aragti cilmiyeedyo ku saabsan caafimaadka kuwaasoo ilaa hadda wax badan oo ka mid ah lagu shaqeeyo.





## Islaamku wuxuu koobayaa dhamaan dhinacayada noolasha dadka

Dad badani way yaabayaan markay ogaadaan in islaamku uusan ahayn kaliya cibaadooyin iyo talooyin guud oo akhlaaqda ku saabsan, sida ay ku yaqaaneen diimaha kale badankood.

Hadaba islaamku dhab ahaantii ma aha kaliya wax ay ruuxdu ubaahantahay ama duco iyo salaad ay muslimiintu ku sameeyaan masaajida.

Mana aha kaliya caqiido iyo falsafad ay rumaysanyihiin dadka raacsan qudha.

Mana aha kaliya nidaam dhaqaale ama deegaan oo dhamaystiran.

Mana aha kaliya xeerar iyo aragtiyo laga dhiso nidaamka iyo bulshada.

Sidoo kale ma aha xirmo akhlaaqda iyo anshaxa ah oo lagula dhaqmo dadka kale.

Balse waa hab dhamaystiran oo ku saabsan dhamaan dhincyada kala duwan ee noolasha, isla markaana ma xayirayo xorriyadda dadka laakiin wuxuu ufududaynayaa noloshooda, si ay xooga u saaraan wax soo saarka iyo dhismaha iyo ilbaxnimada, wuxuuna ka mid yahay nicmooyinka waawayn ee Ilaahay ku galadaystay adoomihiisa, sida uu Qur'aanku cadaynayo (Maa'ido:3).

Marka uu ku yiri qof aan muslim ahayn – asagoo ku jeesjeesaya- mid ka mid ah asxaabta rasuulka suuban- magaciisu yahay Salmaan Alfaarisi-: saaxiibkiin ( wuxuu u jeedaa rasuulka Alle) wuxuu idin barayaa wax kasta xitaa aadaabta saxarada iyo kaadida? Wuxuu ku jawaabay saxaabigaa wayn: haa, wuu na baray, kadibna wuxuu u sheegay axkaamta islaamka iyo aadabtiisa ku saabsan arinkan. (Muslim 262).

## Ifka iyo aakhirada

Masaaridii hore ee xilliyadii fircoon jiray waxay marin jireen maydka maadooyin ka ilaalisa inuu qudhmo, kadibna waxay la aasi jireen hantidiisa qaaliga ah oo dhan, ayagoo u malaynaya inuu ubaahan doono hantidaas geerida ka dib.

> Islaamku waa hab dhamaystiran oo ku saabsan dhamaan dhincyada kala duwan ee nolasha.





Halka qoomiyada TIBT oo ka tirsan shiinaha ay jarjari jireen jidhka dadka ka dhinta, ayagoo u wadhaya shinbiraha iyo dugaaga, hinduuskana ilaa iyo hadda waxay gubaan qofka ka dhinta, ayagoo rumaysan inay sidaas ku badbaadinayaan naftiisa.

Kuwaasina waxay tusaalooyin kooban u yihiin dhaqamada kala duwan ee baroordiiqda iyo sagootinta maydka, taasoo dadku aad ugu kala duwanyihiin, ayagoo ka duulaya kala duwanaanta diimahooda iyo waxay ka aaminsayihiin noolasha ka danbaysa geerida, iyo waxay ka qabaan tiro su'aalo ah oo qoto dheer oo u baahan jawaabo, sida:

Ma jirtaa nolol danbe?

Waa sidee qaabkeedu?

Maxaase halkaa looga baahanyahay?

Maadaama geeridu tahay dhab dadku isku wada raacsanyahay inay dhamaanteen ina sugayso, ama aan aaminsanaano nolol danbe ama yaynaan aaminsanaanin, ama aan u diyaar garawno xiligaa ama aan islowsiino.

Su,aasha aan marnaba la iska dhaga tiri Karin, ee mar kasta qofku iswaydiiyo waxay tahay:

Ma jirtaa nolol geerida ka danbaysa mise ma jirto?

Jiritaankeenu ma ciyaar baa?

Waana su'aal kusoo noqnoqonaysa maskaxdeena, Qur'aankuna uu in badan siyaabo kala duwan ugu soo celceliyay, isla markaana nooga waramay shalaytada dad badan maalinta qiyaamo, waayo mayna ka fikirn jawaabta su'aashan, oo mayna isu diyaarinin geediga aakhiro, sidaa awgeed dadkaa qaar waxay odhan doonaan waqtigaa: alla hadaan naftayda ushaqaysan lahaa! Ku kalena wuxuu oran: alla hadii ciid aan ahaan lahaa!! (Fajr: 24, Naba': 40).

Sida la ogyahay dhamaan dadka haysta diimaha Allah soo dajiyay waxay rumaysanyihiin nolosha aakhiro, iyo abaalgudka iyo ciqaabta halkaa jirta, waayo arinkaasi waa nuxurka waxay rususha Alle oo dhan ay la yimaadeen, sidoo kale caqligu wuxuu ina tusayaa in aysan wax macno ah lahayn nolosha iyo diinta iyo akhlaaqdu hadaysan nolol kale oo la is xisaabinayo aysan jirin, oo markaa qof kasta abaalkiisa la siinayo khayr ama shar.

Hadana saasoo ay tahay waxay dad badani u malaynayaan in diinta iyo cibaadadu ayna la jaanqaadi Karin inuu qofku shaqaysto, ama raaxaysto, ama horumar sameeyo, oo ay tahay inaad aduunka iyo aakhiro mid uun u go'do, oo ayna marnaba labadaasi kulmi Karin halmar, sida ayna habeenka iyo maalintu u kulmi Karin.

> Dhamaan dadka haysta diimaha Allah soo dajiyay waxay rumaysanyihiin nolasha aakhiro, iyo abaalgudka iyo ciqaabta halkaa kajirta.

Dadka qaar waxaa ku adag inay rumeeyaan in teedka u dhexeeya cibaadada iyo raaxaysiga, ama cibaadada iyo Hantida uusan ka jirin caqiidada islaamka.. rasuulka suuban ee Muxammad wuxuu noo sheegayaa in qofku marka uu sameeyo wax sax ah wuxuu doono ha ku saabsanaado, oo uu ula jeedo khayr, in laga abaal marin falkaas aakhiro, xitaa hadii uu yahay qodax uu ka qaadayo jidka dadku maraan, ama uu yahay cunno uu afka u galinayo xaaskiisa! (Bukhaari 56).

Markii rasuulku Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu sheegay in albaabada khayrka ay badanyihiin oon lasoo koobi karin, wuxuu tusaale usoo qaatay arin ka yaabisay asxaabtiisa marka uu yir: hadii mid idinka mid ah uu xaaskiisa shahwada la guto waxaa loo qorayaa ajir, waxay dheheen asxaabtii: oo sidee ajir u heli asagoo shahwo gudanaya? Wuxuu yiri rasuulkii suubanaa: ka warama hadii uu shahwadiisa ku guto xaaraan miyaan danbi loo qoraynin, waxay dheheen: haa, wuxuu yiri: sidoo kale hadii uu shahwadiisa xalaal ku guto ajir ayaa loo qorayaa. (Muslim 1006).

Sidaa darteed qof kasta oo barta Islaamka wuxuu arkayaa marka u horaysa isu dheelitirnaanta noolasha aduunka iyo noolasha aakhiro siduu Qur'aanku tilmaamayo, isla waqtiga uu islaamku dadka ku boorinayo cibaadada si ay ajir u helaan aakhiro, wuxuu ku farayaa in ay ku dadaalaan aduunyada ayagoo raadsanaya deeqda allle (suurada Jumuca 9-10), wuxuuna dadaalkaa ku mudanayaa ajir maadaama uu ula jeedo falkiisaas Ilaahay, muslimkana waxaa la faray inuu Ilaahay ku caabudo dadaadlka uu ugu jiro shaqadiisa iyo raadinta arsaaqdiisa iyo tarbiyaynta caruurtiisa, iyo daryeelka caafimaadkiisa iyo deegaankiisa, iyo hormarinta bulshadiisa, sida uu Ilaahay ugu caabudayo salaadiisa iyo sadaqadiisa iyo soonkiisa.

Taasina waa mid ka mid ah sirta xasiloonida iyo nabadgalyada hoose ee uu muslimku dareemayo, marka uu arko wada jaanqaadka ka dhexeeya noolashiisa iyo aakhiradiisa, raaxaysigiisa iyo cibaadadiisa, oo aysan jirin wax iska hor imaad ah ama isdhaaf xagaa ku saabsan, balse uu yahay dhismo dhamaystiran oo is xoojinaya.

Wuxuuna Qur'aanku noo tilmaamayaa in halkudhagga muslimka ee kulminaya falsafada islaamka ee arinkaas, asagoo faraya inuu ku dhawaaqo halkudhaggaa: noolashayda oo dhan waa caabudida Alle, noocyadeeda kala duwan, Ilaahay ma laha kaliya salaadayda iyo cibaadadayda, balse dhamaan xaaladaha noolashayda oo dhan Ilaahay ayaan ugu dhwaan, asagaana iigu abaal gudi doona geeridayda kadib, sidaasaana ahaanayaa mid ku dhagan amarka Alle iyo diinkiisa islaamka (Ancaam: 162).





## Diinta wada xidhiidhka iyo iskaashiga:

Tilmaantii dalmarkii muslimka ahaa Axmad Bin Fadlaan uu tilmaamay qaybo badan oo ka mid ah ruushka iyo danimaark iyo dawladaha iskandaneefiyanka waxaa loo arkaa inay ahayd tilmaantii oogu horaysay ee caalamku helay ee falanqaysay qaab noolaleedka dadka iyo xaaladaha bulshooyinka wadamadaa.

Taasina waxay ku timi markii Axmad Bin Fadlaan oo u amba qaaday safar la yaab leh sanadkii 921-dii, safarkaasoo lagu tiriyo inuu ahaa mid ka mid ah safaradii xidhiidkhka ilbaxnimo ee qarniyadii dhexe, wuxuu ka baxay Axmad Fadlaan magaalada Baqdaad- oo ahayd xarunta aqoonta iyo ilbaxnimada xiligaas- wuxuuna soo maray wadamo badan iyo umado kala duwan, wuxuuna ku qoray waxyaabuhuu arkay iyo dhacdooyinkii uu goobjooga ka ahaa buug wayn oo la daabacay markii ugu horaysay sanakii 1923 ayadoo laga soo tixraacay nuqul gacanta ku qoran oo laga helay Ruushka.

Sababta uu qoraalka Bin Fadlaan uu qiimahaa u yeeshay waxaa ka faalooday aqoonyahanka maraykanka ah Michael Crichton oo yiri: muslimiinta Baqdaad ku nool waxay ahaayeen – ayagoo diinkooda ku dhagan- hadana kuwo u furan umado kale oo kaga duwan xag muuqaal iyo xag dhaqan iyo xag caqiidaba, waxay ahaayeen xiligaas umada oogu furfuran, oo wadankooda kaliya ku xidhxidhnayn, taasina waxay dhaxalsiisay inay u noqdaan korjoogayaal door ah dhaqamada qalaad. (Michael Crichton: Eaters of the Dead)

Wuxuuna Islaamku ku baaqayaa in dadka lala wadaago dhismaha iyo ilbaxnimada iyo hagaajinta, iyo in dadka lagu dhex galo oo lagula dhaqmo akhlaaq iyo usluub sare, ayadoo la tix galinayo dhaqamadooda iyo diimahooda kala duwan, wuxuuna ku baraarujinayaa in dadka oo laga dhexbaxaa oo aan la dhex galin ayna ahayn jidka saxda ah ee islaamka, sidaa awgeed Rasuulka Ilaahay ee Muxammad (Nabadgalyo korkiisa ha ahaate) wuxuu u arkaa qofka dadka dhexgala, ee u dulqaataa dhibkooda iyo gafkooda inuu ka wanaagsanyahay midka ka dhexbaxaa ee iskaga fogaada. (Ibnu Maajah4032).



# Ka kaligii wax abuura … hala caabudo



Qur'aanku

Qur'aanku wuxuu ku nuuxnuuxsaday isku dheelitirnaanta, isla xiliga uu dadka ku boorinayo cibaadada si ay ajir u heelaan aakhiro, wuxuu farayaa in ay ku dadaalaan aduunyada ayagoo raadsanaya deeqda Alle.

**Wuxuu ka dhiganyahay ereyga (Allah) ee luqada carabiga seddex macno oo kulansan:**


- Wuxuu ka dhiganyahay: midka la caabudo, ee ay dadku u keli yeelaan salaadooda iyo soonkooda, oo ay u jeediyaan qalbiyadooda iyo dhamaan cibaadooyinkooda.
- Iyo rabbiga ay wayntahay naftiisa iyo tilmaamihiisa iyo sharaftiisa, ilaa xad uu caqligu ku wareero waynidiisa oo uu awoodi kari waayo inuu koobo.
- Iyo midka ay qalbiyadu ku xidhanyihiin, naftuna u hiloodo, ee la weheshado xuskiisa, oo lagu macaansado u dhawaanshihiisa iyo caabuditaankiisa.

Quraaankuna wuxuu cadaynayaa in ay lagama maarmaan tahay in la saxo waxa laga aaminsanyahay, lagana sifeeyo khaladaadka iyo been abuurka meel ka dhaca ku ah waynida Ilaahay iyo hufnaantiisa.

Ilaahay – sida uu Qur'aanku noo qeexayo- waa allaha koonkan abuuray iyo habkuu ku shaqeeyo. Wax kasta oo oo dunida ka dhacayana- si kasta oo uu u yaryahay- Ilaahay baa abuuray, wuxuuana ku imanayaa doonistiisa iyo qadarkiisa iyo ogaanshihiisa, hadaba wuxuu Alle uumay oo dhan kiisa dhadiga ah uur ma qaado, mana dhasho asagoon Ilaahay ogayn, mana soo dhacdo dhibic roob ah, wax is badal ah oo muuqda ama qarsoon oo ka dhaca koonkan habeen ama maalin ma jiro oo uusan Ilaahay ku koobin ogaansho, awood iyo naxariis (Fusilat 47, Ancaam 59).

Ilaahayna – xumo oo dhan asagaa ka hufane- wuxuu leeyahay tilmaamaha kuwa oogu fiican ooguna dhamaystiran ooguna quruxsan, waa allaha awooda badan een laga adkaan Karin, naxariista badan oo ay naxariistiisu deeqday wax kasta, waana allaha wayn ee aysan sinaba ceebi haleelaynin.

Marka dadka qaar ay dheheen Ilaahay wuxuu ku abuuray cirarka iyo dhulka lix cisho kadibna wuu nastay maalintii todobaad ayuu Qur'aanku



Qur'aanku wuxuu cadaynayaa in wax kastaa uu ku dhaco ogaanshaha ilaaahay iyo awoodiisa, xataa dhibcaha roobabka iyo caleemaha geedaha ee soo dhacaya.



Arinta Islaamka oogu cad waa inay waajib tahay in Ilaahay loo kali yeelo cibaadada kaligii oon cid kale lala wadaajinin, taasina waxa ay ku baaqeen rususha oo dhan sida uu qur'aanku cadaynayo.

gaashaanka u daruuray odhaahdaas, wuxuuna si cad u yiri: (dhab ahaantii waxaan ku abuurnay cirarka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya lix cisho namana soo gaadhin wax daal ah). (Qaaf: 38). Odhaahdaas iyo wixii la mid ah waxaa sababay in Ilaahay lagu maseeyo waxa uu caqligu ka yaqaano waxyaabaha Ilaahay abuuray, hasa yeeshee Ilaahay waa ka wax abuuray wixii asaga kasoo hadhayna waa la abuuray, hadaba sidee wax la abuuray ugu ekaan karaa allihiisii abuuray (Ilaahay wax u eg ma jiro waana mid wax maqla waxna arka) (Shuura: 11).

Ilaahayna waa garsoore cadaalad badan dulmi oo dhan ka hufan, waxa aan nolasha ku arkaynana wuxuu noo muujinayaa falsuubanidiisa iyo naxariistiisa. laakiin marmarka qaar caqliga aadamaha ma garankaro xikmada Ilaahay ka leeyahay qaar ka mid ah waxyaabaha uu abuuray iyo maamulkiisa taasina waxay la mid tahay sida uusan ilmaha yari u fahmin Karin qaar ka mid ah falalka aabihii sameeyo, taasooy ugu wacantahay farqiga wayn ee xaga awooda fikirka ee u dhexaysa asaga iyo aabihii.

Islaamku kuma kaaftoomin arrinkaa kaliya marka uu cadaynayo in citiqaad kaligii ah oon cibaado la soconin in aan iimaanka lagu galin, hadaba hadii rabbiga abuuraha ahi yahay mid waana inuu noqdaa ilaaaha la caaabudo mid, mana bannana in la caabudo ama la baryo cid aan Ilaahay ahayn, balse waa in cibaadada loo kali yeelaa Ilaahay (Subxaanahuu wa tacaalaa) ayadoon cidna loo sii maraynin qof kale ama ergay, allaha abuuraha ahi wuu ka wayn yahay arinkaa.

Halka boqorka aduunka ama madaxwaynaha ayna usuuroobin inuu ogaado dadka taagta daran ama baahan , haduusan usii marin shaqaalahiisa iyo caawiyayaashiisa ka agdhow, kuwaasoo dadkaa baahan xogtooda siinaya si uu u caawiyo, ilaahaay (Subxaanahuu watacaalaa) wuxuu ogyahay waxa muuqda iyo waxa dahsoon, waana midka awoodda iyo kartida buuxda leh, koonka oo idilna gacantiisa iyo maamulkiisa ayuu ku jiraa, marka uu wax doonana wuxuu ku odhan: ahow, dabadeedna wuu ahaani, hadaba maxaan cid aan asaga ahayn wax ooga doonaynaa?

Qur'aanku wuxuu noo tilmaamayaa in xasiloonida qalbiga iyo raynraynta aysan ku dhamaystirmaynin haduusan muslimku magan galin rabbigiis asagoo baahidiisa Ilaahay u bandhigaya, waayo waa allaha wayn ee awoodda badan ee adoomihiisa jecel, una naxariista una dhow, kuna farxa baryada adoomihiisa ay asaga baryaan, oo maamuusa una abaalguda ayaga si u qalanta inta ay asaga magangalaan una hogaansamaan. (Baqara 28, Alnamal62-63).

Sidaa darteed waxay tahay arinta islaamka oogu cad in ay waajib tahay in Ilaahay loo kali yeelo cibaadada kaligii oon cid kale lala wadaajinin, taasina waa waxay ku baaqayeen rusushii oo dhan sida uu Qur'aanku cadaynayo, ma jiro rasuul iyo Malag iyo wali intay doonto ha gaadho suubanaantiisuye kaasoo loo weecin karo wax ka mid

ah baryada ayadoo lagu andacoonayo inay yihiin kuwo udhexeeya Ilaahay iyo adoomihiisa...waayo kuwaa dhamaantood Ilaahay baa abuuray waxayna uyihiin adoomo, Ilaahayna wuu udhowyahay adoomihiisa wuuna maqlaa hadalkooda, wuuna aqbali baryadooda marka ay asaga (subxaanahu watacaalaa) cibaadada u kali yeelaan.


Oo Sidee buuna u helaynin dhadhanka liibaanta iyo wehelka Alle qofkii Ilaahay kaliya qalbigiisa u jeediyaa, ma jiro jahawareer iyo khalkhal, waayo hantiiluhu waa mid, abuuruhu waa, mid ka la caabudayo waa mid, marka Ilaahay kaligii umbaa la magan gala, muraadkana laga dalbaa.

Kaasina waa macnaha suurad gaaban oo ka mid ah suuradaha ugu waawayn uguna magacdheer Qur'aanka, waxaa weeye suurada Ikhlaas.

### Suuradda ikhlaaska

Suuraddaas wuxuu Ilaahay ku farayaa nabigiisa inuu si cad ugu dhawaaqo sida asagoo ka jawaabaya su'aasha: Ilaahay waa kuma?

- In Ilaahay uu yahay mid aan cibaadada lala wadaagin.
- Ilaahay waa ka uunka oo idil uu isku haleeyo, oo uu u magan galo si uu u daboolo baahidooda.
- Wuxuuna ka hufanyahay inuu yeesho ilmo iyo inuu asaga ahaado mid la dhalay, balse waa midkii ugu horeeyay ee wax ka horeeya uusan jirin.
- Mana jiro wax u dhigma ama u eg laftiisa iyo tilmaamihiisa, waayo asagu waa uume wixii kasoo hadhayna waa wuxuu uumay.









## Nidaamka sayniska iyo nidaamka sharciga

Aduunka aan ku noolahay, laga bilaabo unuga yar ee jidhkeena ku jira iyo waxa ka sii yar, ilaa laga gaadho meerayaasha waawayn ee aad u fog, Ilaahay wuxuu ku abuuray qaab aad u sugan oo xeeldheer, iyo nidaam cajiib ah oo ayna la'aantii noloshu suubateen, culimada saynisku waxay cadaynayaan in aysan shaki ku jirin hadii wax yar oo is dhaaaf ah ku yimaado nidaamka koonku ku socdo ay taasi sababayso burbur iyo halaag.

Qofka Muslimka ahi wuxuu rumaysanyahay in Allihii abuuray habka caalamka ee la yaabka leh ee aadka u sugan uu yahay midka kaliya ee og sharciyada iyo xeerarka ugu haboon ee u suubada adoomihiisa .

Diinta uu jideeyayna waa nidaamka kaliya ee u suubada noolasha aadamaha, oo ay kaga badbaadi karaan in la isku xadgubo, Allah wuxuu yiri asagoo cadaynaya in Allaha abuuray dadka iyo caalamka uu yahay kan oogu ogaansho badan waxa usuubada: (miyuuna ogayn eebaha wax kasta abuuray ee wax kasta daalacanaya ee xog ogaalka ah) (67:14)

## Baadarinimo islaamka kama jirto



Waxaa la arkaa diimo badan inay siiyeen darajo diimeed gaar ah dadka qaar, taasooy kaga soocanyihiin dadka intiisa kale, waxayna diimahaasi ku xidheen dadka cibaadadooda iyo iimaankooda wadaadadaas ogolaanshahooda iyo raali ahaanshahooda. Dadka diimahaas raacsan waxay aaminsanyihiin in wadaadadaas ay yihiin kuwo u dhexeeya ayaga iyo Ilaahay, ayna yihiin kuwa ku deeqa danbi dhaafka, laga yaabana inayba ogyihiin waxa maqan, waxayna u arkaan in hadii laga horyimaado ay horseedayso ayaandarro cad!

Laakiin islaamka ma jiro gabi ahaanba shaqo lagu maga caabo nin diimeed, waayo islaamku wuu maamuusay biniaadamka, xurmadiisana sare ayuu u qaaday, wuxuuna ka xoreeyay awood diimeed u dhexaysa asaga iyo Alle, wuxuuna gaashaanka u daruuray in liibaanta dadka ama Alle unoqodkooda ama cibaadadooda ay ahaato mid ku xidhan dad gaar ah heer kasta oo ay ka gaadhaan wanaaga iyo suubanaanta.

Wuxuu sidoo kale bini-aadamka ka xoreeyay koox kasta oo sheeganaysa in cilmiga diinka uu ayaga u gaar yahay, oon lala wadaagin. waxaan ku arkaynaa Qur'aanka inuusan ka dhigin cilmiga diinka iyo fahanka Qur'aanka kaliya mid ay xaq u leeyihiin dadka oo idil, balse uu ka dhigay waajibaadka dushooda saran mid ka mid ah, oo wuxuu faray muslimiinta oo dhan inay akhriyaan Qur'aanka, oo ay fahmaan ooy ku fikiraan macnihiisa, kadibna ay ku dhaqmaan. (Saad:29).

> Islaamku wuu maamuusay biniaadamka, xurmadiisana sare ayuu u qaaday, wuxuuna ka xoreeyay awood diimeed oo u dhexaysa asaga iyo Alle, wuxuuna gaashaanka u daruuray in liibaanta dadka ama Alle unoqodkooda ama cibaadadooda ay ahaato mid ku xidhan dad gaar ah, heer kasta oo ay ka gaadhaan wanaaga iyo suubanaanta.



Cibaadada iyo iimaanka waa wax u dhexeeya bini-aadamka iyo rabbigiis,mana jiro qof udhaxayn kara adoonka iyo Ilaahay, waayo Ilaahay (SW) waa mid u dhow adoomihiisa oo maqlaya ajiibayana baryada adoonka, arkana cibaadadooda iyo salaadooda oo markaa ku abaalmarinaya, mana jiro qof xaq u leh inuu bixiyo danbi dhaaf iyo tawba aqbal, balse markii adoonku toobad keeno Ilaahay daacad u noqdo Ilaahay baa tawbadiisa aqbali una danbi dhaafi, Ilaahay wuxuu u dhowyahay dhamaanba dadka markii ay usoo jeestaan xagiisa oo ay baryaan, sida uu Alle ku yiri Qur'aanka: (hadii ay ikaa waydiiyaan adoomahayga anigu waxaan ahay mid dhow, waan aqbali baryada qofka ibarya markuu I baryo, ee ha i yeelaan oo ha I rumeeyaan, markaa waxay mudanyihiin inay hanuunaan) (Baqara:186).



> Qur'aanku wuxuu cadeeyay in Ilaahay u dhawyahay dhamaan dadka markii ay usoo jeestaan xagiisa oo ay baryaan.

### Ma jiraa nidaam diimeed gaar ah oo islaamka lagu galo?

Ma jiro nidaam adag oo islaamka uu ku galo qofkii ku qancaa, qasab ma aha inuu ku islaamo meel gaar ah, ama goob joog ka ahaadaan dad gaar ah, balse waxaa ku filan haduu doono inuu islaamka galo inuu ku dhawaaqo labada ashahaado asagoo og oo huba macnahooda, una hogaansan waxay tusayaan.

Labada ashahaado waxaa weeyaan: waxaan qirayaa inuusan ilaah jirin Ilaahay mooyaan (oo ka dhigan: waxaan qirayaa oon rumaysanahay inaysan jirin cid xaq lagu caabudo oon Ilaahay ahayn, waxaan caabudi asaga kaligii, cid cibaadada la wadaagtaa ma jirto)

Waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay rasuulkii Ilaahay (oo ka dhigan: waxaan qirayaa in Muxammad uu yahay rasuulkii Ilaahay uu u soo diray dadka oo dhan, anigoo yeelaya wuxuu farayo, kana fogaanaya waxuu ka reebayo, waxaana qirayaa inaan Alle ku caabudi si waafaqsan sharcigiisa iyo sunadiisa).



# Maxay yihiin rusushu dhab ahaan?



Ilaahay

Ilaahay wuxuu dadka u abuuray inay caabudaan, wuxuuna usoo diray rusul si ay u baraan sharciga ilaahay, ayna uxusuusiyaan diinkiisa diinkiisa, kana shaqeeyaan hagaajinta diinka dadka iyo aduunyadooda, una noqdaan ummadooda kuwo ay ku daydaan, kana hortagaan baadinimada, uguna baaqaan dadka jidka toosan, si ayna dadku ugu helin wax marmarsiiyo ah iimaanka oo laga tago, marka maxay tahay xaqiiqada Rusushaas?

### Adoonimada rususha:

Quraanku wuxuu ku cadaynayaa aayado badan in rusushu dhamaantood ay yihiin bini-aadan uu ilaahay ku gaar yeelay waxyi iyo fariin, marka ayadoon iskaga egnahay anaga iyo rusushu dhanka bini-aadanimada ayaa hadana waxay rusushu Kusuganyihiin meeqaam sare oo toosnaan iyo suubani ah, waayo ilaahay ayaa u doortay inay uqaadaan dadka fariintiisa iyo diinkiisa, sida Quraanka kusoo aroortay: (waxaad nabiyow dhahdaa waxaan ahay bini-aadan idinkoo kale ah waana la iiwaxyoodaa). (Al-kahf: 110).

Rususha oo dhan waa bini-aadan, waxaana loo dhalaa sida bini-aadanka loo dhalo, waxayna udhintaan sida bini-aadanku udhintaan, waxayna u xanuunsadaan Sida dadka, kagamana duwano dadka xaga samayska jidhka, iyo baahidooda.

Mana laha rusushu wax ilaahnimo ah, waayo ilaahnimada waxaa leh ilaahay kaliya, balse waa bini-aadan loo waxyoodo, oo waxaa soo gaadha amarka ilaahay asagoo usoo maraya malaa'igta ama siyaabo kale.

Umadihii hore waxay ka amakaageen waxyiga, ilaahay ayaana diiday amakaagooda, una cadeeyay inuusan daw ahayn, waayo waxyigu waa jidka lagu soo gaadhsiinayo dadka hanuunka alle iyo diinkiisa. (Yuunus: 2).

### Dhexdhexaadnimada meeqaamka rususha

Ilaahay wuxuu udoortay dadka kuwa ugu wanaagsan inay xambaaraan fariintiisa, hadaba rusushu waxaa weeye dad darajo sare kaga sugan toosnaanta iyo suubanida, Quraankuna wuxuu ku tilmaamay rususha oo dhan in yihiin kuwo hanuunsan, oo samafalayaal ah, oo suuban, oo la doortay, oo kasarreeya dadka kale oo dhan. (Ancaam: 84-87).

> Qur'aanku wuxuu cadaynayaa in rusushu dhamaantood ay yihiin bini-aadan uu ilaahay ku gaar yeelay waxyi iyo fariin.

Hadii uu mid kamid ah rususha uu gaf ku dhaco, ilaahay kuma daynayo, balse wuu baraarujin si uu uga soo noqdo, oo uga tawbad keeno, gafkaana waxaa sababi kara asagoo ku khaldama dadaal uu sameeyay, mana aha xadgudub ula kac ah oo uu kusamaynayo wuxuu ilaahay ka doonayo.

Sidaas xeesha dheer ayaan arkaynaa Qur'aanka oo utilmamaya anbiyada, asagoon kuna talaxtagaynin kuna takrifalaynin, ayaga waxaa laga gaashaamay danbiyada waawayn, sidaasooy tahay hadana ayagu waa bini-aadan oo ma aha ilaahyo ama ilaahyo wiilashood, mana laha wax kamid ah tilmaamaha ilaahnimada iyo rabbinimada.

Taana waxaa cadaynaya waxa uu Qur'aanku noo sheegay ee ah dooda dhici doonta maalinta qiyaamaha, si uu ilaahay umuujiyo in nabiga ilaahay ee Ciise (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu bari ka yahay caabudaadda ay dadka qaar isaga caabudeen: (marka uu ilaahay leeyahay: Ciise ina maryamow ma adigaa ku yiri dadka: iga dhigta aniga iyo hooyaday labo ilaah ood caabudaan ilaahay sokadii, wuxuu ciise oranayaa: ilaahayow adigaa xumaan kahufane, anigu gar uma lihi inaan dhaho waxaana xaq u lahayn, hadii aan sidaa iri adigu waad ogtahay, waayo adigu waad ogtahay waxa ii qarsoon aniguna ma ogi waxa kuu qarsoon, adigu waxaad tahay mid waxyaabaha maqan xog ogaal u ah, kuma dhihin dadka wax aan ahayn wixii aad ifartay oo ah: caabuda Ilaahayga ah rabbigay iyo rabbigiinba, waxaana ka ahaa markhaati muddadii aan dhex joogay, markii aad aduunka iga sii qaadayna adigaa ilaalinayay, adigaana wax walba marag ka ah) (Al-maaida:116).


> Wuxuu garanayaa qof kastoo Qur'aanka daalacdaa in qayb kamid ah suuradihiisa lagu magacaabay magacyada anbiyada, sida: Ibaraahim, iyo yuusuf, xitaa ilaahay wuxuu ku magacaabay suurad magaca Maryama oo ahayd nabi ciise (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) hooyadiisii suubanayd.

### Halka uu islaamku ka taaganyahay rususha:

Dadka qaar waxay u malaynayaan in Qur'aanku uu yahay kaliya sheekooyinka rasuulka ilaahay Muxammad (Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) iyo wararkiisa, laakiin way yaabayaan haday ogaadaan in Quraanku uu sheegay magaca nabi Ciise (Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) asagoo qadarinayo maqaamkiisa, kana fogaynay tuhunnada aan jirin 25 jeer, uuna sheegay magaca nabi Muuse (Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) 136 jeer, halka uusan sheegin magaca Muxammad Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) oo Qur'aanku ku soodagay wax kabadan 5 jeer oo kaliya.

Halka ayna hadda dadka diimaha kala duwan haysta badankood aqoonsanayn wax aan ahayn nabiyadooda, oo ay badhkood col u yihiin anbiyada kale, wuxuu arkayaa qof kasta oo Qur'aanka akhriyaa inuu aayado badan ku nuuxnuuxsaday inuusan qofku muslim noqonaynin ilaa uu karumeeyo dhamaan rususha, oo hadii uu beeniyo mid ka mid ah ama uu ka shakiyo inay sax tahay nabinimadiisa ama uu ku tuhmo waxaan jirin uu kabaxayo islaamnimada, Qur'aankuna wuxuu cadaynayaa in rasuulka iyo kuwa asaga rumeeyay ay rumaynayaan waxa ilaahay xagiisa ka yimid, sidaa darteed waxay rumaynayaan ilaahay iyo malaaigtiisa iyo rusushiisa, mana kala qaadqaadayaan rusushaas. (Al-Baqara: 285).

Wuxuu garanayaa qof kastoo Qur'aanka daalacdaa in qayb kamid ah suuradihiisa lagu magacaabay magacyada anbiyada, sida: Ibaraahim, iyo yuusuf, xitaa ilaahay wuxuu ku magacaabay suurad magaca Maryama nabi ciise (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) hooyadiisii suubanayd.





# Halka Islaamku kataaganyahay Ciise (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)

Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu kamid yahay shaqsiyaadka ugu muhiimsan taariikhda, wuxuuna kujiraa kuwii ugu waawaynaa ee khayrka u keenay aadamaha, dadkuna way isku khilaafeen waxa laga aaminsanyahay: dadka qaar waxay kadhigeen Ilaah, qaarna waxay kadhigeen wiilka rabbi, halka qaar kalena ay la coloobeen oo ay kubeen abuurteen ceebo iyo tuhunno aan waxba kajirin, hadaba muxuu yahay mawqifka islaamku ka taaganyahay Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)?




**1- Ciise wuxuu ka mid yahay rususha ugu waawayn:**

Qur'aanku wuxuu sugayaa in Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu kamid yahay rususha ugu waawayn uguna sharafta badan, iyo in hooyadii Maryam ay ahayd mid run badan oo khusuuc badan rabbigeed oo dhawrsoon oo la ilaaliyay, waxay qaaday uurka Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) aabo la'aan ilaahay awoodiisa, Ilaahaybaa ku abuuray si mucjiso ah sida uu u abuuray Aadam aabo iyo hooyo la'aan, sida uu ilaahay Qur'aanka ku yiri: Ciise waa mucjiso waaraysa, oo sida uu ilaahay u abuuray Aadam aabo iyo hooyo la'aan ayuu Ciise u abuuray aabo la'aan awoodiisa marka uu ku dhaho wax: ahow, wuu ahaanayaa, (tusaalaha Ciise ilaahay agtiisa waa sida Aadam wuxuu ilaahay ka abuuray ciid, kadibna wuxuu yiri: ahow oo wuu ahaaday) (Aala-Cimraan: 59).

**2- Muslimku wuxuu rumaysanyahay mucjisaadkiisa:**

Muslimku wuxuu rumaysanyahay mucjisaadka uu ilaahay siiyay Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), sida: daawaynta qofka baraska qaba iyo indhoolaha, iyo soonoolaynta dadka dhintay, iyo inuu ka waramo waxay dadku cunaan iyo waxay guryahooda ku kaydsanayaan , waxaasoo dhanna waxaa weeye ogolaanshaha ilaahay (subxaanahu watacaalaa) ilaahayna wuxuu arinkaa ka dhigay wax si cad utusinaya inuu ka runsheegayo nabinimadiisa.

**3- Waxaa lagu soo dajiyay kitaabka ilaahay ee maamuuska mudan Injiil:**

Qur'aanku wuxuu noo cadaynayaa in ilaahay uu kusoo dajiyay nabi Ciise mid kamid ah kuwa ugu waawayn kutubtiisa, waana Injiil, ayadoo dadka u ah hanuun iyo iftiin iyo naxariis, iyo in ay Injiisha kudhacday xiliyo kala duwan isdaba marmarin iyo macno qaloocin.

**4- Waa bini-aadan ee ma aha Ilaah:**

Islaamku wuxuu ku nuuxnuusanayaa in Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) yahaybini-aadan ka mid ah dadka, oo ilaahay ku galadaystay oo uu u diray yahuuda, oo ilaahay ka muujiyay mucjisooyin, oo uusan lahayn wax ka mid ah tilmaamaha Rabbinimada iyo Ilaahnimada, sida uu ilaahay ku yiri Qur'aanka: Ciise waxaa uun weeye adoon suuban oon u nimcaynay oo aan siinay mucjisooyin si ay astaan ugu noqdaan tolkii, oo ay ugu horseedaan khayrka" (asagu waa uun addoon aan u nimcaynay, waxaana uga dhignay tusaale yahuuda). ( Azukhruf: 59).

**5- Lama daldalin ee waxaa loo koryeelay cirka:**

Ciise sida islaamku u arko lama dilin lamana daldalin, balse Ilaahaybaa samada u koryeelay, oo markii ay cadawgiisu ay doonayeen inay dilaan wuxuu ilaahay saaray suuradiisii nin kale, oo wuxuu noqday mid u eg Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), markaasay ninkii dileen oo wadheen, waxayna u maleeyeen Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), balse Ciise waxaa loo koryeelay samada asagoo nool, sida uu Qur'aanka caddaynayo (Al-nisaa: 157-158).

## Geedka anbiyada:

Anbiyada ilaahay way badanyihiin, kuwan soo socdana waa kuwa oogu caansan (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

### Aadam:

Aabiha bini-aadanka, ilaahay wuxuu ka abuuray ciid, wuxuuna faray malaa'igta inay u sujuudaan, wuxuuna ka soo dajiyay janada oo wuxuu keenay dhulka.

### Nuux:

Tolkii ayuu diinka ugu baaqay, wayna ku gaaloobeen, kadibna waxaa lagu halaagay duufaan, wuxuuna ku badbaaday doon asaga iyo kuwii tolkii ka rumeeyay.

### Ibraahim:

Aabaha Anbiyada, waana mid kamid ah rususha ugu waawayn ee dadka ugu yeeray kaliyeynta Eebe, waana qofkii ugu horeeyay ee dhisa kacbada qiblada muslimiinta.

### Ismaaciil:

Waa ina Ibraahim (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu aabihii ku caawiyay dhisitaanka kacbada.

### Isxaaq:

Waa ina ibraahim (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu dhashay kadib markii ay malaai'gtu ugu bishaaraysay dhalashadiisa aabihii Ibraahim.

### Yacquub:

Waa ina Isxaaq (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) waxaana lagu magacaabaa ISraa'iil, waxaana ku abtirsada yahuuda.



### Yuusuf:

Waa ina Yacquub (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), wuxuu lakulmay jirrabaad, kadibna wuxuu noqday ugu danbaystii taliyaha Masar.

### Muuse:

Waa mid kamid ah rususha ugu waawayn, Ilaahay wuxuu usoo diray yahuuda, wuxuuna kusoo dajiyay Tawraad, wuxuuna ku taageeray mucjisooyin, Fircoonkii masarna wuu beeniyay, markaasuu Ilaahay ku halaagay badda, Ilaahayna wuxuu badbaadiyay muuse iyo cidii la jirtay.

### Daawuud:

waa nabi ilaahay boqor uga dhigay tolkii.

### Sulaymaan:

Waa ina daawuud (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee, waa nabi Ilaahay siiyay boqornimo wayn, oo Ilaahay u adeejiyay uun badan.

### Zakariya:


Waa mid kamid ah Anbiyada Ilaahay ee ka dhasahay yahuuda, wuxuuna ka ahaa mas'uul Nabi Ciise (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) hooyadii Maryama, wuxuu daryeelayay tarbiyadeeda iyo waxbariddeeda, Ilaahay wuxuu siiyay wiil, waa Yaxye asagoo da'a ah xaaskiisuna ay tahay madhalays.

### Ciise:

Waa mid kamid ah rususha ugu waawayn, Ilaahaybaa ku abuuray hooyadii aabo la'aan, Ilaahayna wuxuu u diray yahuuda (reer banii israaiil), wuxuuna ku soo dajiyay Injiil, wuxuuna ku taageeray mucjisooyin kala duwan.

### Muxammad:

Waa gunaanadihii Anbiyada, ilaahay wuxuu udiray dadka oo dhan, asagoo rumaynaya rususha ka horeeysay, wuxuuna ku soo dajiyay Qur'aanka, kaasoo uuna khalad ugaba iman Karin dhinacnaba.




# Waa kuma rasuulka Islaamku?



## Muxammad

Muxammad waa magaca nabiga Islaamka..

Waana mid kamid ah magacyada loogu isticmaal badanyahay caalamka maanta, macnihiisuna waxaa weeye midka ay dadku mahadiyaan kuna amaanaan akhlaaqdiisa iyo dhaqan suubandiisa awgeed.

Hadaba waa kuma Muxammad?

## Magaca rasuulka islaamku waa:

Muxammad cabdullaahi Cabdumudalib haashim oo ka dhashay qabiilka Quraysh.

Wuxuu noolaa intii udhexaysay 570-632 ee miilaadiga, muslimiintuna waxay rumaysanyihiin inuu yahay:

## Rasuulkii Ilaahay ee loo soo diray dadka oo dhan:

Ilaahay wuxuu u diray Muxammad (CS) dadka oo dhan si kasta oo ay ukala duwanyihiin isirkooda iyo noocyadooda, wuxuuna waajib dadka kaga dhigay inay adeecaan, Qur'aanku arinkaa wuxuu ka leeyahay: (dheh: dadyahow anigu waxaan ahay rasuulkii la idiin soo diray dhamaantiin) (Al-acraaf: 158).

## Waxaa lagu soo dajiyay Qur'aanka:

Ilaahay wuxuu kusoo dajiyay Muxammad (CS) kitaabkiisii ugu danbeeyay uguna waynaa: Qur'aanka, kaasoo uuna gaf meella kasoo gali karin.

## Waa gunaanadkii anbiyada iyo rususha:

Ilaahay wuxuu soo diray Muxammad (CS) asagoo ah gunaanadka anbiyada, ma jiro nabi ka danbeeya, sida uu Qur'aanku leeyahay: (hasa yeeshee waa rasuulkii Ilaahay iyo gunaanadkii nabiyada). (Al-axzaab 40).



## Dulmar kooban oon ku baranayno rasuulka islaamka Muxammad (CS):

### 1. Dhalashadiisa:

Wuxuu ku dhashay Makka oo ku taalla galbeeda jasiirada carabta sanadkii (570) ee miilaadiga, asagoo agoon ah, hooyadii waxay dhimatay asagoo da' yar, wuxaa ku soo barbaariyay awoowgii Cabdi-mudalib, kadib markii uu dhintayna waxaa soo koriyay adeerkii Abuu Daalib ilaa uu ka hanaqaaday.

### 2. Noolashiisa iyo barbaaritaankiisa:

Wuxuu ku dhex noolaa qabiilkiisa afartan sano nabinimada ka hor (570-609) miilaadiga, wuxuuna caan ku ahaa akhlaaq wanaag, toosnaan iyo suubani, waxayna ahayd naanaystiisa uu ku caanbaxay: runlawga amaanada badan, wuxuuna ka shaqeeyay xoolo raac, ka dibna wuxuu ka shaqeeyay ganacsi.

Wuxuuna ahaa rasuulka Ilaahay islaamka ka hor mid shirkiga ka fog oo Ilaahay ku caabuda diinka nabi Ibraahim, wuxuuna diidi jiray inuu caabudo sanamka, iyo waxyaabaha kale ee ay dadkii xiligaa caabudi jireen, asagoo aan waxba akhrinin waxna qorin.

### 3. Rasuulnimadiisii:

Ka dib markii da'diisu ay afartan jir noqotay asagoo fikiriya oo Ilaahay ku caabudaya godka Xiraa ee ku yaala buurta Nuur (oo ka mid ah buuraha Makka) ayaa waxaa xaga Ilaahay uga yimid waxyi, waxaana bilawday inuu Qur'aanku kusoo dago, wuxuuna ahaa Qur'aankii u horeeyay ee ku soo dagay hadalkii Ilaahay: (akhri adigoo kaashanay magaca rabbigaagii ku abuuray) (Al-calaq:1). Si uu shaaca uga qaado in nabinimadan ay tahay saban cusub oo dadka xambaarsan cilmi iyo akhris iyo nuur iyo hanuun, kadibna waxuu Qur'aanku si is daba joog ah usoo dagayay 23 sano.




**4. Bilawgii dacwadiisa:**

Rasuulka Ilaahay wuxuu bilaabay inuu dadka ugu baaqo diinka Ilaahay si qarsoon saddex sano, kadibna wuxuu muujiyay dacwada oo shaaca ka qaaday Makka toban sano oo kale, waxayna ahaayeen dadka raacsan intooda badan kuwa taagta daran iyo caydha ah sidii lagu yaqaanay dadka raaca rususha oo dhan, waxaana Makka kusoo foodsaartay rasuulka Ilaahay iyo dadkii rumaysnaa asaga cadaadiskii ugu darraa iyo dulmi xun oo kaga imanayay qabiilkiisa quraysh, markaa ayuu u bandhigay islaamka qabaaisha u imanaysa Makka xajka, dabadeed waxaa aqbalay reer Madiina, waxaana bilaabatay inay muslimiintu u hayaamaan Madiina tartiib tartiib.

**5. hijradiisii:**

Wuxuu nabigu u haajiray Madiina oo waagaa loo yaqaanay (Yathrib) sanadkii (622) miilaadiga, asagoo 53 jir ah, ka dib markii ay isku dayeen madaxdii quraysh ee dacwadiisa ka soo horjeeday inay shirqoolaan, wuxuuna ku noolaa halkaa toban sano oo uu islaamka ku baaqayay, wuxuuna dadka farayay: salaada iyo sakada, akhlaaqda wanaasan iyo shareeracada islaamka inteeda kale.







**6. Fidintiisa islaamka:**

Rasuulka Ilaahay markii uu madiina u hijrooday kadib (622-632) miilaadiga, wuxuu dhidibada u aasay xadaarada islaamka, wuxuuna yagleelay astaamaha bulshada muslimka ah, oo wxuu kansalay qabyaalada, wuxuu faafiyay cilmiga, wuxuu xoojiyay mabaadida garsoorka iyo toosnaanta iyo walaalnimada iyo iskaashiga iyo kala danbaynta, qabaaisha qaar ayaa isku dayay inay islaamka dabar gooyaan, dabeedna waxaa dhacay tiro dagaalo ah iyo dhacdooyin, Ilaahayna wuxuu u gargaaray diinkiisa iyo rasuulkiisa, ka dibna dadka ayaa si isdaba joog ah diinka islaamka usoo galay, reer Makka iyo magaalooyinka iyo qabaaisha jasiirada carabta ayaa islaamka iskood u soo galay, ayagoon la qasbin, oo ku qanacsan diinkan wayn.

**7. Geeridiisii:**


Bishii safar sanadkii (11) hijrada nabiga, kadib markii uu rasuulkii Ilaahay gaarsiiyay fariintii Ilaahay, oo Ilaahay u dhamaystiray dadka nicmadii diinka, nabiga (CS) waxaa ku dhacay qandho iyo xanuun culus, wuxuuna geeriyooday (CS) dharaartii maalin isniin ah bisha rabiicu awwal sanadkii 11 hijriyada, oo ku began 6/8/632 miilaadiga, asagoo 63 jir ah, waxaana lagu aasay guriga xaaskiisa caaisha oo ku yaalay masjidka nabiga dhinaciisa.





# Muxammad waa rasuulkii Ilaahay sida ay uarkaandadka daacada ah

Ma awoodi karo qof kasta oo daacad ah oon eexasho ku jirin – dhaqan kasta haka soo jeedee- hadii uu baadho qisadii nabi Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wax aan ahayn inuu la dhaco oo la ashqaraaro siiradiisaas qiimaha badan, sidaa darteed waxaan arkaynaa culimada iyo faylasuufyada iyo suugaanyahanada bariga iyo galbeedka inay arinkaa qirayaan, oo ay ku qorayaan buugaagtooda iyo qoraaladooda kale, waxaa taa ka mid ah:



**Wuxuu yiri Mahatma Gandhi:** waxaan doonay inaan barto tilmaamaha uu leeyahay ninkan hanta qalbiyada malaayiin dad ah…waxaan si buuxda ugu qancay in seeftu aysan ahayn jidka uu ku gaadhay islaamku maqaamkiisa, balse taasi waxay ku timid jajabnida rasuulka iyo toosnaantiisa iyo ka runsheegiisa ballamada, iyo hagarbixiisa iyo sida uu daacada ugu yahay asxaabtiisa iyo dadka raacsan, iyo geesinimadiisa iyo sida buuxda ee uu ugu kalsoonyahay rabbigiisa iyo fariinta uu xambaarsanyahay, tilmaamahaas waa kuwa u gogol xaaray , ee uu caqabadaha kaga talaabay ee ma aha seef, marka aan dhameeyay qaybtii labaad ee noloshii rasuulka waxaan ka xumaaday inayna jirin faahfaahin dheeraad ah oo wax badan kaga barto noolishiisa qiimaha badan).

(Collected Works. qaybta 25 bogga 127).


> «Waxaan doonay inaan barto tilmaamaha uu leeyahay ninkan hantay qalbiyada malaayiin dad ah…waxaan si buuxda ugu qancay in seeftu aysan ahayn jidka uu ku gaadhay Islaamku maqaamkiisa»
>
> Gaandi.



Kitaabkiisa caanka ah "boqolka nin ee taariikhda galay" wuxuu ku bilaabay **Maykal Hart** boqolkii nin: Muxammad (CS), wuuna cadeeyay sababta uu sidaa u yeelay oo wuxuu yiri: (sababta aan u doortay Muxammad inuu noqdo qofka ugu muhiimsan uguna wayn raga taariikhda galay waxaa laga yaabaa inay dadka wax akhriya ay ka yaabiso, balse waa ninka kaliya ee taariikhda oo dhan guusha uga saraysa ka gaadhay labada dhinac ee: diinka iyo dunida).

(The 100: A Ranking of the Most Influential Persons in History,bogga3).






**Gabayaaga faransiiska ee caanka ah Alfons Du Lamartin Wuxuu ku leeyahay buugiisa "taariikhda Turkiya":** (ujeedo samida iyo cudud yarida iyo natiijada oo ah mid wayn waa astaamaha seddexda ah ee ay leedahay raginimadu, hadaba yaa ku dhiiran kara inuu barbardhigo Muxammad ninkasto oo maamuus wayn ku leh taariikhda?). buugiisa:

(Histoire de la Turquie, juska koobaad bogga111).



**Wuxuu yiri faylasuufka hindiga ah (Ramakirishna):** (waxaa is badalay duruufihii, laakiin Muxammad isma badalin guusha iyo jabka, dheefta iyo dhibka, barwaaqada iyo baahida, waa isla ninkii iyo tilmaamihiisii ficnaa, sida Ilaahay uu qadaray nabiyada Ilaahay waa kuwo aan is beddelin.

Buugiisa: (Mhuhammad The Prophet of Islam: bogga24).




Wuxuu leeyahay gabayaaga ugu wayn jarmalka ee Gooteh asagoo naftiisa ka hadlaya warqad uu u qoray gabadh gacalisadiisa ah cadaynayana sida uu ula dhacsanyahay islaamka: (waloow aan todobaatan sano gaadhay, hadana marna hoos uma dhicin qadarinta aan u hayo islaamka, balse way sii waynaanaysaa wayna sii adkaanaysaa).

Waxaa sidaa soo tabisay Kataariina Momazn kitaabkeeda ay ka qortay Gooteh:

(Goethe und die arabische Welt, bogga 177).

**Wuxuu yiri barafasoor istoobaart**: (kuma jiro taariikhda aadamaha oo idil hal tusaale oo u dhow shakhsiyada Muxammad… aad bay u yarayd awooda la taaban karo ee uu haystay, hadana wuxuu la yimid halyaynimo aan ayadoo kale la arag, hadii aan taariikhda dhinac ka diraasayno ma helayno magac u iftiimaya una cadcad sida magaca nabigan carbeed).

(buugiisa: Islam and Its Founder bogga 227-228).



Wuxuu ku leeyahay saymoon okli (**Simon Ockley**) buugiisa taariikhda boqortooyada muslimka ah: (faafitaanka dacwada islaamku ma aha wax muta in lala yaabo, ee waxaa la yaab mudan jiritaankeeda iyo sugnaanshaheeda xiliyo dheer, ilaa hadda raadka wanaasan uu kaga tagay Muxammad Makka iyo Madiina sidii buu qurux iyo awood ugu leeyahay hindida iyo afrikaanka iyo turkida Qur'aanka ku cusub). Buugiisa: (History of the Saracen Empire, bogga45).

> **«Ilaa hadda raadka wanaagsan ee uu kaga tagay Muxammad Makka iyo Madiina sidii buu qurux iyo awood ugu leeyahay hindida iyo afrikaanka iyo turkida Qu'raanka ku cusub»**
>
> **Simon Ockley**



## Wuxuu leeyahay: wil Durant (Will Durant) buugiisa caanka ah ee: sheekada xadaarada

Hadii aan maqaam waynida aan ku xukumayno waxa uu qofka wayn raad ku reebay dadka waxaan leenayahay: Muxammad wuxuu ka mid yahay raga taariikhda ugu waawayn, wuxuu iska xilsaaray inuu sare u qaado heerka ruuxda iyo akhlaaqda uu leeyahay shacab uu kulaylka cimilada iyo abaarta saxaradu ay u horseedeen mugdiga cawaannimada, wuxuna oogu guulaystay hirgalinta ujeedadiisan si uuna ugu guulaysanin qof kale oo dadka hagaajiya taarikhda oo idil, wayna yartahay inaan helno qof aan asaga ahayn oo hirgaliyay dhamaan wuxuu hiigsanayay... wuxuu ahaa wadanka carbeed marka uu dacwada bilaabay lama dagaan abaar ah, oo ay dagto qabaail caabuda sanamka, oo ay tiradoodu yartahay oo aan heshiis ahayn, marka uu dhimanayayna waxay ahaayeen ummad midaysan, wuxuuna xakameeyay qabyaalada iyo khuraafaadka, wuxuuna ka oogay diinkii yahuuda iyo kiristanka iyo diinkii hore ee wadankiisa ka jiray diin fudud oo cad ee xoogan, iyo dhismo akhlaaqeed oo udubdhexaadkiisu yahay geesinimo iyo cudud wadareed, wuxuuna awooday hal jiil oo kaliya uu ku adkaado boqol dagaal, hal qarni gudihiina uu ku dhiso dawlad baaxad wayn, oo ilaa iyo hadda awood khatar wayn ku leh caalamka niskiisa" (The Story of Civilization. Qaybta afraad bogga 174).

> **«Hadii aan maqaam waynida aan ku xukumayno waxa uu qofka raad ku reebay dadka waxaan leenayahay: Muxammad wuxuu ka mid yahay raga taariikhda ugu waawayn»**
>
> **Will Durant**



Mid ka mid ahaa kuwa oogu daran cadawga Muxammad ayaa noo tabinaya sheeko la yaab leh kadib markuu islaamay, taasina waxay dhacday markii ay fariinta nabi Muxammad (CS) ay gaadhay Hiraqle oo ahaa boqorka ruum sanadkii (628) ee miilaadiga asagoo ugu baaqaya inuu islaamo, Hiraqle wuu la yaabay arinkaa, wuxuuna dalbaday in loo keeno nin ka yimid wadanka carabta oo aqoon u leh nabi Muxammad qaraabanimana ka dhexayso, Abu Sufyanna xiligaas wuxuu ganacsi u joogay sham, (waana mid ka mid ah madaxda quraysh ee gu cadaawad badan nabiga xiligaas), markaasaa loogu yeeray asaga iyo cidii wehelisay qasriga Hiraqle, wuxuuna Hiraqle waydiiyay asagoo looga tarjumayo su'aalo ay ku dheehantahay xikmad iyo aragti dheer, si uu u baadho in rasuulkan (CS) uu run sheegayo ama been, markii uu maqlay wuxuu kaga jawaabay Abu Sufyan su'aalihiisii, ayuu Hiraqle ku yiri Abu sufyan:

Waxaan ku waydiiyay abtirkiisa, waxaad ii sheegtay inuu reer sharaf leh ka dhashay, rusushuna sidaasoo kale ayuu Ilaahay ka soo saaraa tolkooda kuwa u sharaf badan, waxaana kuwaydiiyay: ma cid idinka mid ah aya asaga ka hortii nabinimo sheegatay? Waxaad tiri: maya, waxaan leeyahay: hadii qof ka horeeyay uu sheegan lahaa arinkan waxaan dhihi lahaa: waa nin ku dayanaya qofkii ka horeeyay.

Waxaan ku waydiiyay: miyaad ku tuhunteen been intuusan sheeganin nabinimada? Waxaad tiri: maya, waxaan ogaaday inuusan iska daayeen dadka inuu been u sheego kadibna uu Ilaahay ku been abuurto!.

Waxaan ku waydiiyay ma dadka sharafta leh ayaa raacay mise dadka liita? Waxaa tiri: dadka taagta daran baa raacay, kuwaasina waa kuwa rususha raaca, waxaan ku waydiiyay: miyay kordhayaan mise way yaraanayaan? Waxaad sheegtay inay kordhayaan, waana sida arinka iimaanka ilaa uu ka dhamaystirmo.

Waxaan ku waydiiyay: ma jiraa qof ridoobay nacayb diinka awgii ka dib markuu galo, waxaad tiri: maya, waana sidaa iimaanku marka ay raynrayntiisu ay dheehdo qalbiga.

Waxaan ku waydiiyay: dhagar ma sameeyaa? Waxaad tiri: maya, sidaasoo kale ayayna rusushu wax dhagrin.

Waxaan ku waydiiyay: muxuu idin farayaa? Waxaad sheegtay inuu idin faro inaad Ilaahay caabudaan oo aydaan cidna la wadaajinin, oo uu idinka reebo cibaadada sanamka, oo uu idin faro salaada iyo runta iyo dhowrsanaanta..

Hadii waxaad sheegayso run yahay wuxuu qabsan doonaa labada lugood meeshaan ku hayo, waana ogaa inuu soo baxayo laakiin ma moodaynin inuu idinka idin kasoo dhex bixi, hadii aan isleeyahay waad gaadhi kartaa waan isku taxalujin lahaa inaan la kulmo (Bukhaari 7).




# Qaar ka mid ah qisooyinka rasuulka Muxammad iyo akhlaaqdiisa



Wuxuu rasuulka Ilaahay (CS) tusaale u ahaa akhlaaqda ugu saraysa ee aadamaha, waxaana taa qiray dhamaan dadka daacada ah ee bari iyo galbeed jooga, xitaa dadka cadawga ku ah ayaa arinkaa qirsan, ilaa uu ka mutaysto inuu Qur'aanku tilmaamo akhlaaqdiisa inay tahay mid wayn.

Markii la waydiiyay xaaskiisa Caaisha –allaha ka raali noqdee- akhlaaqda nabi Muxammad mayna u helin tilmaan ka xeeldheer inay kaga waranto akhlaaqdiisa hadalkeedan: (waxay akhlaaqdiisu ahayd Qur'aanka), oo ka dhigan: inuu u ahaa tusaale la taaban karo ku dhaqanka tilmaamaha Qur'aanka iyo akhlaaqdiisa.

**Halkanna waxaan ku xusaynaa wax yar oo kaooban oo ka mid ah qisooyinkiisa iyo akhlaaqdiisa:**



## Hoos isu dhigid:

Rasuulka Ilaahay (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) qofna kama yeeli jirin inuu isu taago asagoo waynaynaya maqaamkiisa, iskaba daaye wuu ka reebi jiray asxaabtiisa inay arinkaa sameeyaan, xitaa ay asxaabtu ayagoo aad u jecel ayna u istaagi jirin haday arkaan asagoo soo socda, taasna waxaa keenay ogaanshahooda inuu arinkaa necebyahay (Axmad 12345).

Waxaa u yimid Cadi bin Xaatim intuuna islaamin ka hor, wuxuuna ka mid ahaa madaxda carabta iyo raga sharafta leh, wuxuu rabay inuu ogaado xogta dhabta ah ee dacwadiisa, wuxuu yiri Cadi: "waan u imid, oo waxaaba la jooga haweenay iyo caruuur ama ilmo- wuxuu sheegay sida ay nabiga ugu dhawaayeen- kadib waxaan ogaaday –buu yiri- inuusan ahayn sida boqorka Kisra iyo Qaysar" (Axmad19381). Hoos isu dhigidu waa akhlaaqda anbiyada oo dhan.

Wuxuu asxaabtiisa ula fadhiisan jiray sida asagoo ah mid ka mid ah, mana fadhiisan jirin meel ka soocan dadka ku hareeraysan, xitaa qofka ku cusub ee aan aqoonin hadii uu soo galo golaha uu fadhiyo nabigu uusan kala sooci Karin asaga iyo asxaabtiisa, markaasuu waydiin jiray: kiinee baa Muxammad ah? (Bukhaari 63).

Asxaabtiisa qaar ayaa ka warbixiyay in nabigu si kasta oo uu mashquul u yahay uusan diidi jirin inuu baxo si uu u fuliyo dadka danahooda iyo baahidooda si kasta oo ay u yaraato, waxaaba dhici jirtay inay timaado naag ka mid ah haween shaqaalaha madiina ka mid ah inay rasuulka Ilaahay gacanta qabato oo ay la aado meesha ay doonto si uu danaheeda ugu dhameeyo (Bukhaari 5724).

> Rasuulka Islaamka gacantiisa ayuu ku hagaajisan jiray waxyaabaha uu leeayahay, wuxuuna u adeegi jiray reerkiisa, oo wuxuu la wadaagi jiray shaqada guriga.

Wuxuu soo tabiyay saxaabiga wayn Cumar bin Khadaab inuu mar usoo galay rasuulka Muxammad, oo uu arkay raadka cawda ama darinta uu ku jiifay oo dhinaciisa raad ku reebtay, markaasuu ooyay, dabeed nabigii ayaa yidhi: maxaad la ooyday? Wuxuu yiri cumar: rasuulkii Ilaahayow: Kisra iyo Qaysar waxay ku jiraan raaxo, adigana rasuulkii Ilaahay baad tahay! Markaasuu ugu jawaabay: "oo miyaadaan raali ku ahayn inay ayagu aduunayada lahaadan, inaguna akhiro aan lahaano". (Bukhaari 3503).

Gacantiisa ayuu ku hagaajisan jiray waxyaabaha uu leeayahay, wuxuuna u adeegi jiray reerkiisa, oo wuxuu la wadaagi jiray shaqada guriga, markii xaaskiisa Caaisha la waydiiayay xaalkiisa marka uu guriga joogo, waxay tiri: "wuxuu ushaqayn jiray reerkiisa" (Bukhaari644). Waxay ujeedaa reerkiisa ayuu u adeegi jiray. Waxaa kale oo ay tiri Caaisha: "wuxuu u noolaa sidiina oo kale: wuxuu toli jiray kabihiisa, oo wuxuu kari jiray maradiisa" (Axmad 24749).

Wuxuu yiri (CS): "janada ma galayo qof ay qalbigiisa ku jirto wax yar oo kibir ah" (Muslim 91).

## Naxariista:

Wuxuu yiri nabigu (CS): "kuwa dadka u naxariista allaha Raxmaanka ah ayaa u naxariista, u naxariista dadka dhulka ku nool idinkana allaha samada jira ayaa idiin naxariisan" (Abu daawuud 4941).

**Naxariista nabiga (CS) waxay ka muuqanaysaa dhinacyo badan oo ay ka mid tahay:**

### U naxariisashada caruurta:

- Ayadoo ay salaadu tahay udubka islaamka, oo inta la tukanayo ayna banaanayn hadalo iyo dhaqdhaqaaq, hadana nabigu wuxuu tukaday maalin asagoo xambaarsan inanta uu awoowga u yahay ee Umaama ee ay dhasahay saynab, oo marka uu sujuudayo ayuu dhulka dhigayay, marka uu istaagana wuu xambaarayay (Bukhaari 494).
- Marka uu dadka tujinayo salaada hadii uu maqlo oohinta ilmo yar salaada ayuu dadajin jiray oo fududayn jiray, sida uu yiri nabigu (CS): "salaada ayaan bilaabi anoo doonaya inaan dheereeyo, kadib ayaan maqli cunug oohintii, markaasaan salaada soo gaabin, anoo neceb inaan hooyadii dhibo" (Bukhaari 675).



**U naxariisashadiisa dumark:**

- Nabigu (CS) wuxuu ummadiisa ku booriyay inay daryeelaan hablaha oo u sama falaan, wuxuu dhihi jiray: "qofkii la siiyaa hal gabar ama ka badan, oo tarbiyeeyaa una sama falaa, naarta ayay xijaab uga noqon" (Bukhaari5649).
- Wuxuu aad ugu nuuxnuuxsaday xaqa xaaska iyo danaynta arimaheeda iyo ilaalinta duruufaheeda, wuxuuna muslimiinta faray inay isu dardaarmaan arinkaas, oo wuxuu yiri: "khayr iyo samo isugu dardaarma xaga dumarka" (Bukhaari 4890).
- Sida uu reerkiisa ula dhaqmayay waa tusaalaha u quruxsan mucaamala wanaaga dumarka, xitaa wuxuu ag fadhiisan jiray awrkiisa oo lawgiisa ayuu dhulka dhigi, si ay xaaskiisa Safiya ay lugteeda u saarto lawgiisa oo ay ugu fuusho awrka (Bukhaari 2120).
- Marka ay u timaado inantiisa faadumo wuxuu qaban jiray gacanteeda oo wuu dhunkan jiray, ka dibna wuxuu fadhiisin jiray booska uu fadhiyo (Abuu daawuud 5217).

**Unaxariisashadiisa dadka taagta daran:**

- Nabigu (CS) wuxuu ku booriyay dadka inay koriyaan agoonka ooy biilaan, wuxuuna dhihi jiray: "aniga iyo qofka agoonka koriya janada sidaasaan kunahay" wuxuu fidiyay far murugstadata iyo far dhexeda wuuna kala yar durkiyay waxyar (Bukhaari 4998).
- Wuxuu ka dhigay qofka daryeela ee biila carmalida (garoobta) iyo miskiinka sida qof Ilaahay dartii u jihaaday oo kale, iyo qof maalintii sooman habeenkiina salaatu layl tukada oo kale (Bukhaari 5661).
- Wuxuu ka dhigay in loo naxariisto dadka tabarta daran oo la siiyo xuquuqdooda sabab lagu helo arsaaqda iyo cadawga oo laga guulaysto, oo wuxuu yiri (CS): "ii raadiya dadka taagta daran, waxaa la idiinku gargaaraa la idinkuna arsaaqaa dadka itaalka daran awgood" (Abu daawuud 2594).



"Nabigu Wuxuu ka dhigay in lasoo dhaweeyo dadka liita oo loo samafalo sabab lagu helo guul iyo arsaaq.

## Cadaalada:

- Wuxuu ahaa nabigu (CS) mid cadaalad badan, oo fuliya sharciga Ilaahay, xitaa ka lagu fulnayo haduu yahay qofka ugu dhow, asagoo u hogaansamaya amarka Qur'aanka: (kuwa xaqa rumeeyoow noqda kuwo u istaaga cadaalad oo ah marag eebe, naftiinaba ha ahaato ama waalidkiin ama qaraabo) (Al-nisa 135).
- Waxaa nabiga (CS) uu yimid mid ka mid ah asxaabta oo u ergeynaya haweenay sharaf ku leh tolkeeda oo wax xaday, si aan loo ciqaabin, markaasu nabigu yiri: "Ilaahayga naftayda ay gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye haday gabadhayda Faadumo Muxamad wax xado ciqaabta ayaan ku fulin lahaa" (Bukhaari 4053).
- Markii uu nabigu dadka ka xaareemayay ribada wuxuu ku bilaabay dadkii ugu dhowaa isaga, oo ka reebay ribadii, kaasina waa adeerkii Cabbaas, wuxuu yiri nabgiu (CS): "ribada u horaysa ee aan burinayo waa ribadii Cabbaas Cabdi Mudalib, dhamaantii waxba kama jiraan" (Muslim 1218).
- Wuxuu nabigu ka dhigay halbeega xadaaradaha umadaha iyo horumarkeeda in qofka tabarta daran uu ka qaato xaqiisa qofka xooga bada asagoon ka cabsanaynin oo aan labaclabacleenaynin , wuxuu yiri (CS): "Ilaahay danbiga kama maydho ummad uusan qofka taagta darani qaadanaynin xaqiisa asagoo aan labolabaynaynin" (Ibnu Maajah 2426).

## Samafalka iyo deeqsinimada:

- Nin ayaa nabiga u yimid, markaasuu waydiistay xoolo, dabeed nabigu wuxuu ku yiri: soo iibso waxaad rabto aniguuna dayn igu noqon oo bixin, markaasuu yiri saaxiibkii Cumar: rasuulkii Ilaahayow Ilaahay kuguma kalifin waxaadan awoodin, nabigu wuu dhibsaday arinkaa, markaasuu ninkii yiri: "wax bixi hana ka baqin inuu Ilaahay carshiga leh uu arsaaqda kugu yareeyo" markaasuu nabigu muusooday, oo ay wajigiisa farxadi ka muuqatay (Al-axaadiith Al-mukhtaara 88).
- Waxaa loo keenay sideetan kun oo dirham oo fiddo (qalin) ah, markaasuu dhigay gogol dusheed, kadibna wuu qaybiyay, oo qof wax waydiistay muuna celinin ilaa uu ka dhameeyo (Al-xaakim 5423).



## Sabirkiisa iyo dulqaadkiisa:

- Wuxuu ka soo baxay rasuulkii Ilaahay (CS) asagoo walbahaarsan magaalada Daaif (waa magaalo buuraleey ah oo Makka ka fog 90 kilomitir) ka dib markii uu magaaladaa u yimid si uu dadkeeda islaamka ugu baaqo, markaasay dhibeen oo ugu jawaabeen jawaabtii ugu xumeed, markii uu usoo noqonayay Makka oo ay joogeen tolkiisii soo bixiyay oo dhibay, ayaa Ilaahay usoo diray malag waydiinaya hadii uu rabo in la halaago reer Daaif, markaasuu yiri: "maya waxaan Ilaahay ka rajaynayaa inuu ka soo saaro dhabarkooda dad Ilaahay caabuda kaligii oo aan cidna la wadaajinin cibaadada" (Bukhaari 3059).
- Taa waxaa ka yaab badan mawqifkii uu ka qaatay reer Makka, kuwiika cayriayay wadankiisii, in badana ku dhibay carabkooda iyo seefahooda, oo aan waxba ula harin inay shirqoolaan asaga iyo cidii la socotay mudo dheer, balse markii uu yimid gargaarkii eebe, oo uu Ilaahay ku guuleeyay inuu furo Makka, oo uu gacanta ku dhigay dhamaan reer Makka wuu ka dhex istaagay asagoo dhahaya: "maxaad filaysaan inaan idinku samayn doono?" waxay dheheen: wanaag, waxaad tahay walaal fiican, waxaana ku dhalay walaal fiican, wuxuu yiri: "waxaan leeyahay sida uu yiri walaalkay yuusuf – wuxuu u jeeda nabi Yuusuf bin Yacquub markii uu cafiyay walaaladiisii dhibay ee ceelka ku tuuray, oo ku yiri: (maanta idin ciqaabi mahayo, Ilaahay ha idiin danbi dhaafo, Ilaahay waa kuwa naxariista ka ugu naxariis badan) (Yuusuf: 92) taga waxaad tihiin fasax" (Bayhaqi 18275).

> Ilaha taariikhdu waxay noo sheegayaan in rasuulka Islaamka uusan kaydsanin xoolo intuu noolaa.





## Aduunyada oo laga jeedsado:

- Wuxuu ahaa rasuulkii Ilaahay (CS) mid u hogaansan markasta odhaahda rabigii (SW): (ha utaagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay qaar dadka ka mid ah, waa quruxda nolasha adduun, si aan ugu fidnayno, risqiga eebahaa yaase khayr roon oo hadhid badan" (Dhaahaa: 131).
- Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nabiga waxaa usoo galay saaxiibkii Cumar allaha ka raali noqdee, wuxuu arkay asagoo ku jiifa caw ama darin oo ayna ka xigin furaash, oo ay cawdii dhiniciisa raad ku reebtay, markaasuu cumar yiri: gurigiisii ayaan kor u jaleecay, Ilaahay baan ku dhaartayee kuma dhex arag wax indhaha soo jiita, markaasaan idhi: Ilaahay bari in umadaada uu Ilaahay nolosha u ballaariyo, waayo faaris iyo roomaanku Ilaahay noolasha wuu u ballaariyay, oo waxaa la siiyay aduunyo ayagoon Ilaahay caabudeeynin, markaasuu yiri: "miyaad shakisan tahay Cumarow, kuwaasi waa umad loogu dadajiyay raaxadoodii noolasha aduunyo" (Bukhaari 2336).
- Wuxuu dhihi jiray nabigu: "aduunyo maxaan ku fali, waxaan ahay kaliya qof safar ah oo rukuub saran oo hoos hadhsaday geed, ka dibna ka caraabay oo isaga tagay" (Al-tirmidi 2377).
- Waxaa soo mari jiray bil iyo labo iyo seddex oo aan guriga rasuulka iaahay (CS) aan laga shidaynin dab wax lagu kariyo, oo waxay ku noolayeen timir iyo biyo kaliya (Bukhaari 2428), waxaa laga yaabaa in nabigu uu maalin dhan uu gaajaysnaado oo uusan helin xitaa timirta nooca xun oo uu quuto (Muslim 2977). Kama uusan dhargin sadex cisho oo isku xidhiidha muufada burka laga sameeyo, inta badan muufadiisu waxaa laga samayn jiray qamandi (Muslim 2976).

> Xaalka rasuulka Islaamka ee aduunka wuxuu la mid ahaa sida qof musaafir ah oo fariistay geed hoostii ka dibna ka dhaqaajiyay oo isaga tagay.



## Ballan ilaalin

- Ballanka oo la ilaaliyo wuxuu ka mid yahay akhlaaqda ugu saraysa uguna sharaf badan, wuxuu sii quruxsan yahay markii qof wanaag falay laga abaal marinayo ayadoo ayna jirin ballan adag oo labada dhinac udhexeeya, taasina waxay ahayd dhaqanka rasuulka Ilaahay, wuxuu samafalka dadka ugu abaalgudi jiray wax ka wayn, xitaa hadayna jirin ballamo iyo axdiyo arinkaa ku saabsan, maxay kula tahay hadaba hadii ay ballamo jiri lahaayeen?!
- Markii uu boqorkii kiristanka ee Hiraqle waydiiyaay gaaladii Quraysh tilmaamaha nabiga (CS) wuxuu yiri: miyuu wax dhagraa? Waxay ugu jawaabeen: maya, wuxuu yiri: sidaa umbayna rusushu wax udhagrin (Bukhaari 7).
- Wuxuu gaadhay heerka ugu saraysa ee lagu xusuusto laguna maamuuso xaaskiisii hore ee Khadiija, wuxu ilaalin jiray maqaamkeeda, wuxuu qiri jiray doorkeeda, wuxuu ku dadaali jiray inuu maamuuso qaraabadeeda iyo saaxiibadeed.
- Waxay Caaisha xaaskii nabi Muxammad nooga waramaysaa sida uu nabigu uxusi jiray xaaskiisii hore ee Khadiija taasoo dhimatay maalmihii uhoreeyay ee nabiga la soo saaray, Caai'shana maysan aqoonin Khadiija, waxay tiri Caaisha: nabigu (CS) kahadiija sheegitaankeeda ayuu badin jiray, waxaa dhici jirtay inuu neef ri ah gawraco oo uu xubnaheeda jarjaro, kadibna uu Khadiija saaxibadeed usii dhiibo, waxay tiri: marmarka qaar ayaan ku dhihi jiray: waxaad moodaa inaysan aduunyada joogin haweenay aan Khadiija ahayn? Markaasuu yidhi: "waxay ahayd ..oo waxay ahayd..." wuxuu sheegi wanaageeda (Bukhaari 3607)>
- Maalin ayaa waxaa u yimid wafdi ka socda Najaashi (waa boqorka xabashida xiligaa, wuxuuna magangalyo siiyay muslimiinta islaamka bilawgiisii) nabiga (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ayaa kacay asagoo ugu adeegaya wafdiga gacantiisa, markaasay asxaabtiisu ku dheheen: anagaa kaagaga filan, markaasuu yiri: "ayagu waxay maamuuseen asxaabtayda, aniguna waxaan jeclahay inaan u abaal gudo" (Shucab Al-iimaan 8704).

Wuxuu nabi Muxammad (CS) sameeyay tusaalayaasha u qurxsan ee akhlaada suuban ee taabanaysa dhamaan noolasha qaybaheeda kala duwan, asagoo hirgalinaya amarkii Ilaahay, kuna dayanaya anbiyada sharafta badan ee ka horaysay.

Masaajidka nabi Muxammad uu ka dhisay Madiina ama Madiina munawara sida ay muslimiintu ku magacaabaan, waana magaalada labad ee barakaysan ee soo raacda Makka, waxaa u hijrooday rasuulka Muxammad, wuxuuna ka dhisay masaajidkiisii, ayadaana lagu aasay, waxaa soo booqda maajidkan malaayiin muslimiin ah sanad kasta.





# Waxaa ka mid ah Muxammad (CS) hadaladiisii

Muslimiintu way ku dadaaleen soo tabinta hadaladii nabiga (CS) dhanka maqalka iyo qoraalkaba, waxaana ku tartama culimada iyo raga wax xafida inay si adag u qaybaan una tiifatiraan hadaladii nabiga, waxayna caalamka keeneen nidaam la yaab leh oo ku saabsan hubinta wararka, iyo sida lagu kala saaro waxa sugan iyo waxa aan sugnayn, xitaa weedhaha yaryar iyo ee ereyada, iyo waxa lagu daray ee aan ka mid ahayn,..

**Waa kuwan tusaalayaal ka mid ah axaadiista nabiga ee uu yiri rasuulkii eebe ee Muxammad:**

- "Falalka waxaa loo eegi uun niyada, qof kastana wuxuu leeyahay waxa uu niyaysto" (Bukhaari 1).
- Samuhu waa dabeecad wanaaga, danbiguna waa waxa naftaada ku noqnoqda oo aad nacdo inay dadku kugu arkaan (Muslim 2553).
- "Ilaahay ka cabso meel kasta ood joogto, xumaantana wanaag raaci wuu tirtiri e, dadkana kula dhaqan akhlaaqa wacan" (Tirmidi 1987).
- "Aduunyada ka jeedso Ilaahay baa ku jeclaan e, waxa dadka gacanctooda ku jira ka jeedso dadkaan ku jeclaan e" (Ibnu-maaja 4102).
- "Aniga iyo nabiyadii iga horeeyay waxaa tusaale noo ah nin guri dhisay, oo wanaajiyay oo qurxiyay markii laga reebo meel jaajuur la dhigo oo koono ah, dabeedna ay dadku bilaabeen inay ku gaaf wareegaan oo ay la yaaban, oo ay dhahaan: maxaad u dhigi wayday jaajuukan?! Wuxuu nabigu yiri: aniga ayaa ah jaajuurkaas oo waxaan ahay gunaanadkii nabiyada" (Bukhaari 3342).
- "Qofkii qof mu'min ah ka fayda murugo ka mid ah murugooyinka aduunyada Ilaahay baa ka fayda murugo ka mid ah murugooyinka maanta qiyaamo, qofkii qof caydh ah dayn ka fududeeya asna Ilaahay baa arimihiisa ufududeeya aduun iyo aakhiraba, qofkii qof muslim ah astura asna Ilaahay baa astura aduun iyo aakhiraba, Ilaahayna adoonka wuu caawin inta uu adoonku caawinayo walaalkii, qofkii qaada jid uu ku raadinayo cilmi Ilaahay baa ugu fududeeya jidka janada, .... Qofkii ay shaqadiisu gaabiso magaca tolkii ma dadajiyo" (Muslim 2699).



"Naga mid ma aha qofkaan u naxariisanin qofka yar, oo aan garanin xaqa qofka ka wayn" (Tirmidi 1920).





"janada ma galaysaan ilaa aad ka rumaysaan, mana rumaynaysaan ilaa aad is jeclaataan, ma idin tusaa wax hadii aad samaysaan aad is jeclaanaysaan? Salaanta dhexdiina ku faafiya" (Muslim 54).

- "Qofka iimaankiisu ma dhamaystirmo ilaa uu la jeclaado walaalkii waxa uu naftiisa la jecelyahay" (Bukhaari 13).
- "Qofka muslimka ahi waa ka ay muslimiintu ka nabad galaan carabkiisa iyo gacantiisa, qofka dar Ilaahay u hijroodayna waaka kafogaada wuxuu Ilaahay ka reebay" (Bukhaari 10)
- "Qofkii dulmiya qof aan muslim ahayn ama ku qasbaa wax awoodiisa ka baxsan ama ka qaataa wax uusan raali ka ahayn anigaa ayaa la doodi maalinta qiyaamo" (Abu daawuud 3052).
- "Kuwa naxiirsta Eebaha naxariista badan baa iyana u naxariisan, u naxariista waxa dhulka ku sugan, idinkana waxaa idiin naxariisan Allaha samada ku sugan" (Abu daawuud 4941).
- "Qofkii na khiyaameeyaa naga mid ma aha" (Tirmidi 1315).
- "Waxay la mid yihiin mu'miniinta sida ay isu jecelyihiin oo ay isugu naxariistaan oo ay isugu turaan sida hal jidh oo hadii ay xubin xanuunto jidhka intiisa kale ay ku dhici qandho iyo soo jeed" (Muslim 2586).
- "Dhamaantiin waxaad tihiin masuuliin, dhamaantiina waa la idin waydiin cida aad mas'uul ka tihiin, madaxwaynuhu waa mas'uul waana la waydiin cida uu mas'uulka ka yahay, ninkuna wuxuu mas'uul ka yahay reerkiisa waana la waydiin cida uu mas'uulka ka yahay, haweenayduna waxay mas'uul ka tahay guriga ninkeeda waana la waydiin waxay mas'uul ka tahay, dhamaantiin waxaad tihiin masuuliin dhamaantiina waa la idiin waxaad mas'uul ka tihiin" (Bukhaari 4832).
- "Mu'miniinta waxaa ugu iimaan badan qofka ugu akhlaaq fiican, waxaana idiinku khayr badan qofka idiinku roon dumarkiisa" (Al tirmidi 1162).


- “Waxaa idiinku khayr badan qofka idiinku roon reerkiisa, anigaana idiinku roon reerkayga” (Al tirmidi 3895).
- Ilaahay wuxuu jecelyahay in si dagan wax kasta loo maareeyo” (Bukhaari 5678)
- Waxaa kale oo uu yiri: “qofkii dhimrinta ka qatan khayrka wuu ka qatanyahay” (Muslim 2592).
- “Astaanta munaafiqu waa sedex: haduu sheekeeyo been buu sheegi, hadii uu wax balanqaadana wuu ka bixi, hadii la aaminana wuu khayaami” (Bukhaari 33).
- “Waxaa ka mid ah islaamnimo wanaaga qofka inuu ka tago waxaan waxba ka galin” (Al tirmid 2317).
- “Ayadoo uu nin jid hayo ayaa waxaa qabtay oon daran, dabadeed wuxuu helay ceel, wuu dhaadhacay wuu ka cabay ka dibna wuu soo baxay, waaba ey carabka laalaadinaya, oo ciida cunaya oon dartii, maarkaasuu yiri ninkii: eygan wuxuu oonku uqabtay sida uu aniga ii qabtay oo kale, markaasuu ceelkii u dhaadhacay oo uu kabtiisa (buudhka) kasoo buuxiyay biyo, markaasuu eygii waraabiyay, markaasuu Ilaahay ka aqbalay arinkaas oo uu udanbi dhaafay, waxay dheheen asxaabtii rasuulkii Ilaahayow xoolahana ma ajir baa lanooga qori? Wuxuu yiri: wax kasta oo leh beer qoyan ajir baan ku sugan in loo samafalo” (Bukhaari 2466).



## Siduu Qur’aanku u tilmaamay rasuulka Ilaahay ee Muxammad (CS)?

Wuxuu Qur’aanku noo muujinayaa dhinac la yaab leh oo ka mid ah dadnimada nabiga (CS), iyo sida uu ula falgali jiray dadka ku hareeraysan, taasoo ay ka muuqato dabeecadiisa iyo anshaxiisa iyo bin-aadanimadiisa:

- Nabigu wuxuu naxariis u yahay caalamka oo dhan (Al-anbiya 107) ee naxariis uma ahayn muslimiinta kaliya.
- Wuxuu leeyahay dabeecad fiican oo wayn (Qalam:4).
- Wuxuu aad isugu taxalujiyaa hanuuninta dadka wuxuuna aad uga murugoodaa baadinimadooda, ilaa marar badan looga cadeeyo in shaqadiisu ay tahay inuu dadka diinta ugu baaqo oo uu gaadhsiiyo, laakiin Ilaahay uu waafajin hanuunka cidii uu doono (Huud:12) (Al ancaam: 107) (Al kahf: 110).
- Wuxuu dadka u raadin marmarsiiyo, oo wuxuu iska indhatiri jiray gafafkooda (Al tawba: 43).
- Wuxuu Ilaahay waydiin inuu udanbi dhaafo cadawgiisa ilaa laga diiday arinkaa (Al tawba: 80).
- Waxaa dhiba waxa mu’miniinta dhiba, wuuna utirid badanyahay una naxariis badanyahay’ (Al tawba: 128).
- Waxaa laga yaabaa inuu dhibsado nagaanshaha dheer ay dadka qaar nagaanayaan gurigiisa, laakiin xishoodka ayaa udiidi inuu arinkaa usheego (Al axzaab: 53).
- Waa qof dabacsan oo qalbi nugul, oo asxaabtiisa ula dhaqma si jilicsan oo naxariis ku dheehantahay, wuu la tashan jiray, wuxuuna qaadan jiray taladooda xitaa markii xaalad xun ay jirto (Aala cimraan: 159).



# Qur’aanka kariimka ah waa mucjisada Islaamka ee waarta



Muxuu

Muxuu yahay Qur’aanka marar badan uhoreeya buugaagta oogu iibin iyo qaybin badan caalamka Oo ay rumaysanyihiin in ka badan hal bilyan iyo nus oo muslim ah?

## Qur’aanku waa kitaabka muslimiinta oo maamuuska leh, ee ay rumaysanyihiin inuu yahay:

- **Hadalkii Eebe ee uu kusoo dajiyay rasuulkiisa Muxammad (CS), si uu dadka ugu ahaado hanuun iyo nuur.**
- **Gunaanadkii kutubta samada Eebe ka soo dajiyay.**
- **Waxaa laga ilaaliyay doorin iyo khaldid.**
- **Ilaahay baa loogu dhawaadaa akhrintiisa iyo qaybidiisa, iyo sidoo kale axkaamtiisa iyo sharciyadiisa oo lagu dhaqmo.**

> Aayadii u horaysay ee soo dagta waxay ahayd (اقرأ باسم ربك الذي خلق) wuxuuna soo dagayay asagoo goos goos ah 23 sano gudahood kolba xaaladaha iyo dhacdooyinka jira.

Wuxuuna bilawday soo dagitaanka Qur’aanku asagoo soo maraya malaku Jibriil kadib markii uu nabiga u dhamaystirantay 40 sano, waxayna ahayd aayadii u horaysay ee soo dagta (akhri adigoo kaashanaya magaca eebaha abuuray khalqiga) wuxuuna soo dagayay asagoo goos goos ah 23 sano gudahood kolba xaaladaha iyo dhacdooyinka jira.

Qur’aaanku wuxuu u qaybsamaa 114 suuradood, oo kala mawduucyadooda iyo qaababkoodu ay kala duwanyihiin, laakiin dhamaantood waxay ka simanyihiin inay gaadheen heerka usareeya ee codkarnimada carbeed, oo ay dadka ugu baaqayaan hanuunka iyo in Ilaahay kaligii la caabudo.


### Waxaa ka mid ah dhinacyada uu Qur’aanku ka waramay:

1- Sugida kalinimada Ilaahay, iyo burinta waxay xujaysanyaan gaaladu.

2- Sheekooyinka nabiyadii hore iyo umadahoodii.

3- Baaq in lagu fikiro dunida balaaran iyo uunkan nagu hareeraysan, iyo sheegid qaar ka mid ah nicmooyinka Ilaahay nagu galadaystay.

4- Cadaynta sharciyada diinka iyo waxyaabaha la isfaray iyo waxyaabaha la iska reebay.



5- Cadaynta tilmaamaha mu’miniinta iyo akhlaaqdooda, iyo ka digidda tilmaamaha xun.

6- Xaalada maalinta aakhiro, iyo abaalgudka dadka samaha falay, iyo kuwa xumaanta sameeyay.

7- Mu’miniinta oo lagu tarbiyeeyo ka faaloonshaha dhacdooyinkii qabsaday nabiga (CS) iyo asxaabtiisa.

**Waxaa soo xiga wax yar oo ku saabsan astaamaha uu la gaarka yahay Qur’aanku:**



## Mucjisada ilaalintiisa:

Ilaahay wuxuu ku magacaabay gunaanadka kutubtiisa: Qur’aan, asagoo tilmaamaya inuu yahay mid la akhriyo oo laabta lagu qaybo, wuxuuna ku magacaabay aayado badan: (kitaab) asagoo tilmaamaya in la qoro oo lagu ilaaliyo qoraalka, Qur’aankana waa lagu ilaaliyay labada arimoodba, oo marka uu wax ka mid ah soo dago markiiba waxaa lagu qorayay nabiga agtiisa, afkiisana waa laga qaybayay, lamana aqbalayo markhaatiga kuwa Qur’aanka xafidsan ee ku saabsan Qur’aanka hadaysan waafaqin waxa qoran, lamana aqbalayo waxa qoran haduusan waafaqsanayn waxa laga qaybay rasuulka Ilaahay afkiisa..

Inkastoo ay qirayaan culimada diinka kiristanka in waxyaabaha iska hor imanaya ee is burinaya ee laga halayo injiisha ay tahay wax iska caadi ah oo la filayay maxaa yeelay waxaa kala duwan ilaha ay wax ka soo xiganayeen dadka injiisha qoray, iyo xiliyadii la qoray, waxaa intaa sii dheer waxyiga ay Injiishu ku timid oon ahayn mid toos ah, ayadoo ay culimadaasi u arkaan in injiishu ka koobantahay wax dadka hanuuniya.

Laakiin waxay tahay dhabta uu qof kasta oo daacad aihi qirayo in Qur’aanku uu ka madhanyahay wax iska hor imaad ah ama isburin ah, taasina waxaa ugu wacan waa hadalkii Eebe xaga ereyga iyo xaga macnahaba, kadibna waxaa laga xafiday lagana qoray nabiga suuban ee Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) afkiisa isla marka loo waxyooday, waxna kuma darin waxna kama jarin, muslimiituna si kasta oo ay ugu kala duwanyihiin xaga madaahibta iyo aragtiyada ma ayna isku khilaafin hal erey oo ka mid ah.



Si adag ayaa loo ilaaliyay Qur’aanka, oo wuxuu usoo tabiyay qarniba qarnigii ka dambeeyay heerka ugu sareeya ee xafidka iyo sugitaanka iyo si sax ah oo loo qoro, looguna dhawaaqo loona akhriyo looguna qaybo laabta, iyo si aad u xeel dheer oo loogu diiwaangaliyo masaaxifta, ayadoon laga jaraynin hal xaraf laguna daraynin hal shaqal, wuxuuna qof kastaa hali karaa inuu ka iibsado kitaab Qur’aan ah meesha Shiinaha u shishaysa iyo bartamaha afrika ama dunida dacaladeeda kala duwan, kadibna uu barbardhigo Qur’aanka gacanta lagu qoray kun sano ka hor ee laga helayo matxafyada caalamka, si uu u ogaado dhabta la yaabka leh, iyo in qaabka loogu dhawaaqo ereyadiisa ee loo akhriyo inayna waxba iska badalin, si kastoo xiliyadu iyo luqaduhu ukala duwanaadaan, waxaa isku mid ah inaad ka maqasho ilmo yar oo indunuusiyaan ah oo dusha ka akhrinaya manta, iyo inaad ka maqasho caalim muslim ah oo Makka ka akhrinaya cashirkiisa boqol sano ka hor, waxaa Qur’aanka kusoo arooray: (hadii uu ka iman lahaa Qur’aanku cid aan Ilaahay ahayn waxaa laga heli lahaa iskhilaaf badan) (Al nisaa: 82) la yaab ma leh taasi, waayo Ilaahay baa damaanad qaaday ilaalintiisa, oo wuxuu yiri: (anaga ayaa soo dajinay Qur’aanka anaga ayaana ilaalinayna) (Al xijr: 9).

## Mucjisada fasaaxada iyo saamaynta nafta:

Qofkii Qur'aanka si qoto dheer u akhriyaa wuxu arkayaa inuu Qur'aanku si toos ah ula hadlayo qofka akhrinaya, oo uuna ka joogsanaynin la hadlakiisa, waxaana taa kasii yaab badan inuu ka hor dhacayo afkaartiisa oo uu hagayo, waxaabad moodaa inuu akhrinayo afkaarta qofka inta uusan naftiisa ugu sheekaynin.

Inkastoo uu fanaanku awoodi karo inuu sawiro il umuuqanaysa inay daba galayso qofka eegaya meel kasta uu aado, laakiin say suuragal u noqotay in kitaab uu dabagalo qofka afkaartiisa oo saadaaliyo, oo ka jawaabo su'aalihiisa inta uusan sheegin marmarka qaar, ayadoo ay kala duwanyihiin dadka akhrinaya oo ayna isku dhaqan iyo duruufo ahayn!.

Qur'aanku wuxuu leeyahay habkaas la yaabka leh ee uu ku soo saarayo waxa qofka uurkiisa ku jira, banaakana usoo dhigayo sirihiisa, cadaynayana taagdaridiisa, taasoo laga yaabo inuu qofka akhrinayo marka uhoraysa ugu muuqdo qalafsanaan, laakiin Qur'aanku wuxuu toosinayaa uun nafta si uu uwaydiiyo caqliga iyo qalbiga su'aalaha uu in badan qofku dib udhigi jiray, oo ka carari jiray inuu ka jawaabo…

Marka uu qof inaga mid ah uu Qur'aanka akhriyo oo uu daalacdo sheekooyinka kooxo dadka ka mid ah iyo tilmaamahooda, oo uu u kuurgalo sida ay u fikir jireen iyo waxyaabaha ay ka duulayeen iyo sida qaarkood ubaadiyoobeen qaar kalena ay ubadbaadeen.. wuxuu qofku dib u eegi naftiisa asagoo isku dayaya inuu dib uxisaabtamo, ..hadana marka ay aayaduhu bataan iyo muuqaalada iyo tusaalooyinka ay xambaarsanyihiin oo ay si tartiib tartiib ah ay ugu soo dhawaadaan qalbiga asagoon dareemaynin, ilaa Qur'aanku uu nafta u noqdo muraayad muujinaysa xaaladeeda dhabta ah iyo ceebaheeda iyo waxyaabha ka dhiman, iyo waxyaabaha usuurooba iyo fursadaha ay haysato,… markaa Qur'aanku wuxuu si qoto dheer udhex gali qofka akhrinaya naftiisa ilaa ay ka gaadho inay qirto in Ilaahay kaligii yahay oo ilaah kale jirin.

Waxaad arkaysaa in qofka markii uu quus ku dhawaado uu akhrinayo (waxaad dhahdaa adoomahaygii naftooda ku xadgubayow haka quusanina naxariista Eebe, Ilaahay wuxuu dhaafaa danbiyada oo dhan, asagu waa danbi dhaafe naxariis badan) (Azumar: 53).

Marka uu dareemo wareer iyo walbahaar oo doonayo qof uu magangalo oo uu ku tiirsado wuxuu ka heli naxariis hadalka Ilaahay: (nabiyow hadii ay adoomahayga ikaa waydiiyaan, anigu waan dhawahay waana aqbali barayda markay ibaryaan, ee ha I maqlaan iyaguna hana I rumeeyaan si ay u hanuunaan) (Al Baqara: 186).

Marka ay qofka la noqoto in noolashii ay farihiisa ka baxday, oo uusan awoodin inuu u dhabaradaygo ama maareeyo geedi socodkeeda, wuxuu ka helayaa dawo caafimaad leh iyo taageero hadalka Ilaahay ee Qur'aanka (kuma mashaqeeyo Eebe naf waxay awoodo mooyee, waxay mudantahay waxay shaqaysatay oo wanaag ah, waxaana dusheeda ah waxay samaysay oo xumaan ah, Rabiyow hanoo qabanin hadaan halmaano ama gafno, Rabiyow hanagu xambaarin culays sida aad ugu xambaartay kuwii naga horeeyay, Rabiyow hanagu xambaarin waxaanan awood u hahayn, na cafina oo noodhaaf noona naxariiso, adaa gargaarahanaga ahe, nooga gargaar qaarka gaalada ah) (Baqara: 286).

Wuxuu qiray Will Durant oo ka mid ah taariikhyahanada xadaarada ee ugu caansan raadka Qur'aanka iyo darajada uu ku leeyahay dadka daacada ah dhexdooda (sheekada xadaarada: buuga 13, bogga 68-69), wuxuu yiri asagoo arinkaa ka faaloonaya:

"Qur'aanka waxaa rumeeyay dad badan oo ka mid ah raga cilmiga iyo fikirka leh kuwaasoo ku noolaa xilli kasta oo ka mid ah xiliyadii la soo dhaafay, iyo qarnigan aan ku noolnahay, sidoo kale waxaa rumeeyay Qur'aanka dad aad u badan oon la koobi Karin, oo ku kala duwan heerka ay ka joogaan caqliga iyo fikirka, taasina waxay ku timid Qur'aanka oo la yimid caqiido sax ah oo cad oo dadka oo dhan aqbali karaan… waa caqiidada ugu fudud, ooguna madmadow yar, kana fog nidaam dhaqameed aan macno lahayn, kana madaxbanaan sanam caabud iyo shaqo baadarinimo… islaamku wuxuu dadka baray inay u dhabar adaygaan dhibaatooyinka noolasha, oo ay udul qaataan imtixaanadeeda ayagoon wax cabasho iyo ka xumaansho ah samaynin… wuxuu Qur'aanku qeexay diinka oo si cad u tusmeeyay, taasoo keeanaysa in qofka kiristanka ah ama yahuudiga ah ee caqdiidada saxda ah haysta inuusan helin wax udiidaya inuu aqbalo. (sama falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorax kasoo bax iyo qorax u dhac, laakiin sama fale waa ruuxii rumeeya Eebe, qiyaamaha, malaai'gta, kitaabka (kutubta Alle), nabiyada, oo siiya xoolaha asagoo jecel qaraabada, agoonta, masaakiinta, musaafirka, kuwa baryootama, xoraynta adoomaha, oogana salaada, bixiyana zakada, oofiyana ballankooda, marakay ballamaan, samra (adkaysta) waqtiga saboolnimada, jirrada iyo dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay iimaankooda waana kuwa dhawrsada) (Al Baqara: 177).

> Wuxuu yiri Will Durant:
>
> "Qur'aanka waxaa rumeeyay dad badan oo ka mid ah raga cilmiga iyo fikirka leh kuwaasoo ku kala duwan heerka ay ka joogaan caqliga iyo fikirka, taasina waxay ku timid Qur'aanka oo la yimid caqiido sax ah oo cad oo dadka oo dhan aqbali karaan… waa caqiidada ugu fudud, ooguna madmadow yar».



# Xagee ka yimid Qur’aanku?



Waa su’aal macquul ah oo la is waydiin karo gaar ahaan marka laga sheekeenayo kitaabka muslimiinta ee barakaysan: ee Qur’aanka, iyo Muxammad (CS), hadaba maxay waajib noogu tahay inaan qaadano waxaa ay muslimiintu ka sheegayaan arinkaas? Miyaanaan xaq u lahayn inaan soo bandhigno su’aalo arinkaa ku saabsan?

Taariikhyahanadu iskuma khilaafsana in Qur'aanku ku sooo dagay nin carbeed, oo waxna akhrinin waxna qorin, oo ku dhashay Makka qarnigii lixaad ee miilaadiga, oo magaciisa la yiraahdo Muxammad bin Cabdilaahi...maragga taariikhda ee caanka ahna marag lamid ah ma jirto, sidoo kale waxaan si cad Qur'aanka uga akhrinaynaa inuusan ahayn wax uu Muxammad sameeyay, balse uu yahay hadal qiimo wayn oo xaga Alle uga yimid, shaqada Muxammadna ay tahay kaliya inuu gaadhsiiyo oo uu dadka u cadeeyo asagoon waxna ku darin waxnana ka jarin.

Hadaba suuragal ma tahay in Muxammad rasuulka islaamka uu asagu hal abuuray Qur'aanka, ama uu inta bartay waxa ku sugan kadibna uu ku cadeeyay erayadiisa sidaana uu dadka ugu soo bandhigay?

> Hadii uu doonayo rasuulka Islaamka inuu dadka siro oo uu awood iyo maamul ku yeesho asagoo u tiiranaya kitaabka inuu xaga alle ka yimid muxuu usheegan waayay in hadaladiisa oo dhan ay xag Alle ka yimaadeen?!.

Waa su'aalo la is waydiin karo, oo markiiba caqliga qofka ku soo boodi gaar ahaan haduusan daalacanin Qur'aanka, oo uusan dhiganin macaanidiisa, ama uusan aqoonin siiradii Muxammad iyo qisooyinkiisii.

Waxaan ognahay oo ay taariikhdu cadaynaysaa in wax badan oo suugaanyahano iyo kuwa wax qora ay ku xadgudbi jireen dadka kale hal abuurkood oo ay xadi jireen oo markaa sheegan jireen inay ayagu leeyihiin hal abuurkaa, hadaba sidee buu qof ugu tiirinayaa wax uu asagu hal abuuray cid kale?


Waxa in la is waydiiyo mudan waxaa weeye: hadii uu doono inuu dadka siro oo uu awood iyo maamul ku yeesho asagoo u tiiranaya kitaabka inuu xaga Alle ka yimid muxuu usheegan waayay in hadaladiisa oo dhan ay xag Alle ka yimaadeen?!.

Ma suuragal baa inuu intaa qoro oo uu hal abuuro kitaab, oo uu doono inuu sharaf iyo darajo ku gaadho kitaabkaas oo uu u tiiriyo xaga Alle, xilli aan ku arkayno meelo badan oo ka mid ah isla kitaabkaa si toos ah loogu canaanayo Maxammad, lana soo jeedinayo talo iyo khaladadiisa oo la saxo?

Qur'aanka- sida uu ogyahay qofkii akhriya- cid gaar ah oo uu canaanta ka ilaaliyo ma jirto, wuxuu nabi Muxammad ku canaantay oo uu kala taliyay arimo ku saabsan noolashiisa qoyska, sidoo kale wuxuu gaf ku tilmaamay qaar ka mid ah g'aamadiisa ku saabsan hogaaminta, iyo xitaa qaabkauu dacwada dadka ugu gudbinayo!.

Waxaa arinkaa ka mid ah: in nin indhoole ah oo ka mid ah asxaabta Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu nabiga u yimid asagoo ku mashquulsan dacwada nin ka mid ah madaxda quraysh oo uu quud darraynayay inuu soo islaamo, indhooluhuna ma ogayn inuu Muxammad ku mashquulsanyahay arinkaa, markaasuu u dhawaaqay: wax iga bar wuxuu Ilaahay ku baray, wuuna ku celceliyay hadalkaas, markaasuu nabigu wajiga tubay (cadho ayaa wajigiisa ka muuqatay), wuxuuna jeclaa inuu indhooluhu yara sugo inta uu ka dhamaanayo waxa uu ku jiro, kadibna Muxammad wuu ka jeedsaday indhoolihii oo muusan u jawaabin, Qur'aankuna arinkaa wuu sheegay oo ku waariyay taariikhda, wuxuuna utilmaamay arinkaas si faahaahsanoo xeeldheer, asagoo cadaynaya sida Muxammad uu wajiga u tubay marka uu indhooluhu u yimid, iyo inuusan u jawaabin, Qur'aanku intaa kaliya kuma istaagin, balse wuxuu raaciyay canaanta nabiga, iyo amar cad oo xoog badan inuusan arinkaas oo kale unoqonin, taasina waxay ku soo aroortay suurad loogu magacdaray dhacdadaas (Cabasa1-11) markaa wixii ka danbeeyay haduu indhoolihii u yimaado rasuulka Ilaahay wuxuu odhan jiray: (soo dhawoow, ninkii rabigay igu canaantay dartii) wuxuuna u fidin jiray go'iisa.

Qur'aanku wuxuu noo cadeeyay wax badan oo ka mid ah qisooyinka talada iyo canaanta loo soo jeediyay rasuulka kuwaasoo uu hadii lagu dhihi lahaa qof inaga mid ah dadka oo maqlaya uu ka xumaan lahaa marmarka qaar.... Hadaba ma qof baa faafin khaladaadkiisa sidatanna oogu qori buuga taariikhda, haduu naftiisa udoonayay maqaam iyo sharaf!.



Markale waatan taariikhda oo noo cadaynaysa in marar kala duwan Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ay soo martay xaalada adag oo uu jeclaa inuu waxyi ku soo dago si uu u sugo runtiisa iyo maqaamkiisa, ama in hufnaanta xaaskiisa, oo uusan waxyigu markaaba u imanaynin.

Waxaa ka mid ah arinkaa markii tolkiisii colka u ahaa ee dhibi jiray ay kaashadeen qaar ka mid ah culimada ahlukitaabka (yahuuda iyo kiristanka) si ay uga caawiyaan dagaalka ay kula jiraan Muxammad.

Markaasay u tilmaameen inay waydiiyaan sadex su'aalood, oo ay ku dheheen: haduu idiinka jawaabo waa nabi, haduuna idiinka jawaabinna ma aha nabi..sidii bay yeeleen, markaasuu Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ku yiri asagoo la loolamaya: barri baan idiin jawaabi...

Markaasuu waxyigii ka go'ay Muxammad maalmo oo uusan u imaanin, markaasay cadawgiisii soo mari jireen oo ay ku jeesjeesi jireen waayo muusan u jawaabin, Muxammad waxaa ku dhacay murugo daran arinkaa sababtiisa, Qur'aankuna wuxuu ku soo dagay shan iyo toban cisho kadib si uu su'aalahaas uga jawaabo, ayadoo ay la socoto talada Qur'aanku usoo jeedinayo Muxammad: ha dhihin adigoo go'aansan waxaas bari baan samyn, balse ku xidh arinka doonista Alle oo waxaad dhahdaa: hadii Ilaahay yiraahdo, dib ridida jawaabtadana Ilaahay baa wax kugu baraya (Al kahf: 24).

## Tuhunno soo noqnoqonaya:

Waxa layaabka leh wxa weeye in qisada Muxammad (CS) iyo noolashiisa ay noqon karto xujooyinka u cad oo tusinaya run ahaanshihiisa..

Say ugu suura gali kartaa nin aan waxna qorin waxna akhrinin oo ku dhex nool dad aan aqoon lahayn, oo la wadaagayay noolashooda oo tagayay golayaashooda aan xumaha lagu samaynaynin, kuna mashquulsanaa biilka naftiisa iyo reerkiisa, oo adhi ku raaci jiray kiro, oo aan xidhiidh la lahayn culumo , oo sidaa noolashiisa inta badan ku qaatay afartan sano oo dhamaystiran, uu halmar daqiiqad gudaheed uu kula hadlayaa waxayna horay u aqoonin, oo aabayaashood ayna ka maqlin, oo ooga waramayaa qisooyinkii ummadihii hore, iyo taariikhdii bilawgii abuurka uunka, iyo noolahsii nabiyadii hore oo faahfaahsan, iyo axkaamta shareecada ku saabsan dhinacyada noolasha ee kala duwan!...

Arintaas dhabta ah waxay ku ridday kuwii cadawga u ahaa Muxammad ee tolkiisa ka mid ahaa shoog iyo amakaag, markaaseey isku khilaafeen waxay ku tilmaamayeen waxa uu la yimid, hadaba maxay ahayd tuhunka ay suuragal tahay inuu meelmaro si dadka looga digo?

Waxaa adag in la iska dhaho Qur'aanka waxaa sameeyay Muxammad, waayo taas ma gali karto qof Qur'aanka akhriyay oo ufiirsaday, suuraglana ma aha inuu ka bartay qof kale, waayo wuu nala noolyahay, oo waan garanaynaa noolishiisa oo faahfaahsan...marka waxay ku tuhmeen waxyaabo lid isku ah, mar waxay dheheen wuxuu ka soo qaatay dadkii ka horeeyay, marna waxay dheheen asagaa been abuurtay, marna waxay dheheen wuxuu sheegayaa riyada uu hurdada ku arkay... haday awoodi waayayan inay arinkaa cadayn u helaanna waxay odhanayaan: waa sixiroole, ama gabayaa, ama nin waalan!.

> Sidaa oo kale dhamaan nabiyadii hore (CS), marka ay waayeen cadawgoodii wax ay ku tuhmaan waxay sheegteen inay yihiin sixiroolayaal ama kuwa waalan.

Waa isla sheekadii lafteeda magacyadu haba kala duwanaadaane....miyaan Muuse (CS) lagu tuhmin sixir? Miyaan Ciise (CS) lagu tuhmin waali?

Sidaa oo kale soo mayna qabsanin dhamaan nabiyadii hore (CS), marka ay waayeen cadawgoodii wax ay ku tuhmaan waxay sheegteen inay yihiin sixiroolayaal ama kuwa waalan, waana sidaa qofka markhaati beenaalaha ah hadii uu dareemo inuusan xujo haysan waxkasta ayuu iska odhan, oo waxaan jirin buu been abuuran, asagoo isleh waxaad heli meel aad cagaha dhigto, laakiin siduu ku heli?

## Maxayna u noqon Karin fiiro dheeri kaliya?

Dadku waxay isku raacsanyihiin in eebe ugu deeqay maskaxda aadamaha awoodo iyo hal abuur aan la qiyaasi Karin, laakiin miyayna gar ahayn inay jirto meel aysan dhaafi Karin garashada caqligu.

Ayadoo Caqligu uu qirayo jirtaanka eebaha koonka abuuray ee awooda leh, iyo in cadaaladiisu ay keenayso jiritaanka nolol kale oo oo qofkasta uu helayo abaalkiisa kahyr ama shar, laakiin caqligu awood ma uleeyahay faahfaahinta arinkaas daliil la'aan?





Qofka Qur'aanka dhugta wuxuu arkayaa inuu Qur'aanku noo cadaynayo soohdimaha iimaanka oo faahfaahsan, noona tilmaamayo si qoto dheer sida uu abuurka dadku ku bilawday iyo sida uu ku dhamaanayo, noona tilmaamayo janada iyo barwaaqadeeda, iyo naarta iyo xaaladaha cadaabkeeda, iyo tiradaalbaabadeeda, iyo tirada malaa'igta loo xilsaaray naarta, isla markaana uu noo cadaynayo arimaha ku saabsan xaqiiqada koonka iyo bini aadamka, hadaba aragtidee lagu saleeyay arimahaas faahfaahsan oo dhan?

Taasi ma aha wax lagu gaadhi karo caqli badni ama fiiro dheeri, balse waa laba mid: inay tahay run ka timid xaga eebe, ama inay tahay been iyo mala awaal aan waxba ka jirin.


Cilmiga casriga ah wuxuu sugay qaar ka mid ah waxyaabo Qur'aanka kusoo arooray, isla markaana muusan ka hor imaanin ama burinin wax ka mid ah macluumaadkiisa, sidoo kale wuxuu Qur'aanku waafaqay waxyaabaha inaga qarsoon ee kusoo arooray kutubtii hore ee Alle soo dajiyay.

## Malaga yaabaa inuu Qur'aanku yahay buug hore oo dib loo habeeyay:

Bal wax yar fikiroo, suuragal ma tahay innaba inuu xogta Qur'aanka ku sugan uu kala soo baxay kutubtii nabiyadii hore?

Hadii aan iska indha tirno in Muxammad (CS) uu ahaa nin aan waxna akhrinin waxnana qorin, oo tolkiisna ay ahaayeen dad aan aqoon lahayn, horayna aan u arag cilmiyadaas, iyo inuusan saaxiib la ahayn qof ka mid ah umadihii kutubtii hore loo soo dajiyay, waxaan ka ahayn kulan dagdag ah oo asagoo safar ku jira xiligii uu yaraa oo ay wehelinayeen qaar ka mid ah qaraabadiisa, ayna tahay xaqiiqada ay taariikhdu sugayso in dadkii aqoonta ulahaa kutubta lasoo dajiyay ee xiligaa jiray ay qarin jireen cilmiga, oo ay la kali noqon jireen, si ay u ilaashadaan darajadooda, mana ahayn cilmigoodu mid ay dadka u gudbiyaan ama ay baraan.

Hadii aan waxaas oo dhan aan iska indha tirno, waxay tahay xaqiiqada hortaala qof kasta oo xog baadha ah in Qur'aanku uusan waafaqin dhamaan wixii ku sugnaa kutubtaa lasoo dajiyay ee xiligaa jiray, balse wuxuu saxay macluumaadka khaladka ah qaarkood (taasoo ay khaldeen qaar ka mid ah culimada diinka), wuxuuna dhamaystiray wixii ka dhimanaa qisooyinka qaarkood, wuxuuna daaha ka fayday waxa ay qarinayeen cilmiga ay qarinayeen, wuxuuna cadeeyay baadinimada caqiidooyin ama dhaqamo ay culimada qaar ku ladheen diinka anbiyada kuwaas oo aan diinka raad ku lahayn, Qur'aankana waxaa ka buuxa tusaalayaal arinkan tusaya... hadaba ayadoo waxaasoo dhan jiraan suuragal ma tahay inuu Muxammad (CS) arday u ahaa ayaga oo uu macluumaadka ka qaatay xagooda?...



## Arin taariikheed oo wax ku ool ah:

Qofka xog raadiska ah waxaa haboon inuu in badan ku fikiro: miyuusan ahayn rasuulka islaamka Muxammad (CS) nin carab ah?

Miyayna taariikhdu noo sheegin in tolkiisii carabta ahaa ee xiligaas aysan haysan falsami (fan) ay ku faanaan oon ka ahayn fasaaxada iyo codkarnimada? Iyo farsamadoodu inay ahayd kaliya gabayga iyo suugaanta, oo ay samayn jireen golayaal iyo fadhiyo iyo fagaarooyin, oo uu qabiilku ama kor uu ukici jiray ama hoos udhici jiray maanso laga tiriyay awgeed.!

Oo miyayna buugaagta taariikhda iyo suugaanta noo sheegin in qof alla qofkii ka mid ah carabta ee tiriyaa gabay ama tix ay dabagal ku samayn jireen oo ay waxa ka dhiman dhamaystiri jireen wixii uu dhaafayna sheegayeen, oo ay ugu jawaabi jireen isla habkuu maansada u dhigay, iyo in arinkaas uu ahaa goobta ay ku tartamaan, iyo astaanta awoodooda iyo sharaftooda?

Hadaba say ku dhacday inuu yimaado qof cadawgood ah oo ayna waxba ula kala hadhaynin dagaalkiisa, iyo waxyeeladiisa, iyo in laga digo, oo uu ku caraysto inay la yimaadaan Qur'aankan oo kale ama qayb yar oo ka mid ah, kadibna aysan ka jawaabin caraysigaas, balse ay ka aamusaan oo ka cararaan inay la loolamaan!

Miyuusan Muxammad (CS) ka cabsanaynin markuu caraysanayay inuu ku qiiro galiyo waxa ay xirfad iyo aqoon dheeraad ah u leeyihiin, oo ay u kacaan la tartankiisa kali kali iyo koox kooxba si ay uga adkaadaan una aamusiiyaan, oo ay dadka u cadeeyaan in waxa uu la yimid uu yahay waxaan waxba ka jirin!

Hadii aan kaba soo qaadno inay tahay waxa uu arinkaa ugu dhiiraday inuu ogaa in qolodiisu aysan awoodi Karin, seebuu ugu xukumay jiilalka soo socda ilaa qiyaamaha aysan awoodi Karin inay la yimaadaan asagoo kale, ama qayb ka mid ah toona, xitaa haday isku habarwacdaan?!

Waa isbiimayn uu ku dhiiran karo kaliya nin qalbigiisu ka buuxo kalsooni iyo hubid waxa uu sheegayo... arinkuna sidaa umbuu noqday, mayna ku dhiiranin Quraysh iyo aftahanada waawayn inay hal abuuraan wax Qur'aanka la mid ah, ama qaybo asagoo kale ah, waa xaqiiqo jirta laga bilaabo xiligaas ilaa maanta, qofkii isku dayaa ama doonaa arinkaana waxaa ka raacda guuldaro iyo ceeb, waxaana ku maadaysta kuna jees jeesa qolodiisa.



## Suurada Faatixada:

Waa suurada u wayn quraanka, qofka muslimka ahna uu ku celceliyo salaaadiisa macnaheeda oo koobanna waxaa weeye sida soo socota:

### Macnaha suurada faatixa

| | |
|---|---|
| {بسم الله الرحمن الرحيم} | Waxaan ku bilaabayaa magaca Ilaahay waa ka leh naxariista balaaran ee deeqday cid kasta |
| {الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ} | Waxaan ku amaanayaa Ilaahay dhamaan tilmaamihiisa iyo nicmooyinkiisa muuqda iyo kuwa qarsoon, waa rabbiga abuuray, ee leh maamulana dhamaan uunka caalamka ku nool. |
| {الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ} | Waa Allaha leh naxariista ballaaran ee koonka deeqday, iyo naxariista gaarka ah ee gaadhaysa adoomihiisa mu'miniinta ah |
| {مَالِكِ يَوْمِ الدِّينِ} | Waa eebaha hanta ee maamula maalinta abaalmarinta iyo xisaabta (Qiyaamaha). |
| {إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ} | Rabigaanow Kaligaa umbaan kugu gaar yeelaynaa cibaadada, kulama wadaajinayno cid kale wax ka mid ah cibaadada, kaligaa umbaana ku waydiisanaynaa kaalmo arimahaanaga oo idil, arinka oo idil wuxuu ku jiraa gacantaada. |
| {اهدِنَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ} | Ilaahayow nagu hanuuni oo na waafaji jidka toosan, oo nagu sug jidkaas intaan kaala kulmayno |
| {صِرَاطَ الَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ} | Jidka kuwa aad oogu nicmaysay hanuun iyo toosnaan, ee anbiyada iyo dadka suuban ee gartay xaqa ee raacay. |
| {غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلاَ الضَّالِّينَ} | Oo naga fogee oo naga badbaadi jidka kuwa aad u cadhootay, waayo intay xaqa garteen ayayna raacin, nagana fogee jidka kuwa kadhumay xaqa jahli awgii iyo ayagoo ka gaabiyay raadiniisa. |
| {آمين} | Ilaahayow na ajiib |



## Qof kasta wuxuu leeyahay odhaahdiisa u dambaysa:

Intaa ka dib qof kasta oo naga mid ah waxa uu ka odhanayo Qur'aanka ama uu ku xukumayo wuxuu ka dhalanayaa tijaabadiisa gaar ahaaneed ee uu ka helay akhrinta Qur'aanka iyo barashadiisa iyo ufiirsashadiisa, asagoo ku dadaalaya xulashada tarjumaada u haboon luqadiisa haduusan carab ahayn.

Qur'aanku wuxuu kusoo arooray in xujada uwayn ee cadaynaysa inay run tahay nabinimada Muxammad (CS) ay tahay waxa aan ku garanayno caqligeena kadib markaan akhrino una fiirsano macnaha Qur'aanka, oo wuxuu yiri: (oo miyayna ku filayn inaan kugu soo dajinay kitaabka iyaga lagu dul akhrinayo, arinkaa waxaa ugu sugan kuwa rumeeyay naxariis iyo waano) (Al Cankabuut: 51).

Wuxuuna Qur'aanku ugu baaqay dadka oo dhan inay daalacdaan Qur'aanka oo ay ku fikiraan una fiirsadaan, wuxuuna sheegay in cidi arinkaa diida ay quful iska saareen qalbiga iyo caqliga (Muxammad: 24).



# Waa maxay cibaadooyinka Islaamka?



Ilaahay

## Ilaahay miyuu ubaahanyahay cibaadooyinkeena?

Ilaahay (SW) uma baahno cibaadooyinkeena iyo shaqooyinkeena, badbaadada islaamkana kuma jirto kaliya dhaqamo iyo falal iyo xoolo la bixiyo, ee waxay ku jirtaa si dhab ah in Ilaahay daacad loogu ahaado loona rumeeyo, taasooy waajib tahay in loo tarjumo akhlaaq iyo anshax suuban, iyo in loo adeego bulshada aadamaha, lagan shaqeeyo sidii loo hormarin lahaa.


## Ilaahay miyuu ubaahanyahay cibaadooyinkeena?

Ilaahay (SW) uma baahno cibaadooyinkeena iyo shaqooyinkeena, badbaadada islaamkana kuma jirto kaliya dhaqamo iyo falal iyo xoolo la bixiyo, ee waxay ku jirtaa si dhab ah in Ilaahay daacad loogu ahaado loona rumeeyo, taasooy waajib tahay in loo tarjumo akhlaaq iyo anshax suuban, iyo in loo adeego bulshada aadamaha, lagan shaqeeyo sidii loo hormarin lahaa.

Ilaahay wuxuu Qur'aanka ku yiri: (jinka iyo insiga waxaan cibaado ahayn uma abuurin, kamana doonaayo risqi iyo inay I quudiyaan, illeen Eeb umbaa ah arsuqe xoogbadane) (Ad-daariyaat: 56-58).

Markii dadka qaar ay is waydiiyeen: maxay tahay jihada saxda ah ee salaada loo tukan (qibalada) – waayo salaada islaamka waxaa loo tukadaa dhinaca Makka- wuxuu Qur'aanku u cadeeyay in diinka xaqiiqdiisu tahay iimaan dhab ah iyo camal suuban iyo dadka oo la anfaco, oo uusan ahayn kaliya in bari ama galbeed loo jeedsado, wuxuu ku yiri: (sama falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorax kasoo bax iyo qorax u dhac, laakiin samafale waa ruuxii rumeeya Eebe, qiyaamaha, malaai'gta, kitaabka (kutubta Alle), nabiyada, oo siiya xoolaha asagoo jecel qaraabada, agoonta, masaakiinta, musaafirka, kuwa baryootama, xoraynta adoomaha, oogana salaada, bixiyana zakada, oofiyana ballankooda, marakay ballamaan, samra (adkaysta) waqtiga saboolnimada, jirrada iyo dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay iimaankooda waana kuwa dhawrsada) (Al Baqara: 177).

Wuxuu Qur'aanku marka ku nuuxnuuxsanayaa in qofkii ku dadaala cibaadada iyo ku dhaqanka diinka inuu arinkaasi anfacayo naftiisa asaguna ku badbaadayo, qofkii gaaloobana uu kaligii khasaarayo, balse Eebe uu naga kaaftoomo, wuxuu yiri: (ruuxii dadaala wuxuu uun u dadaalay naftiisa, Eebana waa ka kaaftoonyahay caalamka) (Al Cankabuut: 6).



Markii dadka qaar ay is waydiiyeen: maxay tahay jihada saxda ah ee salaada loo tukan (Qiblada) – waayo salaada Islaamka waxaa loo tukadaa dhinaca Makka- wuxuu Qur'aanku u cadeeyay in diinta xaqiiqdeedu tahay iimaan dhab ah iyo camal suuban iyo dadka oo la anfaco, oo uusan ahayn kaliya in bari ama galbeed loo jeedsado.



## Tiirarka Islaamka:

Waa cibaadooyinka u muhiimsan ee islaamku faray, waana sidatan:




Iimaanka iyo in si daacad ah loogu qirto Ilaahay adoon u ahaansho, rasuulkiisa Muxammadna loo qiro in la raacayo, waana inaad ka markhaati kacdaa inaysan jirin cid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, iyo Muxammad inuu yahay rasuulka Ilaahay (eeg bogga 30).




Oogitaanka salaadaha faralka ah. (eeg bogga 98).




Siinta sakada dadka mutaysta. (eeg bogga 102).




Soonka bisha ramadaan. (eeg bogga 104).




Inuu xajiyo guriga Ilaahay ee xurmada mudan qofkii awood jidh iyo xoolo leh. (eeg bogga 106).

## Maxay tahay kalifaada iyo imtixaanka?

Su'aashani aad bay usoo noqnoqotaa ayadoo loo dhigayo siyaabo kala duwan, dadka qaar waxay odhan: muxuu Ilaahay inta noo sameeyay af iyo ilko iyo calool si aan wax oogu cuno, kadibna uu u leeyahay sooma?! Muxuu Ilaahay inta noo sameeyay qurux iyo shahwo hadana u leeyahay: indhihiina ka laaba daymada qaarkeed oo dhawrsada!, waxaaba laga yaabaa qaar kale inay dhiiradaan ooy dhahaan: muxuu Eebe noo siiyay xoog, kadibna uu nooga reebay inaan ku xadgudubno dadka kale oon dulmino?!

Runtii arinkan aad buu ugu cad yahay islaamka, Alle wuxuu noo siiyay kartidaas iyo awoodahaas si aan inagu u maarayno ee noo ma siinin si awoodahaas noo maamulaan inaga, ..Ilaahay wuxuu kuu siiyay faraska si aad u fuusho ood u hagto, ee kuuma siinin si uu asagu kuu fuulo oo kuu hago, jidhkeena iyo awoodaheenu waa fardaheena la inoo abuuray si aan u fuulo oon u hagno, oon u xakamayno, oon u adeegsano xiliga iyo halka iyo habka u haboon, ee ma aha sidaa lidkeed.

Hadaba bini-aadanka waxay sharaftiisa iyo maqaamkiisu ay kujiraan kolba sida uu u awoodi karo inuu xakameeyo shahwadiisa iyo hagida damaciisa iyo naftiisa, iyo inuu jaheeyo awoodihiisa wixii anfacaya... arinkaasna waa waxa Ilaahay kaga soocay aadamaha uunka kale, oo uu ugu diyaaryay goobta imtixaanka... sidaa darteed buuna Ilaahay noo abuuray.

Sida Qur'aanka uu leeyahay: (annagaa ka abuurnay dadka dhibic isku dheehan, imtixaan dartiis, waxaana ka yeelnay wax maqle wax arka- annagaa dadka tusinay jidka waxayna noqdeen mid mahadiya (Alle rumeeya) iyo mid gaalooba )(Al Insaan: 2-3).

Wax kasta oo qofka ku dhacaya oo musiibooyin ah iyo silac waa uun imtixaan dheeraad ah si aan u hormarino xaaladeena ruuxeed iyo tan akhlaaqeed iyo tan iimaaneed, iyo si aan dib ugu xusuusano ujeedee looga gol leeyahay noolasha iyo halka aan ka joogno, sida Qur'aanka ku timi: (waxaan idinku imtixaanaynaa wax ka mid ah cabsi iyo gaajo, iyo nusqaamin xoolaha iyo nafta iyo midhaha ah, ee u bishaaree kuwa samra- kuwa marka uu dhib ku dhaco yidhaahda Eebaa na leh isaganaa u noqonaynaa) (Al Baqara: 155-156).

Hadaba noolasha aduunyo waa goob furan oo qofku uu ku samayn karo horumar ama dibudhac iimaaneed iyo mid akhlaaqeedba, Alle (SW) inkastoo uu na siiyay fursado soo noqnoqonaya oo hanuunid iyo isasixid ah hadana naguma qasbin, balse wuxuu nooga tagay albaab furan si aan udoorano, wuxuuna noogu baaqay inaan dhulka camirno, oon dadka anfacno, oon ka faaiidaysano khaladaadkeena, si aan ugu noqono oon ooguna tawba keeno markasta uu gaf ama danbi naga dhaco, wuxuuna yiri nabiga suuban Muxammad (CS): "hadaydaan danbaabi lahayn Ilaahay wuu idin dhaafin lahaa aduunka oo wuxuu keeni lahaa qolo danbaabaya oo Ilaahay danbi dhaaf waydiista oo uu u danbi dhaafo" (Muslim 2749).



> Hadaba bini-aadanka waxay sharaftiisa iyo maqaamkiisu ay ku jiraan kolba sida uu u awoodi karo inuu xakameeyo shahwadiisa iyo hagida damaciisa iyo naftiisa, iyo inuu jaheeyo awoodihiisa wixii anfacaya

# Salaada

**Waxaa laga yaabaa inaad hada ka hor is waydiisay xaqiiqada arinka markaad si toos ah u aragtay ama warbaahinta aad ka aragtay muuqaalkaa cajiibka ah muslin kalagii ah ama muslimiin badan oo hal dhinac u jeedsaday, oo bilaabay inay istaagaan oo foororsadaan oo wajiga dhuka dhigaan, ayagood moodo inay ka go'een aduunyada ku hareeraysan…**

## Hadaba maxay tahay salaada muslimiinta?

Salaadu waxay islaamka ku leedahay qiimo wayn, waayo waa jidka u mihiimsan ee Ilaahay loogu dhawaado laguna baryo looguna khushuuco, sida uu Ilaahay ku yiri nabigiisa: (sujuud oo u dhawoow eebe) (Al calaq: 19). Sidaa awgeed salaadu waa tiirka labaad ee tiirarka islaamka ee soo raaca ku dhawaaqida labada ashahaado.

Wuxuu nabigu yiri (CS): "waxaa islaamka lagu dhisay shan: in la qiro inuusan jirin cid xaq lagu caabudo oon Ilaahay ahayn, iyo Muxammad uu yahay rasuulkii Ilaahay, iyo salaada oo la oogo…" (Bukhaari 8).

Wuxuu islaamku nabaray in qofka muslimka ah ajar uga helayo salaadiisa kolba sida uu ugu dadaalo sifaynta qalbigiisa, soo jeedinta dareenkiisa, iyo sida uu uga runsheego khushuucdiisa iyo dareenkiisa inuu Ilaahay u dhawyahay, taasina waxay nafta siinaysaa xasilooni, sidaa awgeed salaadu waxay ahayd waxa ugu waynee nabi Muxammad (CS) uu ku macaansado.

Saa darteed ayuu Qur'aanku wuxuu nafarayaa inaan salaada oogno, waayo oogitaanka dhabta ah waxaa ka wada qayb qaadan xubnaha oo idil iyo wadnaha iyo ruuxda… hadii aan sidaa samaynana salaadu waxay noo noqon waxa u wanaagsan ee nagu garabgala inaan samaha falno xumaanta iyo danbiyadana isaga fogaano, xuska Ilaahay iyo magangalkiisuna waa waxa ugu wayn ee bini-aadan sameeyo gabi ahaanba.


Alle (SW) wuxuu yiri: (akhri (nabiyow) waxa laguu waxyoon oo kitaabka ah, oog salaadana, maxaa yeelay salaadu waxay ka reebtaa (dadka) xumaanta iyo waxa la naco, xusida Eebaana weyn, Eebana waa ogyahay waxaad samaynaysaan). (Al cankabuut: 45).

> Salaada waa ficil iyo erayo lagu waynaynayo Ilaahay.

Qofkii mooda in salaadu ay tahay kaliya jimicsi jidh oo uu ka horeeyo is dhaqid iyo nadaafad waxaa ka maqan in waxaa uu arkayo ee ah dhaqdhaqaaqa salaada uu yahay kaliya falal iyo erayo lagu waynaynayo Ilaahay, erayga u horeeya ee uu ku dhawaaqayo qofka tukanaya marka uu gacmaha kor u qaadayo waa (Allahu akbar) oo macanaheedu yahay (Ilaahay baa wax kasta ka wayn) kadibna wuu foorarsanayaa asagoo isdareensiinaya waynida Ilaahay, qirayana taagdaridiisa, wuxuuna oranayaa: (subxaana rabbiyal cadiim): (waxaa xumaan ka hufan rabbigayga wayn). Ka dibna wuxuu u sujuudi Eebe asagoo waydiisanaya dhawaanshahiisa, wuxuuna dhulka dhigi wajigiisa iyo sankiisa, asagoo dhahaya: (subxaana rabiyal aclaa): (waxaa xumaan ka hufan rabbigayga sare), wuxuuna baryi oo wax waydiisan rabigiisa.. waana sidaasoo kale dhamaan falalka salaada iyo hadaladeeda ma aha kaliya dhaqdhaqaaqyo iyo xamxamlayn, balse waa daqiiqado aad qaali u ah oo uu mu'minku kula xidhiidhayo rabigiisa abuuray ee uu ka helayo jiritaankiisa iyo liibaantiisa.

> Salaadu waxay ahayd waxa ugu wayn ee nabi Muxammad (CS) uu ku macaansado.





Masjidka xaraamka waa masjidka ugu wayn masaajida muslimiinta, waxaana ku dhex yaala kacbada oo uu dhisay nabi Ibraahim, waana dhismo afar gees ah oo muslimiinta la faray inay ujeedsadaan xageeda marka ay tukanayaan, ayagoo aaminsan inayna waxna dhibin waxna tarin.



Ilaahayna wuxuu muslimiinta ku waajibiyay shan salaadood maalin iyo habeen kasta, waxaana lagu tukan karaa meel kasta, hase yeeshee wuxuu Ilaahay ku booriyay inay ku tukadaan ragu masaajida si ay muslimiinta xidhiidhka u dhexeeya u xoogaysto, oo ay si adag isugu xidhmaan, oo ay isu kaashadaan arimaha diinkooda iyo aduunyadooda.

Sidoo kale islaamku wuxuu ku booriyay muslimka inuu ku dadaalo sunayaasha (waa salaadaha aan waajibka ahayn) marka uu u helo kansho iyo firfircooni.

Muslimiintuna waxay salaada gutaan ayagoo ujeeda dhinaca kacbada, waa dhismo afar gees ah, qofkii u horeeyay ee dhisay waa IBraahim oo lagu tilmaamo aabaha nabiyada (CS) wuxuu ka dhisay Makka oo ku taalla galbeedka jasiirada carabta, waxaana usoo xajiyay anbiyada (CS), muslimiintuna waxay ogyihiin inay kacbadu tahay dhagaxyo dadka waxna aan yeelin waxna aan tarin, laakiin Ilaahay ayaa faray in salaada xageeda loo tukado, si ay ugu midaysnaadaan muslimiinta oo dhan hal jiho.

## Aadaanka:

Waxaa lagu magacaabaa dhawaaqa lagu baraarujiyo dadka in salaada wagtigeedii galay, looguna yeedho inay masaajidka yimaadaan (Aadaan).

Waana nooc ka mid ah xuska Ilaahay iyo waynayntiisa, iyo u diyaarinta muslimiinta inay salaada soo xaadiraan, waana tan macnaha ereyadiisu:

1 - Llaahay baa ugu wayn, Ilaahay baa ugu wayn, Ilaahay baa ugu wayn, Ilaahay baa ugu wayn.

2 - Waxaan qirayaa inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn, waxaan qirayaa inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn

3 - Waxaan qirayaa in Muxammad uu yahay rasuulkii Ilaahay, waxaan qirayaa in Muxammad uu yahay rasuulkii Ilaahay.

4 - Ukaalaya salaada, ukaalaya salaada.

5 - Ukaalaya liibaanta, ukaalaya liibaanta.

6 - Ilaahay baa ugu wayn, Ilaahay baa ugu wayn

7 - Ma jiro ilaah aan Alle ahayn.

## Sakada


`Waxaa la isku raacsanyahay in lagama maarmaan ay tahay in la xaliyo farqiga wayn ee u dhexeeya taajirnimada ballaaran iyo faqriga daran, iyo kolba inta uu le'egyahay farqiga u dhexeeya maalqabeenada iyo dadka saboolka ah uu halis u yahay bulshada inuu u horseedo burbur iyo inay ku faafto dhaqan xumi iyo faldanbiyeedyo, wayna ku kala duwanyihiin nidaamyada dhaqaalaha caalamka iyo xeerarka dastuuriga ah xalinta iyo dawaynta mushkiladaas, hadaba seebuu islaamku ula tacaalay arintaas?

Ilaahay wuxuu waajibiyay muslimiinta xoolaha leh inay bixiyaan 2.5% xoolohooda ka baxsan waxyaabaha ay sida gaarka ah u isticmaalaan, si loo siiyo xoolahaas dadka u baahan ee saboolka iyo masaakiinta ah iyo wixii la mid ah, wuxuuna arinkaa ka dhigay tiirka sadexaad ee tiirarka islaamka.

Sakada ma aha deeq uu qofka xoolaha lihi uu siinayo qofka maskiinka ah, balse waa xaq uu leeyahay miskiinku oo looga qaadayo xoolaha taajirka, laguna wareejinayo qofka baahan asagoo u baahanin inuu baryo, ama aan meel looga dhicin sharaftiisa.

Inta yar ee sakada laga bixinayo waa waxa inta waajibka ku ah muslimka xoolaha leh, waxa ubadan ee deeq ahana ma leh xad, oo waa albaab furan si dadku ugu tartamaan, oo markaas ay ka helaan noolashooda raadka wax bixintooda, ama ha ahaado caafimaad iyo xoolahooda oo ubarakooba, ama waafajin ama liibaan, aakhirana ajar iyo nimco labanlaaban.

Sida Qur'aanka ku timid: kuwa u bixiya xoolahooda si ay u gaadhaan raali ahaanshaha Alle waxay la mid yihiin sida midh hadhuudh ah oo la abuuray dabeedna soo saaray todobo sabuul oo sabuul kasta ay ku taalo boqol xabo oo hadhuudh ah waxay xabadii laablaabantay todobo boqol oo jeer, Ilaahay intaa in kabadan ayuu usii labanlaabi qofkii uu doono niyadaiisana ka run sheega, Eebana deeqdiisa way balaarantahay wax kasta wuu ogyahay. ( Al baqara: 261).



Sakadu ma aha deeq uu qofka xoolaha lihi uu siinayo qofka maskiinka ah, balse waa xaq uu leeyahay miskiinku oo looga qaadayo xoolaha taajirka, laguna wareejinayo qofka baahan asagoon u baahanin inuu baryo, ama aan meel looga dhicin sharaftiisa.



Qur'aankuna wuxuu nooga waramayaa in qofka baahan oo xoolaha wax laga siiyo ay sifayn iyo tarbiyo u tahay nafta, wuxu Alle leeyahay asagoo la hadlaya rasuulkiisa suuban: (ka qaad xoolahooda sadaqo aad ku sifaynayso ayaga kuna tarbiyaynayso) (Al tawba: 103).


Wuxuu kaloo nooga waramayaa in qofkii la bakhayla xoolihiisa oo diida inuu wax ka bixiyo oo uu caawiyo dadka baahan iyo masaakiinta uu yahay qofka u horeeya ee khasaaraya, waayo naftiisa ayuu kala bakhaylay liibaanta aduun iyo tan aakhiro.

Waxaa Qur'aanka ku soo arooray: (kuwaas xaqa rumeeyow waxaa la idiinku yeeri inaad jidka Eebe wax ku bixisaan, waxaase idinka mid ah kuwo ku bakhayli, ruuxiise bakhaylaa wuxuu uun kala bakhaylay naftiisa, Eebana waa hodan, idinkuna waxaad tihiin caydh, hadaad xaqa ka jeedsataanse wuxuu Eebe idinku baddali kuwo kale oon idin lamid noqon doonin) (Muxammad: 38).

Markii la fuliyo tiirkan wayn ee ka mid ah tiirarka islaamka waxaa hirgalaya iscaawinta bulshada, iyo isu dheelitirnaanta qaybaha bulshada, marka la siiyo sakada cida mudata hantidu ma noqonayso mid ku urursan oo ku kooban qaybo gaar ah oo bulshada ka mid ah, sidaa awgeed waxaa soo martay taariikhda muslimiintii hore dhawr jeer oo inta lala wareegay sakada iyo caawimaada wadanka si loo raadiyo qof u baahan oo aan la helin.

Sidoo kale waxaa bixinta sakada ku hirgalaya mabda'a isku xidhnaanta iyo kalsoonida bulshada, waayo nafta aadamaha waxaa lagu beeray jacaylka qofkii wanaajiya, sidaa awgeed waxay noqonaysaa bulshadu mid isjecel oo isku duuban isna taageera sida dhismaha adag isu xoojiyo, waxaana yaraanaysa tuugnimada, dhaca iyo boobka.

Qur'aanka wuxuu ku matalay kuwa u bixiya xoolahooda si ay u gaadhaan raali ahaanshaha Alle waxay la mid yihiin sida midh hadhuudh ah oo la abuuray dabadeedna soo saaray todobo sabuul oo sabuul Kastana ay ku taalo boqol xabo oo hadhuudh ah waxay xabbadii laablaabantay todobo boqol oo jeer.



## Soonka:

Dhamaanteen waan la yaabaynaa qof naftiisa xakamaynaya, oo awoodi kara inuusan cuntada cunin ama qaybo ka mid ah asagoo ilaalinaya caafimaadkiisa, si uu uyareeyo miisaankiisa, ama si uu u fuliyo talooyinka dhakhtarka... waxaana u arkaynaa arinkaa guul iyo karti uu qofkaa u leeyahay inuu maamulo waxay naftiisu jeceshahay si uu u gaadho ujeedo wayn oo muhiim ah...

Hase yeeshee qofka muslimka ah wuxuu soonkiisa ku samaynayaa laylis naftiisa oo intaa ka wayn, iyo xakamayn naftiisa iyo shahwadiisa iyo fulinta amarka allaha oogu cadaalad badan inta wax garsoorta.

Soonkuna waa tiirka shanaad ee tiirarka Islaamka, wuxuuna waajib kuyahay qofka awoodi kara inuu soomo oo uu ka afxirto waxyaabaha lagu afuro, kuwaasoo ah: cuntada iyo cabitaanka iyo la kulanka xaaska, laga bilaabo marka waagu dilaaco ilaa ay cadceedu ka dhacayso, maalin kasta oo ka mid ah bisha ramadaan, waana bisha sagaalaad ee taariikh dayaxeedka Islaamiga ah.

> Nabiga Islaamka wuxuu nagu baraarujinayaa in qofka ayna xaaladiisu is badalin oo ayna dabeecadiisu samaanin soonka ka dib uusan ka faaiidaysan soonkiisa.

Qur'aankuna wuxuu nooga sheegayaa in soonka lagu waajibiyay umadihii hore inkastoo uu mararka qaar uu kala qaab duwanaa, laakiin ujeedada looga gol leeyahay waa mid oo isma badasho, waana: in Eebe loo hirgaliyo adoonimo iyo ka cabsigiisa.

Ilaahay wuxuu ku yiri Qur'aanka: (kuwa xaqa rumeeyow waxaa la idinku waajibiyay soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horeeyay si aad u dhawrataan) (Al baqar:183).

Marka uu muslimku ka adkaado shahwooyinkiisa banaan saacado kooban maalin kasta oo ka mid ah maalmaha bisha ramadaan, wuxuu noqonayaa boqorka naftiisa, wuxuuna awood u heli inuu kantroolo, oo uu ka xakameeyo inay ku dhacdo xiliyada kale shahwooyinka xaaraanta ah, sidaa awgeed ayuu nabigu (CS) noogu baraarujinayaa in qofka ayna xaaladiisu is badalin oo ayna dabeecadiisu samaanin soonka ka dib uusan ka faaiidaysan soonkiisa, wuxuu yiri nabigu (CS): "qofkii aan ka tagin hadalka beenta iyo been abuuradka iyo ku dhaqankooda Ilaahay waxba ku fali mahayo inuu ka tago cuntadiisa iyo cabitaankiisa" (Bukhaari 1804).

> Qur'aankuna wuxuu noo sheegayaa in soonka lagu waajibiyay umadihii hore inkastoo uu mararka qaar uu kala qaab duwanaa, laakiin ujeedada looga gol leeyahay waa mid oo isma badasho, waana: in Eebe loo hirgaliyo adoonimo iyo ka cabsigiisa.

Qofka sooman gaajadiisa iyo oonkiisu waxay xusiisnayaan dadka tabaalaysan een helaynin cunno iyo cabitaan, waayo wuxuu tijaabiyay wax la mid ah silacooda, sidaa awgeed waxay taasi u horseedi inuu caawiyo dadkaa baahan.



> Marka uu Islaamku ku waajibiyay soonka qofka muslimka ah, wuxuu xusuusinyaa gaajada masaakiinta iyo baahida ay u qabaan cuntada.

# Xajka

Kama madhno diimaha badankood safar diimeed ay dadku ku muujinayaan cibaadadooda iyo sida ay ugu khushuucayaan rabigooda... laakiin socdaalka ugu caansan dunida uguna wayn xaga tiro ahaan sanad kasta waa socdaalka islaamka ee xajka, waxaa sanad kasta isugu yimaada goob yar in ka badan sadex malyan oo muslim ah si ay u gutaan muhimada socdaalkooda barakaysan.

Hadaba muxuu yahay xajka islaamka?

Xajka waa tiirka afraad ee ka mid ah tiirarka islaamka, wuxuuna waajib ku yahay hal mar kaliya qofkii leh awood dhaqaale iyo mid karti jidh.

Waana socdaal wayn oo ay ku milmayso dhamaan dabaqadaha iyo dhalashooyinka iyo isirada iyo xoolaha iyo habka labiska, dadkoo dhan waxay qabaan hal dhar, iyo hal midab, waxayna ku dhawaaqayaan hal weedh oo muujinaysa xidhiidhka ka dhexeeya qofka iyo rabigiis: (labbayka laahumma labbayk, labbayka laa shariika laka labbayk, innal xamda wanicmata laka walmulk laa shariika lak) oo macnaheedu yahay: waa ku yeelay Ilaahayow oo waan ku ajiibay, waan kaa yeelay ma jiro qof kula wadaaga cibaadada, waan ku yeelay, mahada iyo amaanta dhamaystiran adigaa muta, waayo adigaa ah Allaha noo nimceeyay ee boqorka ah cid wax kula wadaagtana ma jirto.

Hadba xajku waa safar iimaaneed oo uu muslimka u dhexeeyo xaalado iyo shaqooyin iyo hadalo dhamaantood looga jeedo xuska Alle iyo cabsidiisa, iyo in loo muujiyo faqriga iyo baahida, lana waydiisto danbidhaaf iyo abaalmarin, wuxuu yiri Muxammad (CS): "waxa loo jideeyay dawaafka kacbada iyo sacyiga (orodka safa iyo marwa) xajka si loo oogo xuska Ilaahay" (IBnu Abii shayba 15334).



Dharka qofka maka u yimaada inuu cibaadada xajka guto ka dib marka uu bixiyo dharkiisii caadiga ahaa, oo uu xidho laba maro oo cadcad si uu Ilaahay oogu muujiyo hogasho iyo inuu la siman yahay cid kasta oo xajka u timi.




Waxaan

Waxaan dhihi karaa qoysas badan oo jira xiligan waxaa uun weeye koox dad ah oo haysta furayaal kala duwan oo hal guri leeyahay!

Nasiib darro dad badan xiligan way iskaga cararaan inay masuuliyadda xaasaskooda iyo caruurtooda si dhab ah u qaadaan, ayagoo isugu sheekaynaya: maxaa ii diiday inaan raaxaysto anigoon mas'uuliyadaas xambaarin?

Inkastoo arinkan uu si cad usoo muuqday sabankan hadana ifafaalihiisu wuu jiray taariikhihii hore, dhab ahaantiina waa mabda' nacas ah oo ku salaysan maslaxada qofka kaliya iyo nafjeclaysi foolxun iyadoon la eegaynin aayaha qofka iyo bulshada.

Sidaa awgeed ayuu islaamku aad u daryeelay qoyska: xaga nidaamkiisa iyo xuquuqdiisa iyo waajibaad ay isku leeyihiin xubnaha qoyska, waayo guriga iyo qoysku waa xarunta wacyi galinta iyo tarbiyada iyo harumrka ee islaamka, dhismihiisa iyo hagaagiisa iyo inuu muhimadiisa gutana waxay hagaag iyo horumar u tahay bulshada oo dhan.

## Danaynta islaamka ee arimaha qoyskana waxay ka muuqanaysaa axkaam badan oon la koobi Karin, waxaana ka mid ah:

1

### Islaamku wuxuu adkeeyay mabda'a guurka iyo samaynta qoyska:

- Islaamku wuxuu ku tiriyay guurka iyo dhisitaanka qoyska shaqooyinka ugu waawayn iyo sunooyinka nabiyada, markii ay dooneen qaar ka mid ah asxaabta rasuulka suuban (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) inay u gacan bannaanaadaan cibaadada, oo ay isku xidhiidhiyaan salaada iyo soonka, oo ay guurka ka tagaan, wuxuu ku yiri asagoo saxaya: "laakiinse anigu waan soomi waana afuri, waana tukan waana seexan, haweenkana waan guursan, qofkii aan ku dhaqmin sunadaydana naga mid ma aha" (Bukhaari 4776).
- Marka uu Qur'aanku ka sheekaynayo galadaha iyo nimcooyinka la siiyay aadamaha waxyaabaha uu ugu hor xusay waxaa ka mid ah waxa uu Ilaahay abuuray ee ah xasiloonida iyo kalgacalka iyo naxariista iyo wehelka u dhexeeya ninka iyo xaaskiisa, sida Qur'aanka kusoo aroortay: (waxaa ka mid ah calaamooyinka (lagu garanayo awooda Alle) inuu idiinka abuuray naftiina haween si aad isugu xasishaan, wuxuu yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis) (Al Ruum: 21).
- Wuxuu farayin guurka la fududeeyo, wuxuuna u ballan qaaday qofkii guur doonaya inuu caawinayo, sida uu nabigu (CS) yidhi: "sadex waxaa Ilaahay xaq ku ah caawintooda" wuxuuna ka mid dhigay sadexdaas "qofka guursanaya ee doonaya inuu dhawrsado" (Al-tirmidi 1655).
- Wuxuu faray dhalinyarada marka ay barbaarnimadoodu hor leedahay uguna xoog badanyihiin inay guursadaan, waayo waxaa ugu jira xasilooni iyo daganaansho, wuxuuna xal sharci ah u yahay shahwadooda xoogan iyo hamadooda.

> Marka uu Qur'aanku ka sheekaynayo galladaha iyo nimcooyinka la siiyay aadamaha waxyaabaha uu ugu hor xusay waxaa ka mid ah waxa uu Ilaahay abuuray ee ah xasiloonida iyo kalgacalka iyo naxariista iyo wehelka u dhexeeya ninka iyo xaaskiisa.



## 2

### Islaamku wuxuu siiyay qof kasta oo ka mid ah xubnaha qoyska ixtiraam buuxa, ama lab ha ahaado ama dhadig.

Oo islaamku wuxuu saaray aabaha mas'uuliyad wayn oo ah inuu tarbiyeeyo caruurtiisa, wuxuu rasuulka (CS) yiri: "dhamaantiin waxaad tihiin masuuliyiin, dhamaantiina waa la idiin waydiin cida aad masuul ka tihiin, madaxwaynuhu waa masuul waana la waydiin cida uu masuulka ka yahay, ninkuna wuxuu masuul ka yahay reerkiisa waana la waydiin cida uu masuulka ka yahay, haweenayduna waxay masuul ka tahay guriga ninkeeda waana la waydiin waxay masuul ka tahay, dhamaantiin waxaad tihiin masuuliin dhamaantiina waa la idin waydiin waxaad masuulka tihiin" (Bukhaari 4832).



"Islaamku wuxuu reebay xad gudub af ama adin ah in loo gaysto waalidka, xitaa haduu yahay in la muujiyo eray ama cod tusinaya kahashadooda

## 4

### Wuxuu faray in la ilaaliyo xuquuqda caruurta iyo gabdhaha iyo inay waajib tahay in cadaalad wax loogu qaybiyo looguna biilo.

Wuxuu yiri rasuulku (CS): "waxaa qofka danbi ugu filan inuu dayaco qofka uu quudinayo" (Abuu-daawuud 1692). Wuxuuna ka yiri (CS) arinta daryeelka iyo biilka gabdhaha gaar ahaan: "qofkii mas'uul ka noqda gabdhaha, oo u sama fala, waxay naarta uga noqonayaan xijaab" (Bukhaari 5649).

## 3

### Islaamku wuxuu ku dadaalay inuu beero mabda'a qadarinta iyo xurmaynta aabayaasha iyo hooyooyinka, iyo in la ilaaliyo amarkoodana la yeelo inta ay noolyihiin.

Si kasta oo uu wiilku ama gabadhu u waynaadaan, waxaa waajib ku ah inay ixtiraamaan waalidkood oo usama falaan, wuxuuna Ilaahay (SW) arinkaa ku ladhay cibaadadiisa, wuxuuna reebay xad gudub af ama adin ah in loo gaysto waalidka, xitaa haduu yahay in la muujiyo eray ama cod tusinaya kahashadooda, Alle wuxuu ku yiri Qur'aanka: (wuxuu faray Eebahaa inaydaan caabudin isaga mooyee cid kale iyo inaad u samo fashaan labada waalid, hadii midkood ama labadooduba ay agtaada da' ku gaadhaan haku dhihin uf, hana canaanan kuna dheh hadal fiican) (Al-israa: 23).

## 5

### Waxaa muslimka lagu waajibiyay xidhiidhinta qaraabada:

Taa macnaheedu waxaa weeye: inuu qofku xidhiidhiyo oo u samafalo qaraabadiisa dhinaca aabihii iyo dhinaca hooyadii, wuxuuna islaamku arinkaa ku tiriyay cibaadooyinka oogu waawayn, wuxuuna ka digay in la gooyo, ama la xumeeyo, wuxuuna ku tiriyay arinkaa danbiyada waawayn, wuxuu yiri (CS): "janada ma galo qof qaraabadiisa gooya" (Muslim 2556).



# Maamuuska ay haweenku ku leeyihiin Islaamka



Hadaan wax yar jaleecno xayisiisyada ka muuqda talefeshinada, ama boodhadhka ku yaala wadooyinka, ama bogoga hore ee saxaafada waxaan ka dheehanaynaa haydaartada  wayn ee ay ilbaxnimada aan diinta ku salaysnayn u gaysatay haweenayda, taasoo marar badan ka soo qaaday haweenaydii sida wax lagu madadaasho, ama badeeco, amaba wax lagu raaxeeysto oo kaliya.

Waxaad moodaa inay taasi tahay nooc ka mid ah dulaysiga haweenayda, oo muuqaal ahaan ka foolxumo yar siday u dulaysan jireen bulshooyinkii cawaanka ahaa haweenayda oo ay ka dhigi jireen badeeco la kala iibsado.

Haweenaydii in badan la ilxumayd dulmiga iyo cabudhinta ee u halgantay karaamadeeda mayna marna is lahayn darxumadii aad ka baxday ayaad dib ugu laaban ayadoo si kale loo dhigay.

Intuu islaamka soo shaac baxay ka hor 1400 oo sano wuxuu ku gacan saydhay dhaqamadii ku takri falayay haweenayda, wuxuuna dajiyay shuruuc iyo xeerar faahfaahsan oo ilaalinaya xuquuqdeeda iyo kaalinteeda, si ay ugu noolaato sharaf iyo maamuus, una gudato waajibaadkeeda noolasha sida ugu haboon.


Sidaa awgeed waxaa lagu magacaabay mid kamid ah suuradaha ugu dheer Qur'aanka (suurada nisa) oo macnaheedu yahay suurada dumarka, waayo, waxay cadaysay axkaam faahfaahsan oo haweenayda ku saabsan, eebana wuxuu noogu sheegay Qur'aanka sheekooyin dumar suuban oo fara badan, isla markaana wuxuu oogu magac daray mid ka mid ah suuradaha magaca maryama, hooyadii nabi ciisa -(C.S)-.

Hadaba islaamku wuxuu u yimi si uu u dooriyo sida loo arko haweenayda, si ay u noqoto siduu rabbigeed u abuuray bini aadan, oo ayna u noqon badeeco, oo ay u ahaato mid noolasha lala wadaago, oo ayna u noqon, mid habeen lala wadaago, oo ay u ahaato mid ay dhexmaraan ninkeeda kalgacayl iyo naxariis iyo xasilooni, oo ayna u noqon kaliya wax lagu guto shahwada.

## Waxaa ka mid ah tusalooyinka axkaamta ku saabsan ixtiraanka dumarka waxa soo soca:

- Wuxuu islaamku siiyay haweenayda xoriyada inay doorato ninka ay guursanayso, wuxuuna saaray qayb wayn oo ka mid ah masuuliyada tarbiyaynta caruurta, wuxuu yiri nabigu (CS): "haweenayduna waxay masuul ka tahay guriga ninkeeda, waana la waydiin waxay masuulka ka tahay" (Bukhaari 853).
- Wuxuu udaayay magaceeda iyo sharafta inay ku abtirsato aabaheed, oo isma badalayo abtirkeedu markay guursato ka dib, balse waxay ku abtirsan aabaheed iyo qabiilkeeda.
- Wuxuu simay ninka iyo haweenayda arimo badan oo kala duwan, waxaa ka mid ah mucaamalooyinka dhaqaalaha, oo wuxuu nabigu (CS) yiri: "dumarku waa lamaanaha raga" (Abuu-daawuud 236).

> Ayadoo ay xilligan dadka wax qora qaarkood ku eedeeyaan islaamka inuu dulmiyo haweenayda oo uu ku xadgudbo xuquuqdeeda, isla markaana uuna la jaanqaadi Karin – sida ay hadalka udhigeen- hanaanka ilbaxnimada iyo nolosha casriga ah, ayaa waxaan arkaynaa in 75% dadka soo islaamaya ee cusub ee ku nool dowlad horumarsan sida ingiriiska ay dumar yihiin, siiba ka dib markay baadhaan axkaamta islaamka iyo sharciyadiisa ku saabsan arimaha qoyska (INDEPENDET 6-11-2011)



- Wuxuu ku waajibiyay ninka inuu daryeelo haweenayda oo uu biilo asagoon wax galad ah ku lahayn, hadii ay ka mid tahay cidda ay waajibka ku tahay inuu biilo, sida: xaaska iyo hooyada iyo gabadha (inanta).
- Wuxuu islaamku siiyay haweenayda xaqeeda dhaxalka taasoo ku salaysan qaybin cadaalad ah, oo ay xaaladaha qaar la mid tahay ninka, xaalado kalena ay kala sad duwanyihiin mar ay wax dheer tahay iyo maruu wax dheeryahay, ayadoo la eegayo dhawaanshaheeda dhinaca qaraabada iyo xilka biilka ee saaran, waa fikir xumi iyo fiiro gaabni in dadka qaar eegaan xaalada ay haweenaydu ka sad yartahay ninka, asagoon eegaynin waxa uu Ilaahay ku waajibiyay ninka ee xil kharash ah sida biilka uu haweenayda siinayo, islaamku waa nidaam dhamaystiran oo isku dheeli tiran oo dhinacna uusan ku xadgudbaynin dhinaca kale.
- Wuxuu islaamku ku nuuxnuusaday sharafta iyo qiimaha ay leedahay in loo adeego haweenayda tabarta daran ee cid arxan ah lahayn, haduu doono yuusan qaraabadeedaba ahaanin, wuxuuna ku booriyay in laga shaqeeyo adeegeeda, oo wuxuu yiri nabigu (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): "qofka u shaqeeyaa haweenayda carmalida ah iyo maskiinka wuxuu la mid yahay qof Ilaahay dartii u jihaadaya, iyo qof habeenka oo dhan tukanaya oo aan daalaynin iyo qof soomaya oon afuraynin" (Bukhaari 5661).

> Wuxuu Islaamku siiyay haweenayda xaqeeda dhaxalka taasoo ku salaysan qaybin cadaalad ah, oo ay xaaladaha qaar la mid tahay ninka, xaalado kalena ay kala sad duwanyihiin mar ay wax dheer tahay iyo mar uu wax dheeryahayba.


## Haween uu Islaamku amray in la daryeelo:

**Hooyada:** nin ayaa u yimid rasuulka Ilaahay (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markaasuu yiri: rasuulkii allow yaa ugu mudan inaan si wanaagsan ula dhaqmo? Wuxuu yiri: "hooyadaa", wuxuu yiri: yaa ku xiga? Wuxuu yiri: "kadibna hooyadaa" wuxuu yiri: yaa ku xiga? Wuxuu yiri: "kadibna hooyadaa" wuxuu yiri: yaa soo raaca? Wuxuu yiri: "kadibna aabahaa" (Bukhaari 5626).

**Gabadha (inanta),** wuxuu yiri nabigu (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): "qofkii leh sadex gabdhood oo ku sabraa, oo quudiyaa, oo waraabiyaa, oo ka aradbixiyaa xoolihiisa, waxay naarta uga noqonayaan xijaab maalinta qiyaame" (IBnu-maajah 3669).

**Xaaska:** wuxuu rasuulka Ilaahay (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) yiri: "waxaa idiinku khayr badan qofka idiinku roon xaaskiisa, anigaana idiinku roon xaaskayga" (Al-tirmidi 3895).





> Xidhiidhka ka dhexeeya ninka iyo haweenayda Islaamka waa xidhiidh iskaashi ee ma aha loolan, mid kastana wuxuu buuxinayaa waxa ka dhiman kan kale si ay uwada dhisaan bulshada muslimka ah.

## Kama jiro Islaamka loolan u dhexeeya lablka iyo dhadiga:

Islaamka dhexdiisa ma jiro hardan ama loolan u dhexeeya labada lamaane (labka iyo dhadiga), qiimana ma leh inay aduunyo ku tartamaan, macnana ma leh in ilole lagu qaado haweenayda ama ninka, oo la isku dayo in wax laga sheego, oo la ceebeeyo, oo xumaantiisa la daba galo!

Seebuu ula dagaalami bini-aadanku badhkiisa kale, seebuu ula loolami qofku jeexiisa, haweenaydu – sida uu rasuulka suuban sheegay- waa jeexa ninka iyo badhkiisa kale, xidhiidkha ka dhexeeyana waa is dhamaystir, midba midka kale ayuu buuxinayaa waxa ka dhiman ee ku saabsan dhismaha bulshada muslimka.

Qur'aankuna wuxuu si quruxsan noogu sawirayaa isdhamaystirkaas marka uu leeyahay: (haweenku waxay idiin yihiin (idinkoo rag ah) asturaad, idinkuna waxaad ayaga u tihiin asturaad) (Al-Baqara: 187).

Waxa uu ninku u arko inay tahay tag darri ay leedahay haweenayda waa uun waji kale oo ay leedahay nooc awooda ka mid ah oo uusan ninku garanaynin awoodi karina, laakiin qoysku uu u baahanyahay...waxa ay ayadu u aragto inuu ninka ka dhimanyahayna waxaaba laga yaabaa inuu muujinayo awoodo aan ayada ku haboonayn, laakiin noolasha iyo bulshadu ayna ku soconaynin la'aanteed...

Hadaba waxaa macno la'aan ah in Ilaahay uu u abuuro aadamaha laba nooc (rag iyo dumar), kadibna la dhaho: waxaa waajib ah inay labada nooc ay wax kasta ka sinaadaan oo ay isku mid noqdaan.

Markii ay raga qaar ay hawaysteen waxa la siiyay dumarka oo xuquuq ah, haweenka qaarna ay hawaysteen waxa raga la siiyay ee xuquuq ah waxaa soo dagay aayado Qur'aan ah oo dhahaya: (ha hawaysanina wuxuu Eebe dheeraysiiyay qaarkiin qaarka kale, ragu waxay leeyihiin abaalgudka waxay shaqaysteen, dumarkuna waxay leeyihiin abaalgudka waxay shaqaysteen, Ilaahayna waydiista fadligiisa (dheeraadkiisa). (Al-Nisa: 32).

Raga iyo dumarka mid kasta wuxuu leeyahay astaamihiisa iyo hawlihiisa iyo maamuuskiisa, dhamaanna waxay ka shaqaynayaan siday ugaadhi lahaayeen raali ahaanshaha Eebe, sharciguna uma imaanin rag kaliya, ama dumarka kaliya, balse wuxuu u yimid danta bini-aadanka iyo danta qoyska iyo danta bulshada muslimka ah.




Umadaha badankood -gaar ahaan kuwa gaaray ilbaxnimo ah- waxay u arkaan in arinkan uu u baahanyahay nidaam iyo xeer maamula, si ayna noloshu isugu badalin duur (kayn) ama xero aan wax kalasooc ah u dhexaynin bini-aadanka iyo xayaawanka.



## Xidhiidhka ka dhexeeya ninka iyo haweenayda:

Dhaqamada iyo xeerarka nidaaminaya ama habaynaya xidhiidhka u dhexaysa ninka iyo haweenaydiisa waxay ka mid yihiin waxyaabaha ay bulshooyinka dunidu aad ugu kala tagsanyihiin laga bilaabo taariikhihii hore ilaa iyo maanta, ummad kastana qaab gooni ah ayay umaaraysaa arintaa, lamana koobi karo kala duwanaanshahaas, hasa yeeshee buugaagta taariikhda iyo cilmiga anthroboloojiga (cilmiga kahadla biniaadanka) ayaa nooga waramaya ummado aan dhib u arkin inay si buuxda isu qaawiyaan iyo fawdada galmada ee labka iyo dhadiga, iyo qolooyin kale oo naagta ku xidha biro ayagoo u cabsanaya, iyo kuwa kale oo raga qariya ama dada dumarkana aan dadin, ama jidhkooda qaybo ka mid ah qariya laakiin inta kale aan qarinin, iyo kuwa kale oo ay adagtahay in la soo koobo…

Umadaha badankood -gaar ahaan kuwa gaaray waxogaa ilbaxnimo ah- waxay u arkaan in arinkan uu u baahanyahay nidaam iyo xeer maamula, si ayna noloshu isugu badalin duur (kayn) ama xero aan wax kalasooc ah u dhexaynin bini-aadanka iyo xayaawanka.

## Xidhiidka u dhexeeya ninka iyo haweenayda islaamka dhexdiisa.

Xidhiidhka uu la leeyahay ninku haweenayda islaamka dhexdiisa ma aha mid dadku maskaxdooda ka keenaan oo ku kooban xili gooni ah ama goob gaar ah, balse waa nidaam dhamaystiran oo u suubada xilli kasta iyo goob kasta, Ilaahayna uu kusoo dajiyay Qur'aanka kariimka ah, rasuulka suuban ee Muxammad (CS) uu baray dadka.

Xidhiidhkaas qaabkiisa iyo xuduudkiisu wuu kala duwanyahay ayadoo loo eegayo booska ay haweenaydu ka joogto ninka, sida uu islaamku cadaynayo.

## Raga marka loo eego haweenayda waxay u qaybasmaaan Islaamka dhexdiisa qaybo kala duwan:

**1. Inuu yahay ninku ka qaba haweenayda:**

Ma jirto tilmaan ka xeeldheer sida uu u tilmaamay Qur'aanku xidhiidhka u dhexeeya labada isqaba, Ilaahay wuxuu ku tilmaamay inuu ninku u yahay dhar ama labis xaaskiisa, ayaduna ay ninkeeda u tahay labis, taasoo sawir cajiib ah ka bixinaysa xidhiidhka udhexeeya labada lamaane oo xaga nafta iyo jacaylka iyo jidhka ah, wuxuu yiri: (waxay haweenkunu idiin yihiin dhar (asturaad) idinkuna waxaad u tihiin iyaga dhar (asturaad). (Al-Baqar: 187).

**2. Inuu ninku u yahay maxram (qaraabo dhow):**

Waxaa looga jeedaa maxramka qof kasta oo ay xaaraan ka tahay inuu naagta guursado xaaraanimo joogto ah, qaraabonimada dhaw ee udhexaysa awgeed, waana 13 nooc oo raga qaraabada ah ka mid ah, sida aabaha, iyo awoowga, iyo wiilka (inanka), walaalka, adeerka, abtiga, wiilka walaalka ama walaasha, wiilkeeda wiikiisa, gabadheeda wiilkeeda, iyo kuwa kale, ...haweenaydu way ka hor muuqan kartaa qaraabadeeda maxramka u ah ayadoon xijaab buuxa aan qabin, laakiin dharka iska caadi ah qabta, laakiin aan qaawanayn.

**3. Inuu yahay nin qalaad oo naagta (ajnabi) ka ah:**

Waxaa looga jeedaa ninka qalaad ee ajnabiga ka ah naagta: nin kasta oo aan ka mid ahayn maxramkeeda horay loo xusay.

Islaamku wuxuu dajiyay xeerar iyo axkaam ku saabsan xidhiidhka ninka uu la leeyahay naagta qalaad (ajabnabiga ka ah), asagoo ilaalinaya sharafta xidhayana albaabada uu shaydaanku qofka uga soo galayo, Allihii bini-aadanka abuuray ayaa cid kasta ka og waxa usuubada, sida Qur'aanka ku timid: (ma waxaan wax ogayn Eebaha wax walba abuuray ee wax walba daalacan). (Al-mulk: 14).

### Muxuu Islaamku u jideeyay xijaabka markay haweenaydu hor joogto raga qalaad?

- Si ay ugu suurta gasho haweenayda inay sida u waangsan u gudato muhimadeeda noolasha iyo bulshada dhanka aqoonta iyo dhanka shaqaba, ayadoo isla markaa ilaashanaysa sharafteeda iyo dhawrsanaanteeda.
- In la yareeyo sababaha keena xumaanta iyo fidnada, si loo ilaaliyo anshaxa iyo wanaaga bulshada, dhanka kalena loo dhawro sharafta haweenayda.
- In lagu caawiyo raga eegaya haweenayda inay dhawrsadaan anshaxana ilaaliyaan, oo ay ula dhaqmaan haweenayda sida qof bini-aadan ah oo leh waxay leeyihiin oo aqoon iyo waaya aragnimo ah, oo ayna ula dhaqmin sida wax kiciya dareenka oo loogu talagalay in lagu madadaasho oo lagu raaxaysto oo kaliya.



## Xeerarka xidhiidhka u dhexaysa ninka iyo haweenayda ajnabiga ah:

**1. Indhaha oo la laabto:**

Ilaahay wuxuu faray raga iyo dumarka dhamaantood inay indhaha ka laabtaan oo ayna eegin waxa kicinaya shahwada,waayo kaasi waa jidka dhawrsashada iyo ilaalinta sharafta, indhaha oo la sii daayo oon xad loo samaynina waa jidka danbiyada iyo sinada, sida uu Alle Qur'aanka ku yiri: (waxaad ku dhahdaa mu'miniinta ha laabeen indhahooda (daymada reeban) hana dhawreen xubnahooda taranka, saasaa u wanaagsan, Eebana wuu ogyahay waxay samayn – waxaad ku dhahdaa (haweenka) mu'miniinta ah ha laabeen indhahooda, hana dhawreen xubnahooda taranka) (al-nuur: 30-31).

**2. In loo wada dhaqmo si aadaab iyo xushmo leh:**

Ninka iyo haweenaydu waxay uwada dhaqmayaan arimaha aqoonta iyo shaqada iyo wixii la mid ah si adab iyo xushmo ku dheehantahay, kana fog wax kasta oo kicinaya dareenka shahwada.


**3. Xijaabka:**

Wuxuu Ilaahay u jideeyay xijaabka haweenayda umana jidaynin ninka, waayo wuxuu Ilaahay ku siiyay haweenayda qurux iyo soojiidasho gaar u ah, taasoo ka dhigi karta mid fidnaysa ninka, ka badan inta uu asagu fidnayn karo ayada, sidaa awgeed waxaan arkaynaa laga bilaabo taariikhdii hore ilaa iyo maanta in badanaa loo adeegsado haweenayda shahwada ninka, laakiin taa lidkeed aysan ahayn, taasina waxaan manta si cad ugu arkaynaa warbaahinta kala duwan.

Xuduuda xijaabka ee islaamku waxaa weeye inay haweenaydu qariso jidhkeeda oo dhan markii laga reebo wajigeeda iyo labada calaacalood (baabacadood) raga qalaad marka ay hor joogto, sida uu Qur'aanku faray: (yaysan (haweenku) quruxdooda muujinin, wixii ka muuqda mooyee) (Al-nuur:31).



> Qaar badan oo ka mid ah kuwa xijaabka dhaleeceeya Waxay iska indha tirayaan in sawirka dumarka ee ugu wayn taariikhda – sida sawirada Maryama (eey ay haystaan- uu ka muuqdo xijaabku, wuxuuna aad ugu egyahay xijaabka muslimiinta.



# Dhaqanka Islaamka ee cuntada iyo cabida



Inta badan su'aalaha u horeeya ee uu soo bandhigayo qofka raba inuu islaamka wax ka ogaado waxaa weeye: maxay u xaaraameeyeen khamriga iyo doofaarka?

Inta badan su'aalaha u horeeya ee uu soo bandhigayo qofka raba inuu islaamka wax ka ogaado waxaa weeye: maxay u xaaraameeyeen khamriga iyo doofaarka?

Si aan ugu jawaabno arinkaa waxaa marka hore lagma maarmaan ah cadayn kooban oo muhiim ah:

Qur'aanku wuxuu muslimiinta u baneeyay dhamaan waxa dhulka guudkiisa laga helo si uu wax ugu qabsado, waxaana arinkaa qeexay aayad Qur'aan ah, oo sheegtay inuu Ilaahay noo abuuray dhamaan waxa dhulka laga helo si aan uga faaiidaysano. (Al-Baqara: 29).

Waxaana ka mid ah waxaa la inoo baneeyay cuntada iyo cabitaanka, dhamaantood waa wax banaan markii laga reebo in kooban oo uu Qur'aanku kasoo reebay xumaantooda iyo dhibka ay u gaysanayaan caafimaadka ama caqliga awgeed.

## Doofaarka:

Wuxuu Qur'aanka si cad u xusay inay xaaraan tahay in la cuno hilibka doofaarka, inkastoo aysan carabta xiliga ayna aqoonin doofaarka, daka qaarna way la yaabayaan xaaraamayntan oo way dhaleecaynayaan, ayadoo uuna gaar ku ahayn musliinta kaligood, balse sida la ogyahay ay yahuudu u arkaan xaaraan, taasina waxay ku cadahay kitaabka yuhuudda oo loo yaqaano (Al cahdu qadiim) ama (axdigaii hore) laakiin waxaa la yaabka leh waxaa weeye in culumaa'u-diin badan ay sugeen in doofaarku uu diinka kiristanka xaaraan ku yahay, ayagoo cuskanaya qoraalo cadcad oo ku sugan Baybalka ama Injiisha, balse dib ayaa laga badalay qoraaladaa, oo la dhalan gadiyay. Eeg: (injiisha marqis 5L11-13, mattaa 67, fariintii labaad ee bodros 2L22, luuqaa 15/11).

Maxaa diidaya inuu Ilaahay nagu imtixaamo reebitaanka wax ka mid ah waxyaabaha la cuno kadib markii uu noo baneeyay intiisa badan, si uu u jarribo iimaankeena iyo sida aan u qaadanayno amarkiisa, sida uu ugu imtixaamay Aadan (CS) xaaramaynta geed ka mid ah jgeedaha jannada kadib markii uu ubaneeyay macmacaanka janada?

> Maxaa diidaya inuu Ilaahay nagu imtixaamo ka reebitaanka wax ka mid ah waxyaabaha la cuno kadib markii uu noo baneeyay intiisa badan, si uu u Jirrabo iimaankeena iyo sida aan u qaadanayno amarkiisa, sida uu ugu imtixaamay Aadan (CS) xaaramaynta geed ka mid ah geedaha janada kadib markii uu ubaneeyay macmacaanka janada?





## Khamriga iyo aalkolada:


Waxaa ka mid ah hawlaha ugu waawayn ee dowladaha inay la dagaalamaan cudurada iyo xanuunada burburinaya noolasha aadamaha, iyo inay soo saaraan xeerar iyo nidaamyo adag oo lagu ilaalinayo caafimaadka dadka iyo noolashooda, hadii arintaa uu ku yimaado wax gaabis ahna waxay u horseedi qofka iyo bulshada cawaaqib xumo iyo waxyeelo balaaran.

Waxay tahay xogta naxdinta leh in sida ay caddanayaan baadhitaanada lagu kalsoonyahay, sida warbixinada ururka caafimaadka aduunka, iyo baadhitaan ay samaysay jaamacada okisfoord (Oxford) oo lagu baahiyay majalada (Nature) taariikhda (14 maarso 2012) Nature 483 275 iyo warbixinta ururka caafimaadka aduunka taariikhda 2011/2/11 tirada dadka ay khamridu disho sanad kasta ayaa ka badan tirade dadka u dhinta aydhiska iyo malaariyada iyo qaaxada oo la isku daray, iyo waxa ku dhow sadex jabaar dadka ku dhinta dhamaan dagaalada iyo gumaadka iyo argagixisada sanadkaa... waanatan tirokoobka uu sugay baadhitaankaa aan soo xusnay iyo warbixinta ururka caafimaadka aduunka.








Waxaa sanad kasta u dhinta khamriga iyo daa'imitaankiisa in ka badan labo malyan iyo badh dad ah, oo ay ka mid yihiin **320000 oo dhalinyaro ah oo da'doodu u dhaxayso 15-29 sano**, kuwaasoo ku nafwaayo dhamaan aduunka dacaladiisa sababo la xidhiidha khamriga awgood, taasina waxay dhantahay 9% dhamaan dhimashada sanadkaa ee laga diiwaangaliyay da'daas.



Cilmi baadhis maraykan ahna waxay muujisay in **700000 oo arday ay sanad** kasta uu weerar kaga yimaado arday kale oo khamriga sixun u cabsan.





Waxay muujisay warbixin tiifatiran oo la soo saaray sanadkii **2001 in 80% falalka rabshadaha ay dhalinyaradu** sameeyaan wadanka Astooniya ay xiriir la leedahay badsashada cabitaanka khamriga.




**Waxaa lagu tiriyaa khamriga** inuu ka danbeeyo afar meeloodow meel danbiyada dilka ee caalamka ka dhaca.



**Dhamaan cadaymaha iyo warbixinada ururka** caafimaadka aduunka waxay ugu baaqayaan dhamaan dawladaha inay soo saaraan xeerar iyo talaabooyin ad adag oo lagu yaraynayo ama lagu xakamaynayo musiibooyinkaas ay maalinkasta horseedayso khamrigu.



## Sanad kaliya ingiriiska kaligii:

- Waxaa dhacay hal malyan oo fal dambiyeed oo la xiriira khamriga, waxaana loo arkaa in wax ku dhow kalabadh danbiyadaas si guud ula xiriiraan khamriga sida ay u arkaan dadka dhibanayaasha ah.
- Waxaa la xiriira khamriga wax ku dhow 7 malyan oo xaaladood oo ay usoo gurmadaan adeegyada shilalka iyo gargaarka dagdaga ah ee isbitaalada, taasoo ku kacaysa lacag ku dhow halkii sano 650 malyan oo giniga ingiriiska ah, oo laga qaado dadka canshuurta bixiya.
- Guud ahaan waxaa lagu qiyaasaa dhamaan kharashka ku baxa danbiyada iyo rabsahadaha la xiriira khamriga taasoo laga qaado dadka canshuurta bixiya inta u dhexaysa 8 iyo 13 bilyan oo giniga ingiriiska ah sanad kasta.



### Qur'aanku muxuu ka qabaaa khamriga?




Ma sugin islaamku warbixinada ururka caafimaadka aduunka si uu u ogaado raadka uu khamrigu ku leeyahay qofka iyo bulshada ... waayo Eebihii abuuray bini-aadanka wuu ogyahay waxa hagaajinaya noolashiisa iyo bulshadiisa.

Islaamku wuxuu u yimid carabta oo xiligaa aad u jeclaa cabitaanka maandooriyaha, khamriga noocyadiisa kala duwanna wuxuu u ahaa waxa ugu wayn uguna qaalisan ee ay ku raaxaystaan, wayna isugu faani jireen, waxayna ku bixin jireen dhamaan waxa ay haystaan oo xoolo ah.

Qur'aankuna arintaa wuxuu ula tacaalay qaab ay ku dheehantahay xikmad iyo cadaalad marka uu u qiray in khamrigu uu leeyahay woxogaa faaiido ah iyo wax tar ah, waayo qofka cabaya wuxuu dareemayaa macaan iyo raaxo kooban oo ilowsiinaysa murugadiisa iyo walbahaarkiisa....laakiin raadka danbe iyo cawaaqibteeda aad bay u xuntahay, waxaana adag in la daweeyo raadadkeeda iyo saamaynteeda ay ku reebayso qofka iyo bulshada xaga dareenka iyo dhaqanka iyo caafimaadka, sida uu Qur'aanku leeyahay: (waxay ku waydiinayaan (nabiyow) khamriga iyo qamaarka, waxaad dhahdaa: waxaa ugu jira dadka danbi wayn iyo waxtar, danbigiisaana ka wayn waxtarkiisa) (Al-Baqara: 219).

Intaa kadib waxaa yimid in la iska reebo kahmriga oo lagu tiriyo shaqada shaydaanka kaasoo sababaya colaytan iyo isnac iyo in laga fogaado arimaha sarsare ee muhiimka ah, waxaana dadka Qur'aanka lagu waydiiyay (ma iska daynaysaan?) markaasay dheheen dadkii: waan daynay ...waan daynay, waxaana lagu shubay khamrigii jidadka magaaladii nabiga ee Madiina ayagoo u hogaansamaya amarka Ilaahay uu Qur'aanka ku xusay.



# Gafka iyo towbakeenka




## Falsafada

Falsafada gafka iyo saxnaanta Waxay ka mid tahay waxyaabaha muranka dhaliya ee ay diimaha qaar aaminsanyihiin. Diimahaasina way ku kala duwanyihiin qaabka ay ula dhaqmayaan gafka, danbiga iyo shalytada.

Wuxuuse islaamku si miisaaman u eegayaa xaalada bini-aadamka ee Ilaahay ku abuuray, una yeelay horseedayaasha khayrka iyo sharka, markaa islaamku ulama dhaqmayo bini-aadamka sida malag khayr lagu uumay oo aan gafaynin, balse wuxuu cadaynayaa in bini-aadam kasta uu yahay mid gaf badan, isla markaana wuxuu u xambaarinayaa mas'uuliyada go'aamadiisa iyo doorashadiisa, halkanuuna ka imanayaa mawqfika islaamku ka qabo gafka iyo tawbakeenka, kaasoo aynu ku soo koobi karno sidan soo socota;

- Waxaan Qur'aanka ku arkaynaa in danbigu uu yahay mid qofka kaligii khuseeya, towbadana sidoo kale, taasina waa arin cad oo madmadow ku jirin, ma aha danbigu mid qofka dusha ka saaran intaan la dhalin ka hor, balse qof kasta waxaa la dhali asagoon danbi lahayn gaf horena aan loo haysan, sidoo kale ma jiro qof iska leh xaqa danbi dhaafka oon Ilaahay ahayn, gafkii nabi aadam (Nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa mid asaga u gaar ah, wuxuuna si fudud ugaga badbaaday towbo keen toos ah, sidaasoo kale danbiga qof kasta oo caruurtiisa ka mid ahna waa mid asaga u gaar ah, jidkuna wuu u furanyahay towbo keen, arinkaan wuxuu qofk kasta ku dhiiragalinayaa inuu dadaal iyo isku day la yimaado oo uusan quusanin, waxuu qof kasta u xambaarinayaa danbigiisa, oo markaa qofna loo qaban mahayo qof kale danbigiis, kanina waa waxa ay nabiyadu kala yimaadeen Ilaahay, sida uu Qur'aanku noo sheegay: (miyaan loo waramin waxa ku sugan xaashiyihii Muuse iyo Ibraahim kii amarka Ilaahay fuliyay: inaysan naf qaadayn naf kale danbigeed, iyo inuusan qofna lahayn wax aan ahayn wuxuu shaqaystay, iyo in shaqadiisa la arki doono, ka dibna si buuxda loogu abaal marinayo) (Al-najm36-41).
- Tawbadkeenku wuxuu ka mid yahay cibaadooyinka waa wayn Ilaahay agtiisa, kumana gaar aha qof gooni ah, umana baahno meel gaar ah, iyo in laga hor qiro qof bini aadan ah, ama in la helo ogolaanshihiisa, balse waa cibaado udhexaysa Ilaahay iyo adoomihiisa, waxaana ka mid ah Ilaahay magacyadiisa iyo tilmaamihiisa Qur'aanka kusoo arooray: (Allaha tawbo aqbalka badan ee naxariista badan) (Allaha danbiga dhaafa tawbadana aqbala), Qur'aankuna wuxuu noo sheegayaa tilmaamaha kuwa Alle ka baqa ee janada galaya wuxuuna noo sugayaa in ay ku dheceen danbiyada qaar laakiin ay u dagdagaan tawbada danbi kasta ka dib, oo ay Alle waydiistaan danbi dhaaf (kuwa hadii ay sameeyaan xumaan ama ay ku gafaan naftooda Ilaahay xusa, oo danbi dhaaf waydiista, oo yaa danbiga dhaafa oon Ilaahay ahayn, oo aan kusii soconin waxay sameeyeen ayagoo og) (Aalu-cimraan:135).




> Tawbadkeenka – diinta Islaamka-uma baahno wax ka badan inuu qofku iska daayo danbiga, kana shalaayo falkiisii hore, isla markaana go›aansado inuusan u noqonin, hadii uu jiro xaq dad kale uu hayana uu qofkii lahaa u celiyo.

Tawbadkeenka – diinta islaamka-uma baahno wax ka badan inuu qofku iska daayo danbiga, kana shalaayo falkiisii hore, isla markaana go'aansado inuusan u noqonin, hadii uu jiro xaq dad kale uu hayana uu qofkii lahaa u celiyo, intaa ka dib hadii ay dhacdo inuu gafkii ku noqdo mar kale ma burayso tawbadiisii hore danbiyadii kuma soo noqonayaan, balse wuxuu la yimid danbi cusub markaa waxaa waajib ku aha inuu ka tawbad keeno mar kale.

Sidaa ayuu qofku ku noolaanayaa islaamka dhexdiisa xaalad isu dheelitirnaan u dhexaysa dadaalkiisa ku aadan wanaaga iyo toosnaanta iyo gafka oo laga fogaado, iyo garashadiisa dabeecadiisa bini-aadaminimo taasoo marar badan taagdaraynaysa, oo laga yaabo inay tubtii toosnayd ka baydho, sidaa owgeed waxaa laga rabaa inuu mar kasta ama xiliga uu firfircoonidiisa iyo ka cabsashadiisa ha ahaato ama xilliga uu gaabinayo ama gaf ka dhacayo ha ahaato waa inaysan jahadu ka dhumin, oo Ilaahay magan galaa, una noqdaa danbi dhaafna waydiistaa.

Halkan ayuu ka jiraa farqiga u dhexeeya dadka suuban iyo dadka kele, sida uu Qur'aanka cadaynayo, markuu noo sheegayo in farqiga dhabta ah uu yahay in dadka Ilaahay ka baqa hadii ay ku dhacaan xumaan ama macsi ay Ilaahay xusuusanyaan una noqonayaan, halka kuwa kale ay kusii soconayaan gafkooda ayagoon ku baraarugin ama waan toobin (Al-acraaf:201-202).

> Kama jiro Islaamka danbi qofka dusha ka saaran intuuna dhalanin kahor, balse qof kasta waxaa la dhali asagoon danbi lahayn gaf horena aan loo haysan.






# Diinka iyo caqliga



Dadka qaar waxay u malaynayaan inuu diinku ka hor imanayo caqliga iyo nidaamka cilmiga, waayo diinku – sida uu arko- waa isha khuraafaadka iyo sheeko baralayda, halka cilmiga iyo falsafadu ay yihiin jidka lagu gaadho aqoon habaysan oo noqon karta cilmi sugan, oo ay u dhantahay shuruuda cilmi baadhista iyo fikirka iyo tijaabada.... Markaan eegno aragtidan waxna way ku saxsantahay waxna way ku khaldantahay.

Dadka qaar waxay u malaynayaan inuu diinku ka hor imanayo caqliga iyo nidaamka cilmiga, waayo diinku – sida uu arko- waa isha khuraafaadka iyo sheeko baralayda, halka cilmiga iyo falsafadu ay yihiin jidka lagu gaadho aqoon habaysan oo noqon karta cilmi sugan, oo ay u dhantahay shuruuda cilmi baadhista iyo fikirka iyo tijaabada.... Markaan eegno aragtidan waxna way ku saxsantahay waxna way ku khaldantahay.



Waxay ku saxantahay in ay jiraan diimaha qaar ka hor imanay caqliga, waayo ilaha iyo kutubta diimahaas ayay ka buuxaan khuraafaad iyo caqiidooyin aan waxba ka jirin oo ka hor imanaya cilmiga saxda ah.

Waxayna aragtidaasi ku khaldantahay inay diimaha oo idil ay hal xukun siisay ayadoon eegin farqiga muhiimka ah ee u dhexeeya, gaar ahaan waxa ku saabsan: halka ay ka yimaadeen, waxay xambaarsanyihiin, manhajkooda, iyo waxa ay daliisahanayaan.



Qofkii daalacda Qur'aanka kariimka ah – waa kitaabka ugu wayn ee islaamka laga soo xigto- wuxuu si dhab ah u ogaanayaa inuu siiyay caqliga darajo ayna kula tartamaynin diin kale, umana baahno qofka Qur'aanka daalacanaya fiiro dheer si uu u ogaado inuu caqliga ku boorrinayo inuu fikiro, ilaa uu ku celceliyo su'aasha layaabida (miyaydaan caqliga adeegsanaynin?) in ka badan seddex iyo toban jeer.

> Uma baahno qofka Qur'aanka daalacanaya fiiro dheeri ah si uu u ogaado inuu Qur'aanku caqliga ku boorrinayo inuu fikiro.


## Sida uu Qur'aanku ugu boorinayo in caqliga la adeegsado waxay ka muqanaysaa arimo badan oo ay ka mid yihiin:

**1** **Qur'aanku wuxuu la hadlayaa qofka leh caqliga furan oo ka madax banaan isla waynida, cabsida iyo jahliga, wuxuuna u cuskanayaa inay waajib tahay Ilaahay in la rumeeyo adillo kala duwan oo ku dhisan caqliga, waxaana ka mid ah odhaahdiisan: (oo cid ayaga abuurtay ma jirto miyaa, mise ayagaa is abuuray, mise waxay abuureen cirarka iyo dhulka, arintu saa ma ehee ayagaan iimaan lahayn). (dhuur:35-36).**

**2** **Wuxuu Qur'aanku falanqaynayaa xujooyinka kuwa islaamka kasoo horjeeda, wuxuuna diidayaa odhaahyada aan lahayn cadayn iyo xujo, sida uu yiri: (waxaad ku dhahdaa: keena xujadiina hadaad run sheegaysaan) (Al-baqara:111).**

**3** **Wuxuu dhaleecaynayaa kuwaan kuwa aan caqligooda adeegsanaynin, wuxuuna ku tilmaamayaa inay yihiin sida kuwo aan dareen lahayn oo kale, waayo kama faaiidaysanayaan waxay arkayaan ooy maqlayaan si ay u qaataan go'aamo sax ah, sida uu yiri: (miyayna ku soconin dhulka oo ayna yeelanin qalbiyo oo wax ku gartaan, ama dhago ay wax ku maqlaan, indho beelka dhabta ah waa indho beelka ku dhaca qalbiyada ku sugan laabta) (Al-xaj:46).**

**4** **Wuxuu ka digay waxyaabaha xanibaya fikirka ee qofka ku iman kara, oo muuna ku Qur'aanku ku kaaftoomin inuu nagu booriyo inaan adeegsano dareemayasheena iyo caqliyadeena iyo inaan ixtiraamno, balse wuxuu nagu baraarujiyay waxyaabaha caqliga gafka u horseeda, waayo dabeecada biniaadanka waxaa kala jiidanaya khayrka iyo sharka, taasina waxay ka dhigi kartaa natiijadu uu gaadhayo mar marka qaar mid aan sax ahayn oo xaqa baalmarsan, ayadoo sababo kala duwan awgood sida: hunguri, cabsi, wax aan jirin ku hodmid, iwm.**



Qofka muslimka ah wuxuu aaminsanyahay inayna suuragal ahayn inay iska hor imaadaan abuurka Eebe (caqliga) iyo diintiisa uu dadka u jideeyay, hadaba maxaa looga cabsani su'aasha iyo in caqliga laga shaqaysiiyo?



**Waxyaabaha hor istaaga fikirka saxda ah sida uu Qur'aanku cadaynayo:**

- **Ku dayasho:** waxyaabaha la iska dhaxlo ee ku saabsan caqiidada iyo dhaqanka iyo caadooyinka fikirka ee khaldan waxay si wayn u saameeyaan habka garashada iyo fikirka taasoo keenaysa inay adkaato qofku inuu aqbalo xaqa oo uu ka tago waxa khaldan, oo waxaaba laga yaabaa inuuna maskaxdiisa ka shaqaysiinin gabi ahaanba asagoo ku andacoonaya in waxa uu aaminsanyahay uu yahay waxa uu caadaysatay ee lagu dhalay, sida uu Qur'aanku nooga waramayo dadka qaar marka uu u cadaado xaqa oo hayi raacnimadu ka hor istaagto raacitaankiisa: (hadii lagu dhaho raaca waxa Alle soo dajiyay waxay odhanayaan: mayee, waxaan raacaynaa waxaan ku aragnay aabayasheen) Ilaahay wuxuu yiri: (oo ma aabayaashood ayay raaacayaan xitaa hadii ayna cuskanaynin caqli iyo cilmi toona) (Al-baqara:170).
- **Madax adayg iyo isla wayni:** caqliga wuxuu garan karaa waxa saxda ah laakiinse wuu diidi inuu aqbalo oo uu u hogaansamo asagoo ilaashanaya waxa uu u arko maslaxadiisa ama sharaftiisa, ama xasad awgii ama liiditaan qofka xaqa la yimid, sida uu Ilaahay Qur'aanka nooga waramay dadka qaar ka mid ah: (waxay diideen xaqa ayagoo huba inuu xaq yahay, wax aan kibir iyo dulmi ahayn uma diidin) (Al-namal:14).
- **Aduunyo jacayl:** caqligu waxaa laga yaabaa inuu garto xaqa, laakiin uuna lahayn geesinimo uu ku raaco, waayo wuxuu ku dhex jiraa raaxo aduun, Qur'aanku wuxuu nooga waramay nin Ilaahay cilmi iyo aqoon siiyay oo mudnaa inuu ku dhaqmo cilmigiisa laakiin ka siibtay cilmigii oo raacay naftiisu waxay jeceshahay iyo maslaxadiisa dhow, taasina waxaa oogu wacan aduun jacayl ka indho tirtay inuu go'aanka saxda ah qaato (Al-acraaf:175-176).

Qur'aanku wuxuu biniaadamka ugu yeedhayaa markasta inuu ka shaqaysiiyo caqligiisa iyo su'aasha, iyo baadhitaanka iyo fikirka iyo inuu ku cibro qaato naftiisa iyo koonka iyo waxyaabuhuu Ilaahay abuuray asagoo isku xirin shuruudo ama fikrado uu horay iskaga dhaahiciyay.

Qofka su'aasha iyo fikirka ka baqa waa qof naftiisa ku qarsanaya wax ka hor imanaya caqliga, laakiin diinka xaqa ah wuxuu ka yimid Ilaahayga abuuray biniaadamka ee ugu deeqay nicmada caqliga, suurta galna ma aha inay iska hor yimaadaan abuurka Ilaahay (caqliga) iyo diinkiisa uu dadka u jideeyay, hadaba maxaa looga cabsani su'aasha iyo in caqliga laga shaqaysiiyo? (eebaa abuurida iyo amarkaba iska leh wax waynadaay (oo khayr batay) rabbiga caalamka) (Al-acraaf:54).

Qur'aanku wuxuu biniaadamka ugu yeedhayaa markasta inuu ka shaqaysiiyo caqligiisa iyo su'aasha, iyo baadhitaanka iyo fikirka iyo inuu ku cibro qaato naftiisa iyo koonka iyo waxyaabuhuu Ilaahay abuuray asagoo isku xirin shuruudo ama fikrado uu horay iskaga dhaahiciyay.



# Islaamku waa diinka nabadgalyada



Dadka qaar way yaabaan – waxa warbaahinta ku soo noqnoqanaya awgii- marka uu ogaado in nabadgaliyadu ay islaamka ku leedahay darajo wayn, qofka muslimka ah wuxuu ku celceliyaa erayga nabadgalyada (salaam) marar badan maalin kasta asagoo dareemaya macnihiisa.

S (Salaam) waa mid ka mid ah magacyada Ilaahay, janada aakhirana magacyadeeda waxaa ka mid ah (daaru salaam) ama guriga nabadgalyada, salaanta muslimiinta waxay ku bilaabataa ereyga nabadgalyada, salaada muslimiitana waxay ku dhamaataa ku celcelinta (salaam) ama nabadglyada labo jeer, waxaa soo dhan waxaa soo koobaya in magaca diinka laftiisu uu yahay (islaam), taasoo tusinaysa waxa ku jira ee macnaha nabadgalyada iyo xasiloonida.

Islaamku wuxuu noogu yeerayaa nabadgalyada iyo in la tixgaliyo xuquuqda xayawaanaadka ugu taagta daran, wuxuuna rasuulku Muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) noo sheegay in haweeneey ay naarta u gashay bisad awgeed, oo ay xidhay ilaa ay ka dhimato, ma ayna siinin cunto iyo cabitaan toona, ma ayna siidaynin si ay u cunto cayayaanka dhulka Muslim: 2242) iyo haweenay jidhkeeda ka ganacsata ay janada ku gashay xayawaanka Ey-ga oo ay waraabisay owgii (Bukhaari: 3280).

Sidaa ayuu islaamku ku samaynayaa tusaalooyinka iyo sharciyacada ugu quruxsan ee ku saabsan tixgalinta xuquuqda aadaamaha, si kasta oo ay ugu kala duwanyihiin diinka iyo ra'yiga, xitaa uu nabi muxammad (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) uu ugu goodiyay qofkii dulmiya qof aan muslim ahayn ama dhiba ama u xilsaara shaqo ka baxsan awoodiisa inuu noqon doono mid maalinta qiyaamo nabiga uu la doodo. (Abuu-Daawuud 3052).

> Nabi Muxammad (CS) wuxuu ugu goodiyay qofkii dulmiya qof aan muslim ahayn ama dhiba ama u xilsaara shaqo ka baxsan awoodiisa inuu maalinta qiyaamo nabiga uu ilaahay hortiisa ku qabsan doono.

Laakiin marka uu islaamku ku baaqayo in nabadgalyo lagula noolaado dadka kale waxaa weeye dhab ahaantii nabadgalyo sax ah oo garsoor ku salaysan taasoo siinaysa qof kasta oo xaq leh xaqiisa, kana celinaysa qofka gardaran gardaradiisa, mana aha nabadgalyo been iyo dhagar ah taasoo siinaysa tuuga wuxuu xaday kadibna ku raaligalinaysa qofkii guriga lahaa lacag yar.

Dad badan waxay adeegsadaan saxaafada iyo warbaahinta si ay u gadaan aragtidooda, dad yar ayaana isku taxalujiya baadhitaanka xaqiiqada ayagoo iska dhaga tiraya xayisiiska warbaahinta si ay uga raadiyaan xogta ilaheeda saxda ah, oo ay ugaadhaan aragti hufan oo wax ku ool ah.

**Waxaana halkan kuugu soo gudbinaynaa xogo dhab ah si loogu fiirsado:**

> Dad yar ayaa isku taxalujiya baadhitaanka xaqiiqada ayagoo iska dhaga tiraya xayaysiiska warbaahinta si ay uga raadiyaan xogta ilaheeda saxda ah, oo ay u gaadhaan aragti hufan oo wax ku ool ah.



## Islaamku waa diinta faafitaankeedu ugu dhaqso badanyahay maanta:

Islaamku wuxuu manta ugu faafayaa si aad u dhakso badan dunida dacaladeeda: maraykan, yurub, afrika iyo aasiya, sidaa waxaa yidhi xarunta baadhitaanada diimaha (PEW) (pewresearch.org).

Wuxuu islaamku sidaa dhakhsaha badan ugu fidayaa ayadoo xiligan ay awooda muslimiintu liidato oo ay warbaahinta caalamiga ah ay ku dadaalayso inay foolxumayso sumcada islaamka ayadoo adeegsanaysa xogo iyo warar aan sax ahayn, muujinaysana tusaalayaal xun oo aan islaamka xidhiidh la lahayn, hadaba faafitaanka islaamka ma wuxuu ku yimid dadka oo lagu qasbo mise dadka ku qancidooda iyo ikhtiyaarkooda?

Arinta dhabta ah ee uu arkayo qof kasta oo xog ogaal ah waxaa weeye in tixgalinta muslimiinta xuquuqda dadka kale iyo dhaqamadooda ay raad wayn ku yeelatay dadkaas naftooda iyo inay soo galaan diinkan, taasina ma aha waxay muslimiinta gallad ku leeyihiin, balse waa hirgalinta iyo camalfalka amarka uu ilaaahay ku bixiyay Qur'aanka si cad marka uu yiri (SW): (ma jiro diinka oo la isku qasbo, way kala soocmeen hanuunka iyo baadinimada) (Al-Baqara: 256).

## Dadka miyaa lagu qasbay inay galaan diinka Islaamka?


In badan ayuu bini-aadanku adeegsaday awooda si uu u meelmariyo ra'yigiisa iyo maamulkiisa iyo hirgalinta danihiisa, taariikhdana waxay ka buuxdaa tusaalayaasha arinkaas, oo ay sameeyeen qaybo ka mid dad haysta diimo kala duwan.

Tusaala ahaan taariikhdu waxay cadaynaysaa in xasuuq ba'an lagu sameeyay dadkii deegaanka asalka ahaa xiligii ay soo gaadheen dhulkooda cusub guumaystayaashii, ilaa uu ku tilmaamo baadarigii isbaaniga ahaa Bartolomede de Las Casas kadib markii uu arkay xaaqaas odhaahdiisan; "ayagu mayna u arkaynin dadka deegaanka bini-aadan, balse waxa u arkayeen inay ka liitaan xitaa xoolaha".

A Brief Account of the Destruction of the Indies by Bartolome de las Casas (Jan 1, 2009

## Muslimiintu maxay sameeyeen markii ay xukumeen wadamo cusub?

## Muslimiintu waxay xukumeen Andalus 8 qarni:



Muslimiintu waxay xukumeen Ondolos (isbayn) 781 sano laga bilaabo sanadkii 711- ilaa 1492, waxyna xarun u noqotay ilbaxnimada caalamiga ah, lagumana qasbin hal qof oo kiristan ah inuu islaamo, balse waxaa loo ilaaliyay xuquuqdooda, waxaana sare u kacay ganacsigoodii iyo darajada ay ku leeyihiin dawlada, muslimiintuna waxay ka dul qaadeen yahuuda halkaa ku noolayd dulmigii lagu hayay ka hor inatyna islaamku dalkaa furin, taariikhdana waxaa ka buuxa xogahaas.

Markii ay ka guulaysteen Ezabila iyo Farnandis muslimiinta joogay isbayn, waxaa la mamnuucay dhamaan muuqaalada islaamka, waxaana la sameeyay maxkamado milatari si loo ciqaabo qofka ay sugnaato inuu haysto diinkiisa islaamka xitaa hadii uu qarsanayo!


Waa la cayriyay muslimiintii waana laga barakiciyay guryahooda, laakiin arinka la yaabka leh waxaa weeye in markii muslimiinta laga eryay Ondolos waxaa lala eryay yahuuda, oo waxay u raaceen muslimiinta wadamada islaamka, halkaas ooy ka heleen hoy nabad galyo ah iyo nolol wanaagsan.

## Muslimiintu waxay xukumeen Masar in ka badan 1400 oo sano waxayna u ilaaliyeen masixiiyiinta masar xuquuqdooda:




Muslimuuntu waxay xukumeen Masar laga bilaabo bilowgii islaamka markii uu furay Camar-Bin Caas oo ahaa mid ka mid ah asxaabtii rasuulkii Ilaahay, muslimuunta mayna u ilaalinin masiixiyiinta kaliya diinkooda iyo kaniisadahooda, balse waxay ka badbaadiyeen cabudhinta iyo ciqaabta ay kala kulmi jireen roomaanka, taasoo ay sabab u ahayd mad-habkooda kala duwan ayagoo ka midaysan diinka, masiixiyiintii waxaa usoo laabatay xoriyada diinkooda iyo cibaadadooda laga bilaabo waqtigaas, hadana waxay tira ahaan gaadahayaan manta in ka badan 5 malyan oo qof.

## Muslimiintu waxay xukumeen hindiya ku dhawaad kun sano, 80% dadka ku nool hindiyana muslimiin ma aha:



Muslimiintu waxay xukumeen qaarada hindiya mudo ku dhow kun sano, waxayna u ilaaliyeen dadka diimaha kala duwan leh xuquuqdooda iyo cibaadooyinkooda, waxayna ka qaadeen dulmiga diimaha la cabudhin jiray, dhamaan taariikhyahanadu waxay isku raacsanyihiin in islaamka xoog loogu fidinin hindiya, qofnana aan lagu qasbin inuu islaamka galo.

## Wadanka islaamka ugu wayn islaamku wuxuu ku galay dagaal la'aan iyo ciidan la'aan:



Waa Indunuusiya oo ah wadanka oogu tirada badan muslimiinta, waayo dadka ku nool waxay ka badanyihiin 250 malyan oo 87% ay yihiin muslimiin, islaamku wuxuu ku galay akhlaaqda ganacsatada muslimiinta qarnigiii lixaad ee hijriga, mana uusan gaadhin hal ciidan, wax dhiig ahna kuma daadan, balse wuxuu dhiig ku daatay ka dib markii ay soo galeen wadankaas ciidamadii guumastihii burtaqiiska, kadibna holandiiska, kadibna ingiriiska.



# Islaamka iyo sida ay udhqmaan muslimiinta qaar

Waa maxay is burinta ama is daba markan naxdinta leh? Waa weedh dadka qaar ay ka dhawaajiyaan marka ay ogaadaan dhabta shareecada islaamka taasoo dadka ugu baaqaysa dhaqanka suuban, iyo in dhulka la camiro, oo aadamaha la anfaco, oo nabadgalyada lagu fidiyo dadka dhexdooda, ka dibna ay arkayaan dad islaamka ku abtirsanaya hadana aad uga fog ku dhaqankiisa. Hadaba suuragal ma tahay inay kuwaasi yihiin kuwa raacsan diinta saxda ah?

**Waa maxay is burinta ama is daba markan naxdinta leh? Waa weedh dadka qaar ay ka dhawaajiyaan marka ay ogaadaan dhabta shareecada islaamka taasoo dadka ugu baaqaysa dhaqanka suuban, iyo in dhulka la camiro, oo aadamaha la anfaco, oo nabadgalyada lagu fidiyo dadka dhexdooda, ka dibna ay arkayaan dad islaamka ku abtirsanaya hadana aad uga fog ku dhaqnkiisa. Hadaba suuragal ma tahay inay kuwaasi yihiin kuwa raacsan diinta saxda ah?**

## Runtii arinkan waa wax lagu wareero, una baahan in si dagan loogu fakaro dhincayadan soo socda:

- Ma aha qof kasta oo ku abtirsada islaamka, ama lagu dhalay islaamka muslim ku dhaqma dhamaan waxay diintu farayso, waxaan meel kasta ku arkaynaa gaabis badan, iyo baydhitaan laga baydhay tubtii islaamka iyo tilmaamihiisii, muslimiintana waxaa ka mid ah qaar aan ka aqoon islaamka waxaan ka ahayn magiciisa.
- Marna suura gal ma aha in loo tiiriyo khaladaadka dadka diimahooda, oo lama dhihi karo: xadgudubkii uu Hitler gaystay waxaa sababay diintiisa, amaba diinta kiristanka ayaa ku baaqaysa xadgudubka, waayo Hitler wuxuu ahaa kiristan, ama diin la'aanta waxaa ka dhasha in dadka la gumaado, waayo Joosif Istaaliin wuxuu dilay tobanaan milyan asagoo bilaa diin ah….waxaasoo idil waa eedayn ka fog cadaalada iyo dhabta.

> Marna suuragal ma aha in loo tiiriyo khaladaadka dadka diimahooda iyo madaahibtooda.

- Waxaa jira dad tusaale u noqday islaamka oo la isku raacay, sida quruxdasan ee ay islaamka nuxurkiisa ugu dhaqmayaan, dadkaasi waxay sidoo kale tusaale u yihiin aqoonta, nabad galyada, iyo horumarka ay dunida u keeneen, sida ay taariikhda caalamku cadaynayso, laga bilaabo hindiya dhanka bari ilaa isbayn dhanka galbeed, ayay tusaalayaashaas ka muuqdeen, ilaa iminkana raadkoodii waxbaa ka sii bidhaamaya, sidoo kale waxaa la heli tusaalayaal ifafaalo fiican leh oo ka soo baxaya dowladaha tubta horumarka ujaanqaaday, iyo waliba tusaalayaal kale oo ku baahsan dunida dacaladeeda kuwaasoo ku horeeya laamaha aqoonta ee kala duwan.
- Ma jiro qof diidaya waxyaabaha saxda ah ee cilmiga caafimaadka ee casriga ah noo sheegayo, isla markaana naftiisa ka ilaalinaya dawada, asagoo ku andacoonaya inuu garanayo dhakhaatiir xun, mana jiro qof la dagaalamaya waxbarashada, oo u diidaya ubadkiisa, asagoo ku doodaya inuu garanayo iskuulo ama macalimiin meel kaga dhacday shaqadan sharafta leh, hadaba waxaa in la eego ay tahay waa arinka dhabtiisa ee ma aha in la eego dadka khaldan ee ku abtirsada.

Waxaa la yaab leh in aydoo islaamka cadawgiisa iyo kuwa ku abtirsada qaarkood ay ku hayaan weerar ba'an oo lagu xumaynayo muuqaalkiisa, ay hadana dad badani ay wali arkayaan wajiga saxda ah ee islaamku leeyahay, sidaa awgeed dad baa mar kasta kasoo islaama wadamada caalamka oo idil.

> Ma jiro qof la dagaalamaya waxbarashada, oo u diidaya ubadkiisa inay wax bartaan, asagoo ku doodaya inuu garanayo iskuulo ama macalimiin meel kaga dhacday shaqadan sharafta leh



## Dhinac cusub

Imise jeer ayaad ka labalabaysay inaaad qaadato go'aan ood ka faaidaysato fursad kuu dan ah, ilaa maantana aad naftaada ku canaananaysaa labalabayntaas.

Maamuuska ugu wayn ee bini—aadanka waa xornimadiisa iyo awoodiisa inuu qaato go'aan ay dantiisu ku jirto asagoon cabsanaynin ama sakitinaynin.

Hadii uu yahay qofka oo go'aankiisa ku sugnaada marka ay soo foodsaarto dhibaatooyin ama mushkilado iyo caqabado geesinimo lagu amaano laguna tixgaliyo qofkii sameeya, geesinimada go'aan qaadashada hadii uu u arko dantiisa iyo geesinimada qiritaanka khaladka hadii uu xaqu u cadaado ayaa in badan kasii wayn arinkaa, waayo arinkaasi waa geesinimo iyo guul uu kaga adkaaday kibirika nafta iyo isla waynanka, taasoo uu dib raadkeeda uga helayo nafiisa iyo shakhsiyadiisa.

Sida aad naftaada usiisay fursad aad ku baranayso astaamaha islaamka adigoo ka xiganaya ilihiisa ha iska hakranin inaad ku fikirto ood u fiirsato waxaad akhrisay.

Hadii marka ay kuu muuqato bilicda diinkan iyo quruxdiisa, oo aad u baahantahay inaad sii baadho ood raadiso xaqiiqada islaamka iyo qiimahiisa waxaad heli kartaa inaad samayso wax akhris iyo daalacasho iyo dood cilmiyeed iyo waydiin, laakiin waa inaad ku eegtaa il kale iyo dhinac ka duwan kii hore....







Waxaa sharaf noo ah inaad dhamaystirto akhriska buuga, waxaana filaynaa inuu kuu horseeday su'aalo iyo fikrado aad ku waafaqsantahay ama aad kaga soo horjeedo, waxaana farxad noo ah inaan maqalo ra'yigaaga ama su'aashaada ama waxaad ka qabto buugan, waxaana kuu ballanqaadaynaa inaan siino waxaad noosoo gudbiso danayn gaar ah.

Si aad u hesho xogo kale oo ku saabsan Islaamka:

LAUNCHING
CURiOSiTY
JUST SCAN IT.!!

THISISLAM.net

Nala wadaag tajribadaada iyo waxa aad ogtahay

info@modern-guide.com

SOMALI







- Miyaadan danaynaynin inaad sawirka dhabta ah ka qaadato diinta inta ba Loogaga doodda badanyahay warbaahinta?...

- Soo ma haboono inaad si qoto dheer u ogaato mid ka mid ah diimaha oogu faafitaanka badan, dadkuna si dagdag ah u galaan, sida ay cadaynayaan tirakoobyo caalami ah…

- Miyaadan xiisaynaynin inaad wax ka ogaato dhaqamada dadka kale iyo waxyaabaha ay ka aaminsanyihiin noolasha iyo diinta iyo dunida nagu hareeraysan?....

- Naftaada ma siin kartaa fursad si aad uga hesho xog sugan diinta islaamka, ayadoo laga qaadanayo xogtaas ilo sax ah, dabadeedna aad u bandhigto xogtaas arigtadaada iyo caqligaaga?...

**Hadii aad arinkaa u aragto muhiim ama mid xiise leh, buugani wuxuu kugu caawin karaa waxaad rabto.**

9 786030 315055

LAUNCHING CURiOSiTY JUST SCAN IT.!!

MODERN GUIDE

THIS IS ISLAM

THISISLAM.info